# QIIMEYN DHAQAN IYO QADARIN JACAYL



W.Q. C/raxmaan C/kariim Xuseen
(MALLA)

# NAAGI JACEYLKAAGA BAR BAA LA SIIYAA




W.Q. C/raxmaan C/kariim Xuseen

(MALLA)

Buuggan lama daabacan karo,lamana tarjumi karo ayadoon ogolaasho laga helin qoraha Buugga.

Xuquuqda waxay u dhowrsan tahay Qoraha.

DAABACAADDII KOOWAAD
MUQDISHO JUNE 1987.

Maandeeq ma filaynin in ay mar kale nolosha ku kulmayaan Maryama. Maryama Luul waxay ahayd Marwo ilaah qurux ku manaystay, Maal - Qabeeno ayaa ku tartamay Guurkeeda. Meherkeeduna ma sahlanayn. Markii ay tiri anigu ma aqaan Masayr iyo nin baa Maya yaqaan Dumar baa la murmay oo ka diiday Middaas. Diiriye Jaakoole, oo ahaa ninkeeda ma moogayn qudhiisu inuu ku jiro midig haween, Laakiin is- Maandhaaf dhacay Maalin baa wuxuu dhaliyey Murug, Maskax Waayeel oo la deganayd Meel baa ka soo maaxatay murtida ah " Naagi Jacaylkaaga Bar baa la siiyaa", ka dib shil baa dhacay, sheekadiina way is bedeshay !!!

## QAYBTA KOOWAAD

Saacad weyn oo ku dheggan meel ku aadan wejiga rakaabka barta dhexe ee muraayadda weyn Baabuurka korkeeda sare ayaa waxay tilmaameysaa sideedii aroornimo oo shan iyo labaatan mirir la' waana Baskii labaad ee u soo fariista magaalada Baydhabo barxadda weyn ee Baabuurtu ay ka baxaan ee Ceel-Gaab, xaaladda jawiga Magaalada aad buu u wanaagsan yahay ma kulula mana qabooba ee waa caadi.

Mahad wuxuu fadhiyaa kursiga koowaad kuraasta hore ee dhanka bidix, Baskuna waa Borosaani afkiisa hore wuxuu ku aadan yahay dhanka qorax ka soo baxa.

Qiyaastii kala badhoo badh ayaa saaran rakaabka Baabuurka. Mahad oo ka muuqata farxad ayaa hadba la qooraarsanaya Rakaabka sida deggan ee isdabajoogga ah ugu soo qulqulaya Baabuurka isagoo jecel in uu si dhaqsi ah u buuxsamo Baabuurka dabadeedna ay dhaqaaqaan. Mahad ayaa ishiisu waxa ay ku dhacdey gabadh dheer oo cas oo xidhan guntiinad madow iyo garbasaar cad oo barbara leh oo ay soo istaagtoy ilinka Baabuurka oo hadana dib u noqotey.

Aragtida gabadhani ayaa si aad ah wax uga bedeshey xaaladda deganaashaha ee maskaxdiisa,waayo waxay si aad ah u soo jiidatey dareenkiisa wuxuuna si xiiso badan isugu diyaariyey in uu daawado gabadhani mar labaad. Inan gaaban oo xoog badan oo xidhan surwaal Jiinis ah iyo Finaanad gacmo dheer ah oo suun dhexda ku xidhan gacanta midigna ku sita boorso madow oo samsanayt ah sawirka aragtidiisa kuugu muuqanaya in uu meel sare ka shaqeeyo ayaa ilinka soo istaagey isna dib ayuu u noqdey!!! Mahad oo niyadiisa ku leh waa ya bee maxay la noqnoqonayaan mey soo fuulaan ayaa mar la aad u soo muuqatey gabadhii uu maanka ku hayey.'

Dhawaaq cod xagga dambe oga yimid awgii ayey u j satey waxayna la hadashey nin uu mahad ula muuqdey in ahaa Kaarigii Gaariga,ka dibna si tartiib ah ayey u s fuushey gaariga goortii ay la soo simantey kursigii u ku fadhiyey Mahad geeskiisa midig oo fadhi ka banaanaa ayey talaabadeeda hakisey oo ay is yara taagtey.

Mahad wuxuu milicsadey quruxdeeda wuxuuna maska sa ku sawirey muuqaalkeeda guud. Waxay ahayd gabadh d ilaa xad jirkeedu uu dhisan yahay siman yahay laakiin aasi aan u sii hilib badnayn ,qoor dheer,af madow,ilko



San toosan waa indho deeraley waxay leedahay midab dhalaala timo jilicsan iyo weji furan waxayna xidhan tahay guntiinad madow oo le'eg jirkeeda iyo garbbasaar cad oo barabaro leh kuna filan in uu qariyo qaarkeeda hore, Runtii ma ahayn dharka ay xirnayd dhar sidaasi u sii qaalisan gabdho badan oo xidhan dhar noocaas ah ayaa dhooban oo aad ku arki kartaa suuq kasta oo ku yaala Magaalada Muqdisho laakiin markaan arkey in ay iyada si aad ah oo aan la qiyaasi karin ugu qurux badan tahay dharkani ayna kaga qurux badan tahay gabdhihii la wadaagey xirashada dharkani ayaa waxay dhalisey in aan isweydiiyo su'aasha ah ileyn jir habdhis qurux wanaagsan baa dhar quruxdiisa soo bixiya. Anigoo weli ku mashquulsan qiimeynta iyo qadarinta quruxdeeda ayaa waxaa dhegahayga ku soo dhacay cod khafiif ah oo la igu leeyahay aboowe halkan mala fadhiyaa iyadoo far ku tilmaameysa kursigii ka banaanaa barbarkeyga bidix markiiba intaan ka sigtey oo aan isku hagaajiyey halkeygii baan ku iri maya abaayo fariiso oo ku soo dhowow goortii ay salka dhigatey kursigii bey ayadoon isoo eegin igu tiri mahadsanid anigana adigaa

mudan baan ugu jawaab celiyey. Runtii gabadhani waxay ahayd gabadh ruux kastoo wax garad ah si dhaqsi ah u fahmayo in ay tahay mid edeb iyo asluub badan xishoodkuna weheliyo,intaas aan soo sheegey oo dhan waxaad moodaa in ay wejigeeda ku qoran yihiin,da'deeduna ma dhaafsanayn inta u dhexeysa sideed iyo toban ilaa kow iyo labaatan jir waxay lahayd maskax iyo qalbi deggan farxad iyo xasilooni bey dhex dabaalanaysey. Waxaan fahmey durbadiiba in ay tahay dalxiisad u daawasho tageysa degmooyinka ku nool eheladeeda iyo asxaabteeda aniguse daqiiqadii ay ila soo deristey ayaan dareemey culeys jirka iyo qalbiga ah iyo in dareemayaasha jirkeyga ay qabanayaan shaqo ka badan midoodii caadiga ahayd taasoo dhalisey in goortaan haaliyoo hadal is jiraahdaba xigmadaha qalbigeyga uu ka dalbaayo maskaxdeyda markii ay dareemayaasha jirkeyga si degdeg siino leh u soo dardaarshaan in dibnihii iyo carabkii ay la dagaalamaan oo ay u diidaan hadalkii anna goor walba candhuuftii hadba dib u liqaya waa amakaak iyo yaab!!! Kaarigi Gaariga ayaa wuxuu ku amrayaa in uu ka dego gaariga in yar oo ku dhex iibsanayey nacnac iyo sigaar wuxuuna le



yahay ka deg gaariga wuu dhaqaaqayaa, isagoo sii degaya ayaa inantii i ag fadhidey ku tiri nacnacle, goortii uu soo jeestey bey ku tiri maastiko.gacan toban shilin ku jirta bey u dhiibtey oo laba faroodna ay taagan yihiin goortaan arkey gacanteeda oo la soo laabanaysa laba xanjo oo banaana ah iyo dhowr shilimaad baan sidii anigoo dareensan wuxuu noqon doono ficilkeedii labaad, ayaan waxaan u jeestey dhankeygii midig oo iga xigtey muraayadda daaqadda Baabuurka Daaqadaasoo aan si sahlan uga daawanayey dadweyno safraya,wax iibsanaya,iyo Baabuur fara badan oo dhexdaadsanaa barxadda weyn ee Ceel-Gaab anigoo ku dhexjira ismaaweelinteydaasi ayaa waxaan geeska isheyda bidix ka arkey in ay gacan igu soo taagan tahay markaan si toos ah aan u soo jeestey waa gacan maastiko lagu hayo oo ah gabadhii ila fadhidey,waxaan arkaaba waa Maastiko iyo weji faraxsan oo qosol xishood qariyey leh oo aan la jirin cod iyo hadal sida:- waa maastiko abcowe ma ku siiyaa ma rabtaa iyo hoo midna waxaan si hakrasho lahayn oga qaatey Maastikadii waana u mahad celiyey.

Markii ay la noqotey gacanteeda ayaa waxaa xageeda iga soo carfey Barfuun ama udug raqiis ah oo aan u ma leeyey in uu ahaa nooca loo yaqaan(Malezia) oo weliba caraftiisu ay meel fog tahay.

Baskii wuu dhaqaaqey nin da' ah oo fadhiya meel naga dambeysa oo kuraasta dhexe ah ayaa wuxuu yiri Faataxo Faataxo Alla hanagu nabad geeyo meesha aan ku socono dadka qaarkii aamiin intey yiraahdeen bey iska aamuseen qaarkoodna waxay bilaabeen in ay Faataxo akhriyaan. Saacad Kaasiyo ah oo ay u xidhnayd gabadhii ila fadhidey ayaa waxay sheegeysaa sideedii iyo badhkii aroornimo 45 daqiiqo ayaa ka soo war eegtey inta ay gabadhani ila fadhido anigana markan waxaad moodaa iney culeyskii iyo cadaadiskii xagga jirka aan ka qabey ay iga yara degeen laakiin waxaa la yaab ah in aan weli helin kalsooni buuxda ee aan kula hadlo boqoradani oo sida aadka ah maskaxdeyda u soo jiidatey laakiin waa ii nacasnimo hadii ay sidan igag baxsato iyadoo xataa la socon in ay naftoyda wax dare nsiisey oo weliba qurundeedan qiimaha leh iyo asluubt dan qadarinta mudan in ay kicin karaan oo ay qalqal ge lin karaan doob kasta qalbigiisa,kuna abuuri karaan



masoyr gaashaanti kasta oo guur doon ah,midda kale sheeko gaaban oo aan hadda la yeesho ayaa waxay ii suurto gelin kartaa in ay dhaliso fursad is barasho waarta. Hadaba waxaan is weydiiyey halkaan hadal oga bilaabi lahaa laakiin markaan in yar maskaxdeyda ka shaqeysiiyey ka dib ayaan ku iri gaarigan socodkiisa hadda aad buu u wanaagsan yahay hadii uu sidan ku socdo dhaqsi buu noo geynayaa meeshaan u socono intey i soo fiirisay bey tiri haa socodkiisa wuu wanaagsan yahay laakiin meeqa saac buu u socon karaa ilaa Baydhabo,markaasaa sidii anigoo wax qiyaasaya intaan wax yar madaxa kor u taagey baan ku iri afar saac ilaa shan sacadood waxay eegtey saacadeeda anigana intaan isha ku xadey saacadeeda ayaan ku iri 1:00 ama 1:30 duhurnimo ayaad ku aadan tihiin Magaalada Baydhabo intey si aan caadi ahayn ii soo fiirisey bey igu tiri oo adigana,aniga waxaan ku socdaa Magaalada la yiraahdo B/Hakaba oo ku taala meel Baydhabo agteeda ah baan ku iri,goortaasey la soo boodey haa B/Hakabo waan maqley "Hakaba banaanoheo midii la yiri soo ma aha,markaasaa anigoo faraxsan ku iri Hakabo iyo halkii lagu balamey

waad maqashey soo ma aha intey si aad ah u qososhey bey igu tiri aboowee adiga meesha miyaad deggan tahay maya runtii anigu meesha ma deggani laakiin dad baa ii deggan oo waan soo booqanayaa.

Markaan in yar kala aamusnayn baan ku iri adiga Muqdisha miyaad ku nooshahay haa bey iigu jawaabtey xaafadee in aan iraahdo ayaan damcay laakiinse waan ka wareegtey fikradaasi waxaan ku iri safarka dadku wey isku bartaan ee walaal adiga magacaa intey wax yar iga aamusnaatoy sidii iyadoo maskaxdeeda kala tashaneysa in ay magaceeda ii sheegi karto iyo in kale ayaa markii dambe igu tiri magacayga waxaa la yiraahdaa Maandeeq anna waxaan ku iri waxaa la i yiraahdaa Mahad ee barasho wanaagsan.

Qaylo labadeenaba si aad ah nooga naxisey ayaa waxa ay ka soo yeertoy xagga dambe waa islaan duq ah oo fadhida kursiga naga dambeeya oo weliba ah midka aniga igu aadan waxayna leedahay hoogayey ba'ayey calaacalkeeda iyooohinteeda ayaa waxay ... soo jeediyeen dareenkii idil ahaan dadweynihii rakaabka ahaa ee saarnaa gaariga. Dad badan ayaa mar keliya ka wada boodeen kuraastii ay ku fadhiyeen waxayna si



naxariis leh u weydiiyeen islaantii duqda ahayd masiibada la soo deristey iyo waxa sida wadna qabashada leh oga dhawaajiyey, laakiin ilaa iyo muddo laba daqiiqo ku dhowaad ah ayey diidey in ay wax jawaab ah bixiso oo ay u sheegto dadka mushkiladda ku soo korodhey. Dadkii kuraasta dambe fadhiyey oo dhan wey sara joogsadeen waxayna indho buurbuuran maskax yaaban iyo qalbi murugsan ku soo eegayaan halka ay qayladu ka soo yeertey markani dadkii dhexdoodii ayaa muran ka dilaacay, qaarbaa waxay yiraahdeen waxaa laga yaabaa in uu Bahal qaniiney, qaar kale ayaa yiri maya maya Bahal ma qaniinin ee waxaa laga yaabaa in ay soo xusuusatey arimo hore oo murugo leh kuwo kale ayaa ka diidey oo yiri war waxaasoo dhan ma aha ee waxaa laga yabaa in ay mushkilad meel kale ka haysato oo si wanaagsan ha loo weydiiyo.

Gabar oo kuraasta ayada ka dambeysey fadhidey ayaa laga codsadey in ay iyada u weydiiso si tartiib ah oo naxariisi ay ku dheehan tahay. Gabadhiibaa intey ku foorarsatey duqdii ood naxariisleh ku tiri ayeeye maxaa kugu dhacay markaasaa duqdiina ku soo

qaylisey Alla kun shilin baa iga maqaney,goortaasaa gabadhii intey sara joogsatey cod aad u sareeya ku tiri kun shilin baa iga maqan bey tiri!! Duqdii baa hadalkeeda sii wadatey oo cod boohin ku dhoehan ku tiri toban warqadood oo madmadow oo boqolboqol ah bey ahaayeen,markaasaa hadalkeeda ku soo gabogabeysey Alla hoogayey! Alla ba'ayey wiilkayga igu soo sagootiyey ee guri baan ku hagaajisan lahaa Alla!!! Calaacalkeedaasi waxuu wadno qabad iyo beer xanuun ku noqdey cid kastoo jirkeeda danqanayo oo la socotey gaariga.

Laba nin oo fadhiyeen meel wadaha baabuurka agtiisa ah ayaa waxaa ay ka codsadeen waduhu in uu gaariga joojiyo dabadeedna laga raadsho Lacagtaasi meesha ay fadhido iyo meelaha u dhowdhow oo gaariga dhexdiisa ah laga yaabee in la helo,mid kale ayaa hadalkii qabsadey oo yiri wey wanaagsan tahay xataa hadii la isku dayo in loo sameeyo baaris oo loo baarayo dhamaan rakaabka saaran Baabuurka ayadoo laga eegayo Lacagta ay sheegtey tiradeeda iyo nooceeda, laakiin fikradaasi markiiba si wadajir ah ayaa looga diidey waxaana lagu yiri yaa wax baaraya yaase la



baarayaa,baarista noocaas waxaa ku shaqo leh boliiska ayaa nin yiri. Wixii hadal laysku celceliyaba waxaa goortii dambe la isku raacay in gaariga la joojiyo kontoroolka Bariweyne oo noo soo dhowaa ka dibna halkaas looga baaro Lacagteeda gaariga dhexdiisa hadii ay ku jirto weliba ayadoo lala kaashanayo Booliiska.

Laakiin aniga markii hadaladani oo dhan lays dhaafdhaafsanayey waxaan ku jirey riyo maalmeed oo ay ka buuxaan cabsi,walwel iyo shaki waayo waxaa Jeebkeyga ku jirey lacag kun shilin ah oo weliba boqolboqol ah lacagtaas,oo aan u wadey islaan Bedadey ah oo deggan Degmada B/Hababa oo xanuun lagu soo sheegey arintaasi oo ahayd waxa soo sababey safarkeygan oo aan ugu socdo degmadaasi.

Buuqii,murankii iyo hadaladii faraha badnaa wey joogsadeen Islaantii duqda ahayd oo Lacagta ka maqneydna madaxeeda ayaa hoos u foorara weyna aamusan tahay,Maandoeq ayaa ayana hadba fiirmo igu xadxadeysa ka dib markii ay aragtey murugada iyo madluunimada wajigeyga ka muuqata Laakiin ayadu ma awoodin in ay kala garato in aan la murugsanahay xaaladda duqda

ni saboolka ah oo ay lacagtii ka luntey iyo in aniga nafteyda mushkilad meel kale iga haysato' hadaba markii dambe oo ay aragtey in muddo ahba in aan muu iyo maa midna aan ayada ku lahayn oo maskaxdeydu si ay u yara maahsan tahay anagoo· markii horena sheekadeenu isku dhacdey oo ay meel fiican noo mareysey, ayaa goortii dambe igu tiri Mahad maxaa ku heloy ma meel baad ka fikireysaa si baad ilayara mashquulsan tahay, maya Maandeeq mashquul kale ma aha oe murankii faraha badnaa iyo calaacalkii murugada lahaa baa i maan wareershey.

' Intaan masar la soo baxay baan ka ma saxay wajigeyga idil ahaan dhididkii ka dib waxaan is iri horta gabadhani ma kula hadashey oo weliba miyey kaaga naxaysaa sidii ayadoo mar hore ku tiqiin, waxaan markiiba damcay in aan murugada iyo mashquulka maskaxdeyda ka saaro oo aan ismaaweeliyo una sheekeeyo Maandeeq, laakiin midaasi wey ii meel mari weydey maskaxdeydaa iga diidey oo i leh miyaad waalan tahay sideebaad isu maaweelineysaa!!! Hadii lagugula dhego lacagtaadii sow maadan ceeboobin maxaad fali kartaa maxaadna geyneysaa meeshaad u socoto, madaxa



intaan hoos u dhigey ayaan si aad ah u fikirey, laba iyo taban fikradood ayaa maskaxdeyda isdhexjiirayaan mid aan ku adkeystana ma aqaan, goortii dambe ayaan go'aan sadey in aan keligey is kadeedin oo aan ka rid noqdo dadkaasi kale oo ila saaran gaariga oo mid kastana ku jiri karta jeebkiisa kun shilin iyo ka badanba.

Qori ayaa wadada ku dadban, waduhuna si qumaati ah ayuu ugu hor hakiyey. Waa kontoroolkii bari weyne ayaan ka maqley meel iga dambeysa ,waxaan markiiba ilinka Baabuurka soo joogsadey nin dheer oo xoog badan hannaan ciidana leh oo ka mid ahaa askarta baarista meesha u joogta ,waxay in xoogaa ah isla had hadleen Wadihii Baabuurka oo isaga dhulka taagnaa, ka dibna wuxuu soo fuuley gaarigii salaan ka dib wuxuu yiri aawey qofta Lacagtu ay ka maqan tahay, waa la tusey. Ninka askariga ahaa indhihiisa iyo kuweyga ayaa isqabteen waxayna ila noqotey in ay indhihiisu ay ii soo fiirinayaan sidii isagoo igu leeyahay waryaa ma adigaa qaadey Lacagta, wadnahayga ayaa wuxuu u garaacayaa si aad u xoogbadan oo aan ka baqey in ay maqlaan dadkii i agfadhiyey laakiin isa-

ga waxba aniga dan igama lahayn ee wuxuu si toos ah su'aalo u weydiiyey qoftii lacagta ka maqnayd wuxuuna ku bilaabey Hooyo Lacagta kaa maqani waa meeqaa? waxay ugu jawaabtey maandhow waa kun shilin .

Ma hubtaa in aad wadatey goortaad gaariga soo fuuleysey? Haa maandhoow waan watey.

Xageebey kugu jirtey? goortaasey tiri halkan ayadoo tilmaameysa gundigeeda . Lacagta halkaasey kuugu jirtey sow ma aha ninkii askariga ahaa ayaa yiri isagoo hubsanaya warka, waxay ku jawaabtey haa ee maro yar intaan ku duubey baan gundikeyga ku xidhey.

Islaan kale oo ayada la fadhidey ayaa lagu amrey in ay ka soo kacdo kursigeeda si ay meesha u banaanaato duqdiina adna soo raac baa la yiri oo dibadda u soo joogso, ninkii askariga ahaa baa galey wuxuu si wanaagsan u baarey wixii shandado iyo bac oo meesha yaaleen dhexdooda iyo hoostooda waxaa kaloo uu isha si fiican ula raacey kursigii dheeraa oo ay ku fadhiyeen dushiisa iyo hoostiisaba, laakiin isagoo fara madhan buu soo baxey ka dib markii uu waxba ka soo waayey meelihii uu soo baarey oo dhan. Hadana wuxuu u baxey oo uu u socdey xagga dhanka dambe ee Baabuurka



markii uu in yar socdey ayuu dib u soo jeestey wuxuuna ku soo laabtey halkii hore oo uu ka tegey, weli wax hadal ah kama ay soo yeerin dadkii oo dhana wey aamusan yihiin dareenkoodina wuxuu si toos ah ula jiraa baaristani iyo dhaqdhaqaaqa ninka wax baaraya anigoo u haystey in aan ahay ninka keliya arintani sida aadka ah oga murjisey ayaan waxaan u jeestey xagga dambe si aan u daawado sida arintani baaristeeda ay noqoneyso. Ninkii wax baarayey wuxuu taagan yahay meel kursigii naga dambeeyey oo ay duqdii ku fadhidey gadaashiisa ah, afkiisana wuxuu u soo jeedaa xaggeena indhihiisa ayaa markani waxa ay si toos ah u fiirinayaan oo uu si aad ah ugu hayaa hal meel oo keliya, meeshaas oo ah kurisga aan ku fadhino hoostiisa intuu ilko cadeeyey madaxana uu gilgiley oo uu soo qaadey sadex talaabo oo deg deg ah ayuu ka soo saarey maro gaduudan oo xidh xidhan meel ku abaaran kursigii aan ku fadhiney lugtiisa dambe oo derbiga baabuurkana ku dheggan.

Duqdii ayaa goortii ay aragtey in uu gacantiisa ku hayo maradii ay lacagteeda ku duubatey ayaa waxaa ay la moraala dilaacdey farxad, waxayna tiri

maandhoow waa tan ayadii, muuqaalkeeda sare baaban garanayaa. Ninkii askariga ahaana markiiba wuxuu taabsiiyey maradii xirneyd faro qibrad iyo waayo aragnimo dheeraad ah u leh shaqada ay qabanayaan wuxuuna hubiyey in ay lacagtii dhan tahay, ka dibna wuxuu u dhiibey duqdii isagoo ku leh hooyo meel fiican gasho yey mar kale kaa luminee. intey lacagteeda qaadatey bey mahad celin iyo duco isugu dartey ninkii askariga ahaa.

Dhamaan dadkii saarnaa gaariga aad ayey ugu farxeen lacagtaasi helideeda in kastoo aan anigu ahaa qofka ugu farxad badnaa. Ka dib markii aniga iyo Maandeeq mar kale si aad ah sheeko isugu keen baxdey ayaan waxaan jecleystey in aan u sheego sidii ay ii taabatey xaaladda lacagtii dhuntey oo la heley markaan sheekada u dhameeyeyna afkeeda ayey qabsatey!!!



Waa xilli barwaaqo ah suuqii Magaalada Baydhabo waxaa ka batey badar iyo galey, biyihii Isha waxaa barxay oo Bohol ka dhigey Biyihii Roobka kuwaas oo ka soo burqanayey Buundada hoosteeda· waxaa qurux ku biiriyey Berdihii baxsanaa ee Isha Baydhabo oo Caleemihiisii balaadheen ay ka dul babanayeen biyahaasi dushooda iyo dhir cagaaran oo ka dul baxay Ubax kuwaas oo soo bandhigey bilicsami aragti ku haboon waxaana dhacaysa Laydh qabow oo xambaarsan udug oo kaa baxnaanineysa beryihii kuleylka.

Maandeeq iyo walaasheeda Mayran ayaa waxa ay ka soo laabteen suuqii Baydhabo, goortii ay gudbeen Buundadii oo ay sii korsanayeen dalcadii Baar Weheliye ayaa maandeeq tiri alla walaale Maryaney Magaaladiina waa barwaaqo, Badarkii iyo Caanihii iyo Hilibkii badeecadii oo idil baa idin jaban. Qoftaan bukin oona joogta halkan beryo bey ku naaxi, intey fiirisey walaasheed bey hadana tiri amba durba waan isbedeley ee sow iima jeedid. Maryana intey dhoolocadeysey bey ku tiri naa naga tag waa adiga beri naga tegaye maxaad beledkayaga ka amaani oo weliba aad naga diidey inaad beryo kale nala sii joogto,

Maandeeqna waxay tiri Hooyaa ii baahan baan ku iri hade soo iima baahna walaaley,goortaan soo baxayey baadan ogeyn sidaan ku soo baxay iyo inta beri ee aan soo baryayey.

Maryan waa Maandeeq walaasheeda oo ka weyn muddo afar sano ku siman bey deggan tahay Magaalada Baydhabo ka dib markii ninkeeda oo ahaa aqoonyahan beeraley bedel ku yimid .

Walaaley Maryaney oo Xaafadiinu Lo' badnaa haa ee Lo'ley baa deggan xaafadani,waxaa la oran jirey oo ay ku caan baxdey Buulo Jameeco hadana waxaa la yiraahdaa H/Wadaag, ee iska jir dhagaxa Maryan baa tiri.

Maandeeqna waxay tiri alla waan sigtey midkani hadaan ku dhici lahaa waaban jabi lahaa,Maryan baa ka qaadatey hadalkii oo tiri hadaba iska fiiri dhulka bacaadkii xamar baad u baratayee ee dhagaxa Baydhabo waa Seef. Maryaneey guryahaasi deertooda sare oodda ah shaley Beerey baa laga tumayey,haa cidahaasi shaley Aroos bey qabeen.

Goortii ay guriga yimaadeen Maryanbaa intey gacanteeda derbiga meel ka gelisey bey qataarkii al-



baabka ku jirey ka bixisey markii albaabkii uu furmey bey tiri waqtiyadani guriga waa iska cidlo Caruurtiina Iskuul bey ku maqan yihiin ka dibna waxay galeen gurigii.

Mahad wuxuu ku dul jiifaa Derin uu soo dhigtey geedka fiyooraha ah hoostiisa kaasoo ku yaaley barxadda weyn ee guri cariish ah oo ay ku lahaayeen xaafadda Waaberi,meel hortiisa oo aan ka fogeyn waxaa ku weyso qaadanaya aabihiisa oo la yiraahdo Guuleed. Mahad wuxuu si naxariis lah u fiiriyey aabihiisa oo ahaa nin da' soo haysa oona ka xamaasha dekedda Magaalada Muqdisho iyo guriyaha carshaanta ah oo ay ku dhex noolaayeen,wuxuu ku fikirey in ay waajib ku tahay markani in uu ku dadaalo sidii uu u gaarsiin lahaa horumar iyo nolol fiican reerkooda saboolka ah. Mahad wuxuuna isula hadley sidan:- Maadaama aan hadda ahay nin ka gudbey dugsiga sare soona dhameystey Shaqadii Qaranka oo aan ku jiro da'dii xoogga iyo dhalinyaranimada oo ka faa'iideysiga lahayd,hadaba hadii aan ka faa'iideysan aniga uguna faa'iideyn waqtigeygan dahabka ah waalidkeyga oo mudada dheer ee aan waxbarashada ku

jirey,muriqiisana ii maalayey kana soo murgayey Waxbarashadeyda,Caafimaadkeyga,xanaanadeyda iyo guud aahaanba horumarka nolosheyda . Hadana anigoo weliba u ah Waalidkeyga qofka keliya ay fiirsanayaan marka hadii ay nolosheydu noqoto seexo oo * soo toos afkana aan u dhigo wixii Waalidkeyga uu soo xamaalo,midaasi sow iguma aha karti ala'aan iyo naxariis daro soona noqon maayo qof abaalkii loo galeyna aan gudi aqoon,waalidkeygana sow uma aha khasaaro iyo nasiib xumo;Haa waa sidaas, su'aasha i hortaala ayaa ah sidee baa shaqo u heshaa jawaabta muuqata ayaa ah shaqadu iyadu kuma soo raadsato e adigaa raadsada ee wixii la raadiyana waa la helaa. Hadaba waxaa kallan ah in aan shaqo doon oo dadaala noqdo anigoo xusuusan maahmaahdii caanka ahayd oo oraneysey:- Ilaah wuxuu caawiyaa kuwa naftooda caawima.

Ka dibna Mahad wuxuu ka soo noqdey fikirkii badnaa uu ku jirey waayo wuxuu u diidayey maskaxdiisa in ay mushkiladaha ku soo furmayey in ay ku sii fogaato,wuxuuna ku dejiyey maskaxdiisa in uu soo ceshado xusuustii safarkiisa iyo in ay soo noqotey gabadhi ay isku barteen baskii Baydhabo,runtii gabadhaasi



waxay ahayd gabadh xusuus mudan inkastoo hadda aynan weli ligu noqon qodax qalbi ku taagan,laakiin waa qof Jacayl u qalma oo xaqiiqdii leh astaamaha qofta dumarka ah lagu jeclaado,waayo waxaan u qirey in ay leedahay qurux ku qanca qalbi kasta, asluub,xishood iyo naxariis,waxaa intaasi u weheliya habsami u hadal iyo ka run sheegidda arimaha quseeya nolasheeda iyo arin guudba taasoo ay kaga duwaneyd inta dumar ee aan kula kulmey nolasheyda .

Ereyadii ugu dambeeyey oo ay igu tiri waxay ahaayeen amaana alah iyo is arag dambe cinwaankeedana wey i guddoon siisey. Hadaba anna waa in aan u tagaa oo aan arkaa mar kale, Arintuna waa allow sahal amuuraha.

Waagii baa dilaacay dadkii degganaa degmada Madiina qaar baa u deg degsanaya shaqadii qaarna waxay fureen dukaamadii,haween wata dambiilo baa ka dhex muuqda dadkaasi, Maandeeqna waxay furtey albaabkii Tabakaayadooda waxayna carfisey luubaan ka dibna waxay isha ku dhufatey alaabtii tabakaayada si ay u ogaato iibka suuqa siduu ahaa inta ay ka maqneyd tabakaayada waxayna aragtey in ay alaabtii ay ka tagtey wax yar keliya ay ka gadantey.

Waxaa ii cad bey tiri in ay Hooyadey ay isku keeni weydey shaqadii guriga iyo midani,sidaas-darteed tabakaayadii qufulkii ay u dheereysey mudadaan maqnaa,laakiin waa dhab in uu qofku laba meelood uu isu qeybin karin waxaan hubaa aniga in ay Hooyadey howlkar tahay ayna u jajaban tahay shaqo,waxaa hadi midaasi ka marqaati noqon kara qof kastoo og ama dib u raaca taariikhdii hore ee nolosheena.

Maandeeq aabaheed wuxuu geeriyoodey iyadoo yar wuxuuna ifka kaga tagey afar caruur ah laba gabdhood iyo laba wiil,hunguri maalmeedkoodii oo u xoojinayey mooyee wax hanti ah mood iyo maal oo uu u dhaafey caruurtiisa ma aysan jirin. Ay suuban oo ahayd caruurtaas Hooyadood ayaa dharaartii Abahood la xabaaley gundiga dhiisha isaga dhigtey sidii ay caruurteeda noloshooda u hagaajin lahayd;waxay derin falkisaba,waxay dambiilo iibisaba,waxay digir suuqyada la fadhidaba wuxuu dadaalkeeda gaarsiiyey in ay guri u gado caruurteeda tabakaayana ay u furto.

Maandeeq intey jimicsatey oo ay tiri maanta Suuq ma jiro bey waxay shidatey Raadiya yar oo ay ku haysatey Tabakaayada,goortii warkii idaacadda



ka dhegeysatey bey iska damisey,intey qososhey bey tiri miskiin waxay soo xusuusatey Mahad sidii ay wel wel ugu abuurtey lacagtii duqda ka luntey. Ayadoo isla hadleysa ayaa waxay tiri runtii wiilkaasi wey ka muuqatey in uu ka yimid reer sabool ah, laakiin wuxuu aad oga dhisnaa xagga aqlaaqda waxaa iga yaabiyey sida durbadiiba sirtiisa iigu xogwaramey iyo sida uu sheekadeyda u xiiseynayey iyo sida uu ii aamin sanaa,ruuxii aamin ah baa dadka kalena aamina, iska daa wiil wanaagsan buu ahaa ee bey xusuusteeda ku goo gabo-gabowdey.

## QAYBTA LABAAD

Gaari Masda ah ayaa soo galey Jid cadihii hor marayey tabakaayada waxaana saaran laba wiil waxayna joogsadeen meel tabakaayada horteeda ah weyna dooday-aan,midbaa leh waa ayadii midka kalena wuxuu leeyahay war aniga si fiican uguma jeedo ee amey duqdii tahay; midkii kale ayaa ku diidan oo leh war aaga tag duqdii ma aha anagaa arageeda oo dhan xifdiney oo ayada iska-daa e hooskeeda xataa garanayna ee anigaa kuu huba midaas waa iyada nafteeda oo safarkii bey ka soo laa batey,okey deg oo isgey;waa qasab in aan isgeeyo ee xabad sigaar ah isii,xabbad sigaar ah intuu u dhiibey buu dabna u qabadsiiyey isna sadex tiiro oo isdaba joog ah intuu ku dhuftey buu gaarigii ka soo degey wuxuuna u yimid Maandeeq oo wax iibin diyaar u ah wux-uuna ku yiri:- good morning ayadana waxay ugu jawaab celisey subax wanaagsan.wuxuu yiri isii baakit sigaar oo beenson ah ama labo baako ba ka dhig wuxuu jeebkii-sa ka soo saarey Lacag dhorw boqol ah waxaa ka faro baxsadey kabriid uu gacantiisa ku hayey (shit) inta uu yiri oo uu aayar fariistey baa labadiisa farood ku soo qabtey kabriidkii isagoo sare u tuur tuuraya



buu hadana la soo saro joogsadey,wuxuuna yiri oo adiga beryahan meesha waad ka maqneydee.
Haa waan ka maqnaa. Islaantii meesha joogtey ma hooyadaa baa; intey fiirisey bey ku tiri haa,ayada-a ii sheegtey in aad safar ku maqneyd calaashan ad-igaa meesha kugu baraney.
Waxba uma ay jawaabin. Lacagtii uu wax kaga iibsa-dey weli wuxuu ku hayaa gacantiisa oo ay saaran tahay miiska tabakaayada,sigaarkiina wuxuu dul daa-dsan yahay miiska.
Wuxuu yiri isbarashadu waa caadiyee inanyahay aniga waxaan in badan kaa eeganayey dusha ee adna hadii aad i ogaato sow amuursan ma ahaateen isagoon hak-in hadalkiisa buu hadana raaciyey magacaygu waa Iftiinshe,ilka casena waa la igu yeeraa markii uu yiri intaas buu qosley wuxuuna muujiyey ilko cas cas oo u eg sidii timir ku raagtey baqaar,sigaar oo fara badan oo u socdey qayb qayb ayaa ka soo baxa-yey afkiisa,qiiqaas oo ku qasbey Maandeeq in ay sa-nkeeda gees oga jeediso.
Maandeeq wax hadal ah kuma ay darsan waxaana ka soo harey fiirmo uu dhaley yaab.

Ilka case isagoo ilka caseynaya intuu lacagtii uu ku hayey gacantiisa aayar saarey miiska oo yiri maalin wanaagsan,isbarasho furan iyo is arag dambe buu iska dhaqaaqey. Maandeeq baa ka dabo qaylisey oo tiri war kaaley lacag baad leedahay oo haka tegin lacagtaada e. Intuu soo laabtey buu yiri waxba ma aha abaayo,markii uu arkey lacagtii uu ka tegey oo ku diyaar ah miiska dushiisa buu yiri intani waxaan islahaa waa xuquuqdii tabakaayada oo aad ka dul sheekeyneysey. Maandeeqna waxay ugu jawaabtey tabakaayadu sheeko xuquuq kuma laha ee afkii sheekeynayey baa laga yaabe in uu oomey oo uu u baahan yahay xuquuqdaase ee maad biyo ku siisid. Intuu yaabey buu yiri walaahi waad hadleysaa. Haa e waa marka layga raadsado. oo waxaad i leedahay xoolo aanan lahayn ma taabto miyaa. Waxay ugu jawaabtey ma akhiraan iloowey. Markaasuu yiri weli ifka beynu joognaa ee horta in la gaaro sow ma aha. waxay tiri ma foga xageyga ayadoo hadalkeeda sii wadata,bey tiri hadii hadda uu gaariga kula gaddoomo sow filanmeysid geeri goortii ay ka garatey cabsi wejigiisa bey u raacisey hadalkeeda ilaah kuuma garta ee.



Inta uu isku qasbey qosol aan dhab ahayn buu ku yiri Jaaw. Nabadgelyo bey ayana tiri.

Markii uu u yimid saaxiibkiisa Baashi oo in badan ku sugayey gaariga buu inta uu kursiga isku tuurey oo uu neef badan afka ka siidaayey buu ku yiri saaxiibkiisa inkastoo ay ahayd nooc minal wadaad hadana maskaxdaan ka soo qabsadey.

Baashine intuu qosley buu yiri oo dubbaba shabaqey ku jirtaa maad i leedahay,haka cabsan anaa kula jiidaya ee,laakiin maxaan kula jiidi waa tan horey kugu sheegey inta ifka joogta aney igu neceb tahay;mar keliya hadii ay isku keen aragtona xageeda wey kaaga dhamaatey. Ilka casena wuxuu yiri marka horeba maxaa iskiin tusaaya hadii ay arintu sidaas tahay wixii maanta ka dambeeya iga fogow akhbaar in igu filan i siisaye ee waxaan ku leeyahay arinta dusha kala soco ee anaa ka miro dhalinaye.

Intey si wadajir ah u qosleen bey gaarigiina sheelaraha u dareen..

Mahad wuxuu ag fadhiyaa hooyadiisa Maslaxo oo dul fadhida jikada oo babineysa dabkii ay ku diyaarin lahayd qadada,Mahad wuxuu tusey hooyadiisa

Wargeyskii xidigta Oktoobar oo uu gacantiisa ku ha-
yey wuxuuna yiri Hooyo Wargeyskani maanta waxaa lagu soo qorey in ay jagooyin ka banaan yihiin Ban-giga dhexe ee Soomaaliyeed waxaana ku kal soonahay in aan buuxin karo dhamaan shuruudihii ay ku soo xireen tartamayaasha ku tartamaya jagooyinkani ban-aan,sidaas-darteed waxaan jeclahay inaan ka qaybga-lo baratankani oo aan tijaabiyo aqoonteyda iyo nas-iibkeyga. Hooyadiisa markey intaasi maqashey bey intey ku soo fiirisey indho farxad iyo naxariis ka muuqdaan ku tiri hooyo waxaan kuu rajeynayaa guul iyo nasiib wacan,aniga waxaa igu balan ah in aan cawo iyo maalinba docodaada ku wardiyo,waxaana il-aah ka baryayaa in aad ku guuleysato Imtixaankani.

Mahad midda kale oo uu sida aadka ah ula fikirayey waxay ahayd meesha uu ka heli lahaa La-cagtii uu ku qoran lahaa Arjiga codsiga iyo labada sawir oo lagu lifaaqi lahaa,mana jeclayn in uu la socodsiiyo hooyadiisa oo uu ogaa in ay waxba ka qa-ban karin arintani in ay ku noqoto murug maskaxda ka cusleysa mooyee. Mahad oo madaxiisa fikir hoos ula foorara ayaa waxaa uu ku soo baraarugey dhawaaq



uu sameeyey digsi yar oo saarnaa jikada iyo Hooyad-iisa oo ku leh ka carar Mahadow;qiiq madow oo fara badan oo ay soo deynsey burjikadii yareyd ayaa laba-doodiiba midba gees uga boodey,Mahad markii uu soo jeestey wuxuu arkey Hooyadii oo afka haysata oo leh mushkilad tan oo kale weli yaa arkey! xoogaagii saliidda oo aan iidinku sameyn lahaa maraq bilaashka waa teesoo aan afka dabka u darey,waxay hadalkeeda ku dartey waxaan calaf ahayn lama cuno,markaa-sey Mahad oo yaaban ku tiri ushii babiska ayaa iga-ga dhacdey suffiyadda geeskeeda Mahadow,isna micna ma laha Hooyo buu ugu jawaab celiyey.

Ay Maslaxo guriga ayey gashey waxayna la soo baxdey garbasaarkeeda iyo dhalo yar oo faaruq ah Mahadow bal guriga sii joog meelahan dhowdhow baan xoogaa saliid ah ka dooni intey tiri bey ku hakatey hadalkii ayadoo hubsaneysa jaabkeeda,show iima dha-ma lacagta oo shan shilin baaba iga dhiman bey had-ana tiri. Intaan Jaabka gacanta kula boodey baan ka soo saarey toban shilin oo in muddo ahba iigu jirt-ey baan iri Hooyo waa tan anigaa haya ee keen soo

gadee;duco qabe waabad iga farxise ee hoo la soo orod hortaadana waa kheyree,waxaan iridka kala soo degey dhaladii yaréyd ee saliidda.

Maalintaasi galabnimadeeda goorey ahayd 5:30kii ayaan isku soo xaadiriyey shaneemo Super horteeda halkaas oo aan kula ballansanaa Daa'uud oo ka mid ahaa saaxiibadeyda hore kaasoo weliba ii suuro geliyey in aan sameysto sawir iyo Arjiba,ka dib markii aan si lama filaan ah ugu kullanney dukaan aan saliid u doontey saakadii hore "Alla duco Hooyo degdeg siino badanaa dadka yaa u sheega";waxaa kaloo ii suura gashey in aan soo daawado Maandeeq oo ii qaabishey si aad u sareysa iguna soo dhaweysey salaan xiiso badan iyo qalbi saafi ah kuwaasoo ku sawirey laabteyda (Sumad Caashaq);soo sagootinteyda,na soo booqo walaal,iyo sir la'aantey u hadleysey baa naftu samir ku abuureen;markaan ka soo baxay albaabkoodii baa sii xusuusiyey in aan soo noqondoono habeenka sabtiga ah sideedda fiidnimo waxayna ii salaan qaadey macasalaamadeyni sidii ayadoo i leedahay waa sax ee hadalkaaga haka soo dib dhicin saacadda.



Si aad ah anigoo u faraxsan baan ku soo dhacay gaariga oo u soo laabtey gurugayaga,ka dibna waxaan u soo qorey(QORMO JACAYL).

Saaxiibkeyga Daa'uud wuu soo daahay,laakiin waa in aan iska sii sugaa nusaac kale saan u hubsado waayo sababo badan baa iska jiri kara oo uu u soo dib dhici karo.Daa'uud waa ninkii saaka i caawiyey oo aan u aqoonsanahay in uu yahay saaxiibkeyga dhabta ah,saaxiibkaaga dhabta ahna waa saaxiibkaa kuu baahan. Gacan baa dhabarka layga soo saarey markaan saa u eegeyna waa daa'uud oo i leh "Sorry" waan ka xumahay in aan ka soo dib dhaco waqtigii balanta. Waxba ma aha taasi intaan iri baan saro joogsadey.

Saf dheer ayaa loogu jiraa tikitkii shaneemo Super oo ka socda Filim Hindi ah. Daa'uud ayaa markiiba ii soo jeediyey in aan isku maaweelino filimkaasi Hindiga ahaa. Waxaan fariisaney kuraasta dhexe ee qeybta koowaad wax yar markaan fadhineyba laba gabdhood oo

sita Cambuuro gaagaaban boorsana garabka ay u suran tahay Timuhuna ay u jaran yihiin ayaa nala soo far-iisteen;midii dhankeyga soo xigtey ayaa markiiba bilowdey sheeko waxayna ka sheekeyneysaa jilayaasha ku jira Filimka iyo § Filimaadkii kale oo ay hore u soo dhigeen. Qof kastoo ku jira jilidda filimkaasi aan daawaneyney ayaa waxay warbixin iyo faallo ka siineysey gabadhii ay la socotey sidii ayadoo aqoon gooni ah u leh. Xanjo ayey ruugeysaa cagaleeduna waxaa ay u saaran yihiin Kursiga ay ku fadhido mar-marka qaarkoodna waxay Cagta saaraneysaa kursi uu ku fadhiyey nin ayaga ku aadanaa oo horteeda fadhi-yey,dhowr jeer ayuu ninkaasi dib inta uu u soo eeg-ey u sheegeyna in ay cagteeda ka ilaaliso oo mar kale ay taabsiin;waxay goor kastana ugu jawaabeysey ow!!! Midisbiyaaje ama Sorry ayadoo sii raacineysey waan ka xumahay,goortii Filimka uu heesana wey la heestaa heeska marka uu dhamaadana xumaan bey muuji-saa oo waxay tiraahdaa ah!ah! Heeskani Cajaladiisa baan haystaa.

Filimkii qaybtiisa hore ayaa dhamaatey,dhinac-

naxariistii ay lahayd,waxayna ku fikirtey arintani oo ay horey oga dareensaneyd Mahad haatanna uu daaha oga qaadey siday wax ka dhihi lahayd oo ay u qaabili lahayd. Waxay ogeyd in ay arin kasta qofku soo foodsaarto ay u baahan tahay ka fiirsasho,isk-ukalsoonaan,digtoonaan iyo hubsasho si qofku oga gaashaanto dib oga shalaayidda ka dhalata arin si fudud fooda loola galey.

Maandeeq oo wax kasta kala weynaayeen in ay xumi iyo ceeb marka hore ka ilaaliso nafteeda,isla markaasna ay kor u qaado sharafteeda,magac wanaag-eeda iyo xushmadii ay ku dhex yeelatey bulshadii ay ku dhex nooleyd ayaa arintan Mahad si aad ah u falanqeysey;markii ay si kasta u eegtey oo ay dhan kasta ka eegtey waxay go'aan ku gaartey in ay Jaw-aabtiisa ka dhigto Haa,waxayna tiri:-
Geeri horteed gabadh iyo wiilba waxay sugaan waa guur,laakiin qofku waa in uu helaa gacal uu naftiisa ku aamini karo,kaasoo jecel in uu dhiso mustaqbalkooda iyo mustaqbilka caruurtooda oo rajadooda ay bil-aabaneyso maalinta la aqal galo.

Sariirteeda waxayna tiri walle wixii la suboba wey yimaadaan,waqtigii ballanta waa caawa,ka dibna wa-xay barkinta laabkeeda ka soo saartey warqad oo ay akhrinteeda ka bogan weydey oo uu Mahad u soo qorey. Barkintii derbiga intey saartey oo ay si habsami ah u tiirsatey bey warqadii laalaabneyd si tartiib ah u kala fidisey,inkastoo ay dhowr jeer hore akhrisey hadana markastoo ay fiirisaba xiiso gooni ah ayey la yeelaneysey,waxayna u qorneyd sidan:-

=SUMMAD CAASHAQ=

Qalbigeygaay:-

Waa qormo Jacayl oo aan kuugu soo qorey qalinkii kalgacalka,khadiisuna ay tahay dhiigeyga qadarin naftu ay kuu qabto awgii,ogow Naftu waa qaali;Jacaylkuna waa naxariista ay u baahan tahay. (Love is life) Jacayl waa nolol,marna waa Naar kaa gubta niyadda. Haka nixin qormadani dhabta ah aayatiinkeygaay ee ii niyad nuglow,"Inshaa Allaahu axdigeena waa aroos".

Walaal waxaan ku hanweynahay in ay xagaagana ka



noqoto Haa;ee hadaan soo gaabsho warkeyga su'aal baa jawaab mudane qormadeydan saxiixa u baahan sida aad qalinka u mariso,waxaan kaa sugayaa habeenka Sabtiga sideedda fiidnimo ee xusuusnow intaas xayaati.

Waa inoo sidaas iyo nabadgelyo

S a l a a m a a d

Qore :- Mahad

Goortii ay indhaha la raacdey ereyadii warqadda ku qornaa oo dhan ayey is aragtey ayadoo cod kor ah ku tiri waa sax warqadaada Mahadow,markaasey intey isku naxdey si xishood leh geesaheeda isaga fiirisey,inkastoo ay ogeyd in aysan jirin cid kaloo goortaasi la joogtey qolkeeda.

Maandeeq qormadani ay akhrisey kuma noqon la yaab,laakiin waxay ku kordhisey xishoodkii iyo

yadeedii intey eeg eegtey bey tiri caawa filimka dad badan oo aan Filim geli jirin iyo caruur baa soo galey;sidaas-darteed Filimka hadalkiisa si fiican looma maqlayo sidii ayadoo af Hindiga taqaan, waxay la soo baxdey masar wejiga ayey isaga masaxdey,goortaasey tiri Muqdisho kuleylbaa loogu dhintey cawo iyo Maalinba waa islamid oo waa lagu gubanayaa,Alla ayey tiri Afrika meel lagu noolaado ma aha sidii ayadoo Aduunka afartiisa gees Cagta soo marisey. Saacadeeda ayey eegtey sadex mirir iney dambeyso ayaan u maleynayaa bey tiri,ka dibna gacanteyda ayey soo fiirisey markii ay aragtey in aan saacad xirneyn ayey xagga dambey u jeesatey waxayna nin iga dambeeyey ku tiri aboowe Saacadaa iga yara wareérsane ee wáa Imisadii? goortuu u sheegey bey intey ku soo jeesatey saaxiibteeda ku tiri haa waan sidaan kuu sheegey dhowr mirir bey dambeysaa weligeedba,laakiin mid kale ayaan ku rajo weynahay in ay dhowaan i soo gasho.

Waa goor maqrib ah,Maandeeq intey ka soc sara kacdey kursigii ay ku fadhidey bey ku fariisatey

Hadaba Mahad waa wiil aan isku aamini karo, anigoo horo u dareensanaa midaas ayaa hadana ereyada uu ku soo qorey Warqadiisa ay yihiin kuwo i qanciyeen oo ii muujinaaya in uu yahay qof had iyo jeer arintiisa Ilaah ku xira sida marka uu leeyahay "Inshaa Allaah axdigeena waa Aroos" waxay i tuseysaa in uu aaminsan yahay in arinka arooska ay marka hore ka soo ahaato xagga Ilaah oo aniga iyo isagana naloo ga baahan yahay oo keliya in aan axdi xalaal ah meel wada dhigano,inkastoo aan moogeyn inaan labadeenaba aanan lahayn Hanti aan ku wada meel deggno,laakiin mar hadii aynu Ilaah aaminsan nahay ma rajo xumin.

Maandeeq weligeeda xiriir caadi ah iyo mid guurba Rag lama ay soo yeelan,laakiin wey la socotey in ay xiriirka iyo isla socoshada qaarkood ay Rag iyo Dumarba u keeni karaan Khasaaro oo aan si sahlan looga soo kaban karin oo taabaneysa Maskax iyo jirba,waayo waayo aragnimo ayey ka kororsaneysey goor kastoo ay dib u xusuusato qisadii qabsatey saaxiibteedii koowaad oo ay ku lahayd Aduunka.

## QAYBTA SADEXAAD

Bisha Caarafo waa toban Beledka Xamar waxaa dhex sooda Bulsho farxad ka muuqata iyo caruur ka dhawaa jineysa Baaruud,Dukaamadiina waxaa ka buuxa oo ka baayacaya alaab bilcaan koox koox ah iyo dad kaloo badan oo iid wanaagsan iyo iid mubaarik isku salaamayaan. Diiri Jaakoolona wuxuu isku kala bixinayaa kursi jiif oo uu u yaaley bersada gurigiisa bilicda san oo ku yaaley Degmada Hodon,waxaa u timid Istaahil oo ahayd gabadhiisa waxayna ku tiri:- Baaba; haye Aabe buu ugu jawaabey.

Aniga iyo Geni ayaan waxaaa u baahneyn Lacag aan ku soo iibsano Duruuc cusub oo naloogu sheegey in la keeney Dukaan ku yaala Xamar Weyne,waxaan kaloo rabney in timahana naloo soo hagaajiyo ileyn beri waa iide. Inta uu ku qosley ayuu yiri Aabe waa anigii ayaan dhoweyd idinka keeney dibadda alaab iyo dhar kala cayn cayn ah oo weligiina aydan xiran oo hadana maxay yihiin alaabtaan iyo dharka kale oo aad sheegeyso,midda kale hagaajin uma baahna timihiina,hadee



in aad iska soo haleyreeysaan oo aad soo rinjiyeyneysaan mooyee. Intey Afka taagtey bey dib u noqotey. Waxaa qol aan ka fogeyn isku hagaajineysa Maryama Luul waxayna hor taagan tahay Muraayad dheer oo le'eg joogeeda,ka dib markii ay isku fiirisey Muraayadii oo ay aragtey in ay ku qurxoon tahay dharkii ay xirneyd oo ayna u muuqatey in ay shan iyo toban sano ka yar tahay da'deeda dhabta ah ayaa iyadoo ilko caddeyneysa si farxad leh madaxa u ruxdey. Maryama Luul waxay ahayd marwo ilaah qurux ku maneystey,Maalqabeenaa ku tartamey guurkeeda meherkeeduna ma sahlaneyn,waxaa markii dambe ku guuleystey in ay noqoto Marwadiisa Maalqabeen Diiriye oo yiri anigoo u jeeda Maryama Luul miyaa la igu xujeyn karaa Maal iyo Xoolo oo maanta ay i ag joogaan maya ma dhici karto midaas,anigu meherkeeduna ilama buurna mar hadii ay noqoneyso Afadeyda iyo Caruurteyda Hooyadood. Maryama Luulna isla Gu'gii loo aqal geeyey Diiri Jaakoole ayaa

waxaa ay ku curatey Wiil iyo Gabar oo mataano ah, waxaana lagu kala magacaabey Baashi iyo Istaahil; laba sano ka dibna waxaa ka dabo timid Geni, wixii intaas ka dambeeyey wax Caruur ah ma ay helin oo waxaa ay ka joogsatey dhalmadii, laakiin arintani Maryamo wax murug iyo mushkilo ah kuma ay dhalin, inkastoo uu Diiriye marar badan ku fikirey Maalmaha ka dhiman noloshiisa in uu caruur kale oo ka reebta magac mar kale heli doono. Maryamana maalin kuma ay seexan in uu awoodo ninkeeda in uu ku dhiirado Marwo kale guurkeeda, waxayna dhihi jirtey Ninkeyga in uu Naag kale hawoodo iska dhaafe xataa marka uu iga maqan yahay wuxuu i moodaa in aan ahay Hooskiisa oo aan ka harin.

Waxaa Muraayadii ay hor taagneyd uga soo dhex muuqdey gabadh buuran midabkeeduna uu yahay maariin lehna timo madow oo food dheer xidhan maro gaduudan oo si caajisnimo ah u soo tiirsatey albaabka qolkii ay ku jirtey, intey ku soo jeesatey bey ku tiri Istaahiley maxáa ku heley oo aad la madluunsan tahay maanta? Maad nagala hadashid Maama.



Yaan kaala hadlaa; maxay sheegeysaa gabadhu. Wax dambe oo la soo iibinaayo ma jiraan buu na yiri Aabe, anagana dad baan alaab in aan ka soo qaadano kula soo ballanney ee maxaa naloo ceebeynayaa. Maxay tahay Ceebtu? Qof baa na sugaya oo alaabtiisa aan ka xayirney Walaahi ciil baad nagu dileysaan intey tiri bey si xanaaq muujinaya albaabka uga baxdey; Maryama Luulna intey ku qososhey oo mar labaad Muraayadii dib isugu eegtey bey ka soo dababaxdey, waxay u timid Diiriye oo si raaxo leh ugu jiifa kursigiisa, waxayna ku tiri ma adaa haya Furihii khasnadda kumaba jiro khaanada e. Haa ee waakan intuu yiri buu Jeebkiisa ka soo saarey, markii ay ka guddoontey bey tiri alaab yar yar baan magaalada u doonan lahaa ee mar waa iid hadii la yiraahdo hawluhu wey iska faro badnaanayaan, dabadeedna waxay ku soo jeesatey Wade Abuukar oo fadhiyey Odeyga geeskiisa oo bakeeri shaah ahna gacantiisa ku hayey; waxayna ku tiri Abuukar aawey Gaarigii? Haa Gaariga waa iska diyaar, guriga banaankiisa ayuu yaalaa intuu yiri oo uu mar keliya kabadey xoogaagii shaaha

ahaa ee Bakeeriga ku jirey ayuu wuxuu fadhiga oga boodey sidii isagoo la siiyey amarkii ugu dambeeyey. Ayadiina waxay ku laabatey guriga, wax yar ka dib ayey hadana soo baxdey ayadoo ay la socdaan Istaahil iyo Geni, waxayna si deg deg siino leh u ag mareen Diiriye oo weli halkiisa fadhiya, markii ay iridka ka sii baxayeen ayaa Istaahil intey dib u soo jaleecdey si farxad leh gacan ugu soo taagtey sahro yarey oo ku mashquulsaneyd hagaajinta buskudkii Iidda, ayna gacan bey u taagtey. Diiriye Jaakoole gaarigii sii baxayey dhawaaqiisa ayaa soo xusuusiyey in ay afadiisu awood balaaran guriga ay ku leedahay, laakiin waxaa ka farxisey ayadii Ilaah Quraankiisa ku yiri oo ahayd:- Maalka iyo Caruurtuba waa quruxda nolosha Aduunka, dabadeedna wuxuu furtey Raadiyo yar oo uu ag yaaley, waxaana ka socotey qasiiado loogu talagaley Iidda.

Mahad isagoo si aad ah u faraxsan ayuu albaabka guriga ka soo galey, Hooyadiisa ayuuna ku yiri Bishaaro, Bilkheyr Hooyo. Hooyo waxaan noqdey Ninka koowaad oo Imtixaankii ka gudbey. Alla Hooyo ma



gudubtey? Ilaah baa mahad leh, Ilaah baa mahad leh bey tiri ayadoo si aad ah u faraxsan. Midda kale Hooyo labo sano oo tababar dibadeed ah ayaa Bangiga noo fidiyey, si dhaqso ah ayaad u baxaysaan ayaa nalagu yiri. Alla labo sano oo dhan miyaad maqnaaneysaa. Waxba ma aha oo ma badna labo sano, dadbaa waxbarasho todoba sano ah aadaya. Hooyo haye kheyr Alla hakaaga dhigo ee Aabahaana guriga ayuu ku jiraa ee soo u sheegi meysid bey tiri. Mahad markii uu Aabihii u soo sheegey khabaarkii faraxa lahaa ee u wadey, ka dib wuxuu si nasasho ah ugu dul fariistey Sariirtiisa, wuxuuna Ilaah ugu mahad celiyey Imtixaankii uu ku guuleystey, wuxuuna Ilaah mar kale ka rajeeyey in uu mustaqbalkiisa ka dhigo wanaag iyo sida uu jecel yahay.

Ka dibna Maskaxdiisa ayaa waxay sawir ahaan ugu soo celisey markii ay Maandeeq ku lahayd cod aad u gaaban Mahad jawaabtaada waa "Haa", iyadoo madaxeedana xishood hoos u foorariyey. Sawir maskaxeedkaas wuxuu ahaa mid uu Mahad aad u jecleystey, ka dibna wuxuu soo xusuustey Habeenkaas oo ahaa

Sabti,saacaduna ay ahayd Sideedii fiidnimo sidii sharafta badneyd ee ay u soo dhoweysey iyo siduu ugu farxay markii ay u sheegtey in ay arintu xag-eedana ka tahay haa.

Mahad wuxuu Madaxiisa ku aadistey Barkintii, wuxuuna yiri:- Runtii Habeenkaasi waa Habeen xusid iga mudan waayo markaan maqley Jawaabteeda waxay naftu i dareensiisey in aan ahay ninka ugu farxad badan Magaalada,waxaan la hadli waayey Farxad. Boqoradii wadnahaygana waxay la hadli weysey xishood. Sidaas-darteed nooma ay suuro gelin habeen-kaas in aan si wanaagsan u wada shaeekeysano,ink-astoo uu noo ahaa habeen Guul;markii dambana wax-aan ku ballanney laba habeen ka dib in aan ku kul-lanno gurigooda. Hadaba maadaama Maanta ay ii tah-ay Maalin farxad leh waxaan ku rajo weynahay in aan caawa Maandeeq ugu sheekeyndoono si aad u xii-so badan;Laakiin Waxaan hubaa in ay xiiseyneyso oo keliya sheekooyinka ka hufan xumaan,been iyo waxaan loo joogin maadaama ay ayadu nadiif ka tahay waxaas oo dhan,dabadeedna Mahad wuxuu soo xusuustey gabadhi



ay ku wada kulmeen shineemo Super sheekadeeda wuxuuna barbardhigey Maandeeq,markaasuu yiri waa laba hab dhaqankoodu uu aad u kala dheer yahay.

Maandeeq Saacadeeda ayey fiirisey waa todobadii fiidnimo oo toban dhiman,toban daqiiqo ayaa ka har-san Mahad balantiisa markii ay tiri ayey maqashey garaac xoog badan oo la soo garaacay Albaabka ban-aanka,markiiba fadhiga ayey ka boodey intii ay jid-ka ku sii socotey ayey tiri waxaan u maleynayaa in uu Mahad garaaciisu sidan uu ka khafiifsanaan lahaa, waxaan u maleynayaa in uu qof kale yahay. Albaabkii ayey furtey waxaana taagan Odey gaaban oo Gar leh, Laakiin wuxuu ahaa qof markiiba ay fahamtey,Abti Warsame miyaa intey tiri ayey salaan kula boodey, Maandeeq ma nabadbaa ayaa cod waayeel lagu yiri, guriga ayeyna soo wada galeen. Ay Suuban aad ayey ugu faraxdey aragtida Walaalkeeda oo ay muddo dheer isugu dambeysey,markii ay iska salaan qaadeen ka dib ayaa waxaa Iridka ka soo galey Cabdi Wahaab wuxuuna salaam ey abtigiiga,Aw Warsame markii uu dareemey isbedelka weyn ee xagga jirka ah ku dhacay Cabdi wahaab ayuu si naxariis leh u yiri oo Cabdi

Wahaab maxaa heley aad buu u baaba'ay?
Xanuun yar yar oo aan garan weyney ayaa haya ilaa iyo in muddo ahba wuu iska socdey mooyee ma fiyoobeyn Wiilku ayaa Ay Suuban ugu jawaabtey.

Maandeeq oo dhegaheeda si aad ah ula socdeen hadii dabayl yar xataa albaabka ay ka dhawaajiso ayaa waxay maqashey in si fudud loo soo garaacay Albaabka,markii ay furteyna Mahad ayaa ka soo galey waxayna ku soo dhoweysey qol nadaafadiisu ay aad u sareyso markii uu fariistey salaantii iyo iswareysiigiina ay u dhamaadeen ayuu wuxuu si farxad leh ugu sheegey Maandeeq in uu ka gudbey Imtixaankii oo islamarkaas tababar uu u aadi doono dibadda.Maandeeq oo la socon in uu Mahad ka qeyb galey Imtixaan ayaa arintan ku noqotey Farxad naxdin leh. Ayadoo yaaban markii ay aragtey in uu Mahad aad ugu faraxsan yaha waxa uu sheegayo ayaa intey soo celisey Maskaxdeeda oo ku fakireysey tegidda Mahad ku tiri Hambalyo waa ku faraxsanahay arintani,laakiin Wadankee tababarka u aadeysaan? Wadanka Jarmalka galbeed ayuu ku jawaabey. Inta aad markey tiri ayaa hadalkii ku joogsadey oo ay yara hakatey,wax yar ka dib ayey ku



dhameystirtey hadalkeeda soo maqnaaneysaan ma la idin sheegey?
Haa waa iska tababar gaaban oo laba sano ah ayuu yiri. Maandeeq intey hoos fiirisey ayaa waxay Nafteeda su'aashey waxa ay oga naxdey safarka Mahad mar hadii ay ku kalsoon tahay isaga.
Soo arintani uma aha Mahad guul iyo horumar uu gaarey,soo ma aha waa mugdigii kuma jiro mustaqbalkiina mar hadii shaqo helo oo isku filnaado.
Haa! Haa Ilaah baa bahad leh bey tiri,Naxdinta waxaa keeney arintani oo aan hore ula socon oo uu kedis igu sheegey iyo kalgacaylka aan u hayo ,dabadeed Madaxeeda ayey kor u soo qaadey ayadoo wejigeedu ka muuqdo farxad iyo firfircoonaan waxayna ku tiri goor aad baxaysaan? Si dhaqso ah ayaa loo baxayaa,Diyaaradda Soomaali Airlines Beri dambe tageysa ayaad raacaysaan baa nalagu yiri. Walaahi aad baa naloogu soo dedejiyey Safarka,markaasaa intuu qosley haddana yiri Laakiin aniga koley waan ku farax sanahay maadaama ay noo tahay Nasiib noo soo degdegey. Maandeeq hadalkaasi aad ayey ugu faraxdey. Asagoo hadalkiisa sii wata ayuu wuxuu

intaas ku darey waxaan rajeynayaa in aan ka soo kor-rorsan doono aqoon dheeraad ah intuu wax yar aamusey buu hadana ku darey iyo Ilbaxnimo. Maandeeq intey qososhey ayey tiri Mahadoow dibadda ma lagu soo ilb-axaa,horta Ilbaxnimadu waa maxay? waxaan kuu weydii-nayaa su'aashan meel kastoo aad tagto waxaad arkeys-aa dad markii ay hadlayaan ku darsada hadalkooda Ilbaxnimadaa kugu yar. Mahad oo su'aashan culeys iyo yaab ku noqotey ayaa wuxuu isku dayey in uu uga jawaabo,wuxuuna yiri:- Ilbaxnimadu bulshadu wey isla fahmi weydey qaarbaa si qaldan u fahamsan,waayo wax-ay u haystan in ay tahay dhaqan iyo hiddo shisheeyo oo la qaato ee looguna dhaqmo sidii dadkaasi shishee-yaha ah looga soo guuriyey,waxaana ka mid ah sida dharka loo xidho,sida loo socdo,sida wax loo cabbo iyo sida la isu xodxodto. Hadii aad Ilbaxnimadani ee dhaqanka shisheeyaha ah si dhaqsi ah u fahmiweydo oo aad ula qabsan weydo waxaa laguu arkayaa in aad tah-ay qof badow ah oo ka liita dadka kale oo si aad ah u dambeeya ee aan la socon waqtiga hadda la joogo Ilbaxnimada xagga dhaqanka halka ay mareyso.

Su'aasha la yaabka leh ee meesha ku jirta ayaa



waxay tahay hadii qofka noocaasi ay iska caddahay in uu yahay Ilbax isku dheeg,hadaba yaa lagu tilm-aami karaa Ilbax? Mahad markii uu intaas yiri ayaa wuxuu arkey Maandeeq oo dhabanadeeda haysata una dhegeysaneysa hadalkiisa sidii Raadiyo oo war muhiim ah ka socda,taasoo ku sii dhiirigelisey in uu si wa-naagsan uu u wato hadalkiisa wuxuuna yiri:- waxay ila tahay in qof kastoo wixii xumaan u keeni kara ka ilaaliya naftiisa iyo tan dadka kaleba,islamark-aasna dadka aan ku xad gudbin si isagana aan loogu xad gudbin kala garanayana wixii waxtar u leh iyo wixii waxyeello u keeni kara oo had iyo jeerna dag-aal adag kula jira Jahliga,og dantiisa,lehna aqoon ku filan oo uu ugu faa'iideyn karo Dadkiisa iyo Dal-kiisaba in la oran karo waa Ilbax ayuu hadalkiisa ku soo gabagabeeyey; Deedna wuxuu indho furan ku eegey Maandeeq in uu ka ogaan karo wejigeeda hadii uu ku guuleystey intixaankää ay ka qaadey maskaxdii-sa. Markii uu arkey Maandeeq oo si farxad leh ugu tiri mahadsanid Mahad dersi waxtar leh baad i siisey-na niyadda ayuu ka qosley.

Markii ay wax yar kala aamusnaayeen ayaa wuxuu ku yiri Imtixaankii Dugsiga weli laydinma soo caddeyn miyaa? Maya weli lama soo caddeyn bey ila tahay koley waan maqli lahaa inkastoo beryahan wax sheegayaba aanan arag ayey ugu jawaabtey.
OO gabdho saaxiibadaa ah oo kuu imanaya ma jiraan miyaa? kuwo Dugsiga aan wada dhigan jirney oo mar mar ii iman jirey ama Magaalada aan isku arki jirney wey jiraan,laakiin dhowaanadaan waxba maan arag ayey tiri.

Waxaa markiiba maskaxdeeda ku soo d hacay Saaxiibteedii koowaad oo ay aduunka ku lahayd iyo taariikhdeeda. Mahad sidii isagoo la socda qalbigeeda ayaa wuxuu yiri oo gabar saaxiibtaa ah dadka kalena aad isaga dhowdihiin ma jirta miyee?
Madaxa ayey gilgishey waxayna cod gaaban ku tiri hadda maya,deedna wejigeeda wuxuu isu bedeley mid murugo ka muuqata,hoos ayey fiirisey,in muddo ahna hadalkii wuu ka joogsadey. Mahad oo markiiba dareemey in ay xaaladeedu aan caadi ahayn ayaa markii dhowr daqiiqadood ka aamusneyd oo korna aan u soo eegeynin oo aynan hadleynin ayaa markii dambe wuxuu



ku yiri Maandeeq meel miyaa ku xanuuneysa?
Madax gilgilid ayey ugu jawaabtey,wax yar ka dib ayey hadana damacdey in ay hadasho waxayna kula hadashey cod xidhan oo uu Mahad fahmi waayey,laakiin wuxuu gartey in ay ciishooneyso oo ay ciil dartii la hadli weysan tahay. Mahad waxay la noqotey in uu xoogaa u kaadiyo oo aynan faa'iido lahayn in lala hadlo qofka ciishoonaya ilaa uu ka furfurmo.

Madaxeeda ayey kor u soo qaadey,waxayna codkii hore mid ka faseexsan ku tiri walaal iga raali ahaw arin murugo leh oo aan soo xusuustey baan la ciishoodey e. Waxba maha,laakiin maxay ahayd arintani sidan u murugada badan. Waxayna hadalkeeda ku bilowdey waxaa jirtey gabadh isku guri aan ku wada dhalaney,isku meel aan ku soo barbaarney,isku dugsina aan wada dhiganeyney,waalidiinteennuna waxay ahaayeen kuwo derisnimadii isku duubtey oo isu gargaara oo aan kala maarmin. Hadaba markii aan ku jirney Fasalka koowaad ee Dugsiga Sare ayaa waxaa dhacdey in Gabadhii saaxiibteyda ahayd la soo doonto,waxaana soo doontey Wiil u shaqeynayey Wasaaradda Xanaanada Xoolaha ee Xamar,markii ay arintaasi soo maqash-

ey ayaa waqti galab ah anigoo jiifa guriga iigu soo gashey,waxayna si tafatiran iigu sheegtey arintii oo dhan,waxay ii sheegtey in uu wiilka uu soo dirsadey Dad akhiyaar ah oo Hooyadeed aqoon wanaagsan isu lahaayeen,waxaa kaloo ay ii sheegtey in Hooyadeedna Dadkii akhiyaarta ahaa ay u sheegtey in ay marka hore jeceshahay iney arinta kala tashato oo ay u sheegto Gabadheeda iyo kharaabadeeda kale oo ay go'aan gaari karin goortaasi,sidaa-darteed waxay ku talisey in ayda iyo akhiyaartii mar kale isu yimaadaan laakiin aan waxba la sala weyn doonin,midda kale waxay tiri Hooyadey waxaan afkeeda ka garanayaa in ay ninkani iala rabto,aniguna hadda arintani diyaar uma ihi ee Maandeeqey Walaal maxaad igula talin lahayd. Hadaba waxaa jirtey in gabadhani Abaheed uu dhintey ayadoo uurka hooyadeed ku jirta ilaa ay ka soo weynaatoo oo waqtigaan hadda la joogo ah Hooyadeed ayaa u shaqeyneysey waxay cuni lahayd,kuna soo rafaadeysey waxbarashadeeda,gabadhanina waa gabadha keliya oo ifka ay ku weheshaneyso,waxayna ka jeceshahay labadeeda indhood. Anigoo xaaladeeda oo



dhan sidaas ula socdey ayaa markii arinteeda aan dhinac kasta ka eegey ka dib kula taliyey in ay marna isku dayin iney hadalka hooyadeed diido,midda kale waxaan iri wey haboon tahay inaad wiilkani xaaladiisa aad ka baaraandegto marka hore ee aad iska ogaato taariikhda dad la dhaqankiisa,bani'aadannimadiisa iyo kartidiisa sida ay yihiin midaasna waxaan ka ogaan karnaa dadka kale oo isaga yaqaan,markaas ka dib hadii aynu ogaano in uu dhaliilooyin leeyahay oo noqdo qof aadan la noolaan karin markaasi waxaan awood u leenahay in aan Hooyadaa si wanaagsan wax ugu sheegno oo aan runta taabsiino,waxaadna ka dheregsan tahay in ay Hooyadaa si aad ah kuu jeceshahay oo ay marna ku talineynin in aad naftaada meel xun ku tuurto ee sidaas aynu yeelno,aniguna waxaan isku dayayaa sidii aynu xal wanaagsan ugu heli lahayn arintaadan oo xataa Hooyadaa aan kala sheekeysto ileyn waa Hooyadey oo kale e waxbana iga qarin meyso;ee anigu sidaas inaan yeelno ayaan ku talo bixin lahaa saaxiib ayey hadalkeeda ku soo gabogabeysey,sidaas ayaan maalintaasi ku kala tagney. Hadaba waxaa dhacdey aniga iyo Hooyadeed oo aan wax-

ba kala qarsaneynin in aan arintii si wada jir ah u wada falanqeyney waxaana go'aan ku gaarney in aan waxba degdegin oo horta wiilka arimihiisa sida ay yihiin iska hubino, waxaan helney in uu wiilku yahay wiil xoogsada oo sharaf badan oo wax ceebaad ahna aan lahayn, ka dib markii aan mar labaad kullanney Saaxiibteyda Indhodeeq oo aan u sheegey arintii dhabteeda ayaa hadana waxay ii sheegtey arin kale oo aan markaan ka dhegeystey la yaabey, waxay ii sheegtey in ay is barteen wiil kale oo ka yimid wadanka Abu dhabi oo wiilkaasna uu yahay wiil aad u wanaagsan, oo durbaba si aad ah ay isugu soo dhowaadeen ayna jeceshahay in ay wiilkan dambe arin isla meel dhigaan, kii hore iyo badiisuna aynan ku jirin maanta iyo wixii ka dambeeya. Anigana markii aan ka dhegeystey intaas waxaa iga soo harey yaab oo keliya; waxaan ku iri markii ay tiri, ayaa waxay aragtey Mahad oo labadiisa suxul ay u saaran yihiin jilbihiisa, dhegihiisana uu u soo taagayo sidii isagoo aan si fiican u maqleynin hadalkeeda, deedna codkeeda intey kor u qaadey bey tiri waxaa ku iri Walaaley indhodeeq sidee baad u hadleysaa ma waalan tahay oo wiil aad hadda baratey sidee baad is



haleyneysaa oo aadna u tuureysaa arintii aniga iyo waalidkaa ka soo wada shaqeyney. Maya saaxiibeey iga raali ahow, inkastoo wiilkan aan hadda is baraney hadana waa wiil aan isku aamini karo bey i tiri, markaasaa hadana intey ii maahmaahdey tiri:- waxaa la yiri Ninkaad saacad ku baran weydo sanad kuma baraneysid saaxiibey ee wiilkaan aad baan u dersey siduu ii jecel yahay ma maleyn kartid, guur buuna iga rabaa, magaciisana waxaa la yiraahdaa Baashi, waa wiil aad u ladan dibadda ayuuna ka yimid wuuna u noqonayaa; wuxuuna ii sheegey in uu markaan is mehersano ii wadi doono meeshaasi uu ka shaqeeyo, waana ku kalsoonahay hadalkaasi bey tiri.

Anigoo hadal maagey bey hadana hadalkii intey iga boobtey tiri saaxiibey adigaan kuu sheegayaaye wiilkani wuxuu durbadiiba i siiyey shan maro, sadex dirac laba joog oo kabo ah iyo saacadan seekada ah oo hada ii xiran intey gacanteeda igu soo taagtey si ay ii tusto, iguna tiri uma jeedid miyaa bey hadana hadalkeeda sii wadatey waxay tiri habeenadan oo dhan wuxuu casho iga soo siinayey Hoteelada ugu waaweyn ee muqdisho, waxaasoo dhan waxaa kaaga sii daran

labadaan beri wuxuu bilaabey in uu i baro wadidda gaarigiisa yar ee marsheediska ah,marka arintani ka waran saaxiibey ayey warkeeda ku soo gunaanudey.

Aniga in muddo ahba waan ka aamusnaa,waxaan kula hadlo iyo sidaan ula hadlo ayaan garan waayey, markii dambe ayaan ku iri aniga kaley waxaad iila muuqataa in aad si fudud arin foodda ula gashey ee waan ka xumahay in aad aniga iyo hooyadaaba nagu gacan seerto. Wey iga tagtey waxaana dhacdey in ay ii goysey xiriirkii saaxiibtinimo oo noo dhaxeeyey kama aanan caajisin waxaan isku dayey weli in aan la sii taliyo,waxaana abuurey geeraarkan;waxayna ku bilowdey Geeraarkeeda sidan:-

Dadka taan u jeclaa duniduna aan ku
weheshan jirey dirhamey indhodeeq
marka aan ku daawadaba waa adiga iga
didaye,iiga leexda Dariiqa sidii anoo
diley Walaalkaa ama aan kuu dan leey-
ahay, Ha degdegine u meel dayo deeqaay
Walaaley. Waa adigii ii dan sheegtoo
igu yiri dadaaloo waxba daah kaama
saarne ee dibnaha ha iga xiranine talo



dhan sidaas ula socdey ayaa markii arinteeda aan dhinac kasta ka eegey ka dib kula taliyey in ay marna isku dayin iney hadalka hooyadeed diido,midda kale waxaan iri wey haboon tahay inaad wiilkani xaaladiisa aad ka baaraandegto marka hore ee aad is-ka ogaato taariikhda dad la dhaqankiisa,bani'aadann-imadiisa iyo kartidiisa sida ay yihiin midaasna wax-aan ka ogaan karnaa dadka kale oo isaga yaqaan,mar-kaas ka dib hadii aynu ogaano in uu dhaliilooyin leeyahay oo noqdo qof aadan la noolaan karin markaa-si waxaan awood u leenahay in aan Hooyadaa si wanaa-gsan wax ugu sheegno oo aan runta taabsiino,waxaadna ka dheregsan tahay in ay Hooyadaa si aad ah kuu jece-shahay oo ay marna ku talineynin in aad naftaada me-el xun ku tuurto ee sidaas aynu yeelno,aniguna waxaan isku dayayaa sidii aynu xal wanaagsan ugu heli lahayn arintaadan oo xataa Hooyadaa aan kala sheekeysto ileyn waa Hooyadey oo kale e waxbana iga qarin meyso;ee anigu sidaas inaan yeelno ayaan ku talo bixin lahaa saaxiib ayey hadalkeeda ku soo gabo-gabeysey,sidaas ayaan maalintaasi ku kala tagney.
Hadaba waxaa dhacdey aniga iyo Hooyadeed oo aan wax-

ba kala qarsaneynin in aan arintii si wada jir ah u wada falanqeyney waxaana go'aan ku gaarney in aan waxba degdegin oo horta wiilka arimihiisa sida ay yihiin iska hubino, waxaan helney in uu wiilku yahay wiil xoogsada oo sharaf badan oo wax ceebaad ahna aan lahayn, ka dib markii aan mar labaad kullanney Saaxiibteyda Indhodeeq oo aan u sheegey arintii dhabteeda ayaa hadana waxay ii sheegtey arin kale oo aan markaan ka dhegeystey la yaabey, waxay ii sheegtey in ay is barteen wiil kale oo ka yimid wadanka Abu dhabi oo wiilkaasna uu yahay wiil aad u wanaagsan, oo durbaba si aad ah ay isugu soo dhowaadeen ayna jeceshahay in ay wiilkan dambe arin isla meel dhigaan, kii hore iyo badiisuna aynan ku jirin maanta iyo wixii ka dambeeya. Anigana markii aan ka dhegeystey intaas waxaa iga soo harey yaab oo keliya; waxaan ku iri markii ay tiri, ayaa waxay aragtey Mahad oo labadiisa suxul ay u saaran yihiin jilbihiisa, dhegihiisana uu u soo taagayo sidii isagoo aan si fiican u maqleynin hadalkeeda, deedna codkeeda intey kor u qaadey bey tiri waxaa ku iri Walaaley indhodeeq sidee baad u hadleysaa ma waalan tahay oo wiil aad hadda baratey sidee baad is



haleyneysaa oo aadna u tuureysaa arintii aniga iyo waalidkaa ka soo wada shaqeyney. Maya saaxiibeey iga raali ahow, inkastoo wiilkan aan hadda is baraney hadana waa wiil aan isku aamini karo bey i tiri, markaasaa hadana intey ii maahmaahdey tiri:- waxaa la yiri Ninkaad saacad ku baran weydo sanad kuma baraneysid saaxiibey ee wiilkaan aad baan u dersey siduu ii jecel yahay ma maleyn kartid, guur buuna iga rabaa, magaciisana waxaa la yiraahdaa Baashi, waa wiil aad u ladan dibadda ayuuna ka yimid waxuuna u noqonayaa; wuxuuna ii sheegey in uu markaan is mehersano ii wadi doono meeshaasi uu ka shaqeeyo, waana ku kalsoonahay hadalkaasi bey tiri.

Anigoo hadal maagey bey hadana hadalkii intey iga boobtey tiri saaxiibey adigaan kuu sheegayaaye wiilkani wuxuu durbadiiba i siiyey shan maro, sadex dirac laba joog oo kabo ah iyo saacadan seekada ah oo hada ii xiran intey gacanteeda igu soo taagtey si ay ii tusto, iguna tiri uma jeedid miyaa bey hadana hadalkeeda sii wadatey waxay tiri habeenadan oo dhan wuxuu casho iga soo siinayey Hoteelada ugu waaweyn ee muqdisho, waxaasoo dhan waxaa kaaga sii daran

labadaan beri wuxuu bilaabey in uu i baro wadidda gaarigiisa yar ee marsheediska ah,marka arintani ka waran saaxiibey ayey warkeeda ku soo gunaanudey.

Aniga in muddo ahba waan ka aamusnaa,waxaan kula hadlo iyo sidaan ula hadlo ayaan garan waayey, markii dambe ayaan ku iri aniga kaley waxaad iila muuqataa in aad si fudud arin foodda ula gashey ee waan ka xumahay in aad aniga iyo hooyadaaba nagu gacan seerto. Wey iga tagtey waxaana dhacdey in ay ii goysey xiriirkii saaxiibtinimo oo noo dhaxeeyey kama aanan caajisin waxaan isku dayey weli in aan la sii taliyo,waxaana abuurey geeraarkan;waxayna ku bilowdey Geeraarkeeda sidan:-

Dadka taan u jeclaa duniduna aan ku
weheshan jirey dirhamey indhodeeq
marka aan ku daawadaba waa adiga iga
didaye,iiga leexda Dariiqa sidii anoo
diley Walaalkaa ama aan kuu dan leey-
ahay, Ha degdegine u meel dayo deeqaay
Walaaley. Waa adigii ii dan sheegtoo
igu yiri dadaaloo waxba daah kaama
saarne ee dibnaha ha iga xiranine talo



iigu deeq,markaan kuu daacad waramey
oo ku tusey dantaadi baad dareen shaki
is geliso ii deysey xarigii,ee Gabadh-
yahay digtoonow wax baan kaaga digayaa
ee dib baad ii xusuusan.
Gaari lagu dikeeyo iyo Diinaar laysa
siiyo mar bey Dacar noqdaan,Dumar baa
horey ugu duloowoo ku dan seegey Darii-
qaas adaa iminka u duuloo u durbaan
tumanayee ha degdegine u meel dayo.
Gabadhyahay digtoonoow waxbaan kaaga
digayaa ee dib baad ii xusuusan.

Maandeeq markii ayadoon hakaneynin si tartiib ah Geeraarkii ugu tirisey Mahad ka dib ayey wax yar aamustey.Mahad oo sheekadani jirkiisa gashey,Geeraarkii naxariista lahaana uu qalbiga ka taabtey ayaan ogoleyn in mar keliya sheekadani ka joogsato,ayaa hayo ka dibna sidee bey noqotey ku yiri maandeeq oo Dareemayaasheeda oo dhan sheekadu ay kicisey Wejigeeduna aan weli caadi ahayn,markaasey intey Kursigeeda ku tiirsatey can-

dhuuf dib u liqdey,sheekadiina halkeedii ka sii socod-
siisey,waxayna tiri Geeraarkii waanada iyo digniin
ahaa ee aan Warqadda intaan ugu qorey u dhiibey wax
waano ah kama ay qaadan dib dambena iguma aaney soo
noqon,dhowr beri ka dib ayaa Hooyadeed ii timid wax
ayna ii sheegtey in ay Gurigii ka tagtey oo la la'
ahay waxayna iga codsatey in aan la baadi goobo,mee
kasta markaan ka raadiney oo aan si kasta yeelney
waan ka soo dhex saari weyney magaalada Xamar.

Muddo Bil ah markii ay ka soo wareegtey ayaan
waxaan Magaalada isku aragney Gabar Dugsiga aan wa
dhiganeyney,waxayna ii sheegtey in ay Indhodeeq oo
is bedeshey timihiina jaratey oo Surwaal iyo Goone
mooyee wax kaleba aan ku soconeynin ay dhowr jeer
aragtey Guri ku yaalla Degmada Hodan,Gabadhii ayaan
waxaan u sheegey in ay Indhodeeq Hooyadeeda si aad
ah ay ugu wareersan tahay ayna u baahan tahay in Ga
badheeda mar keliya indhaha loo saaro,sidaas-darte
waxaan kaa codsanayaa in aad mar Guriga ay joogto
korka naga tusto ayaan iri;weyna iga aqbashey,ka di
na ballan ayeynu dhiganey/



Aniga iyo Ay Madiina oo ahayd Indhodeeq Hooy-
adeed ayaa goor galab ah garaacney Gurigii nala gee-
yey,waxaana naga furtey Gabadh gaaban oo iska farax-
san;ayadoon yaad rabteen iyo waxba na dhihin bey
Albaabkii intey naga balaqdey soo gala nagu tiri,
wuxuu ahaa Guri aad u weyn oo quruxsan,saan u soco-
ney waxaan dul istaagney islaan dheer jir dhisan oo
ku jiiftey Kursi jiif yaalley Bersada,ma nabad baa
markaan niri bey waa nabade maxaa darnaa naga hor
keentey,Ay Madiino ayaa tiri arin yar baan kugu ni-
mid oo rabney in aan wax kaa weydiino. Aniga ayaad
arin iga rabteen miyaa bey tiri, Maya e wax yar ba-
an ku weydiin lahayn baa Ay Madiinana ugu jawaabtey,
Haye iska hadla ayey na tiri. Weli sideenna ayaan
u taagan nahay,markaasaa Duqdii tiri waxaa jirta in
Gabadh yar oo aan dhaley ay ayaan dhoweyd intaan
is yara maan dhaafney iga soo carartey,marka berya-
hanba ayadaan baadi goobeyney,maanta ayaana naloo
soo sheegey in ay Gurigan saanteeda ku badneyd,
Magaceeduna waxaa la yiraahdaa Indhodeeq,marka Ga-
badhaasi haddii aad aragtey in aan wax kaa weydiino

baan kugu nimid. Intey kor noo soo eegtey nagu qososhey bey tiri Gabdhaha Guryahooda ka soo carooda iyo kuwa fadaroowey Gurigeyga ma yimaadaan ee Caweysyada iyo meelaha baararka waaweyn hortooda ah ka fiirfiiriya ee anigu Indhodeeq iyo Qalbideeq midna maan arag ee nabadeey Eeddo. Aniga iyo Ay Madiina intaan is fiirfiiriney baan waxaan ku hadalno garan weyney, markii dambe ayaa Duqdii tiri anaga si fiican baan wax kuu weydiinaye,Gabadhana halkaan waaba naloogu soo sheegaye maxaad sidatan noogula hadleysaa.
Markaasaa intey Sankeeda iyo Wejigeeda oo Ilkan ka dhaqdhaqaajisey tiri war in aad na rabaheysaan baad noogu timaadeene,waa adiga weliba leh Gabadha halkan ayaa la igu soo sheegaye,maxay Gabadhaada Gurigeyga ka soo dooneysaa,wax kalaad u dan leedihiin ee waxaan idin leeyahay ka baxa guriga ee ka baxa ayey ku soo qaylisey!! Aniga iyo Duqdii anagoo yaaban ayaan Cagaha wax ka soo dayney,markaan Albaabka ka soo baxney oo ay Madiinana leedahay Alla waashu miyey waalan tahay maxay sidan noogu qaylineysaa,ayaa waxaan gadaasheyda ka maqley cod la igu leeyahay Abaayo!! markaan dib u soo jeestey waa Gabadhii markii hore



Albaabka naga furtey,waxayna igu tiri ma Gabadhii Indhodeeq baad raadineyseen? Haa e,Abaayo adigu ma aragtey? Haa e dhowr beri bey Gurgaan joogtey,waxaa keeney oo ay isla socdeen Wiil Islaantii hadda aad la hadleyseen dhashey oo la yiraahdo Baashi, marka ayaan dhoweyd baa Islaantan Hooyadiisa ah Guriga ka cayrisey oo qoor qabad kaga saartey.
Ay Madiina ayaa hadalkii soo dhex gashey oo tiri aleylahe arintu in ay sidaas tahay afkeedaan ka gartey. Haa Islaantu qof wanaagsan ma aha,waa Islaan God in'ay ku geliso mooyee aan kaa bixineynin bey Gabadhiina tiri,anigaa ka dhex galey oo iri abaayo magacaa horta? Sahro yarey bey iigu jawaabtey,aniguna Maandeeq ee barasho wanaagsan. Waxaan ku weydiinayaa adiga Islaantu maxay kuu tahay? waxba iima aha Ninka ayada qaba ayaan qaraabo nahay ee Reerkaan la joogaa ee waakan Wiilkii Gabadhiinu la socsocotey oo ay iyadu dhashey,Gaarigiisaana soo socda weyna naga tagtey. Gaariga ayuu hor joojiyey Ganjeelada Guriga. Duqdii halkan igu sug intaan iri . ayaan isagoo Gaariga ka soo degey ka hor tagey,waxaan iri nabad soo ma aha;waa nabad beella ayuu ii-

gu jawaabey. Waxaan ku iri Gabadhii Indhodeeq ae aad isla socoteen ayaan rabey ee maanta ma aragtey? Intuu i soo fiiriyey hadana uu fiiriyey Ay Madiina oo meel iga dambeysa taagneyd ayuu yiri Indhodeeq; Indhodeeq maya maba garanayo Gabar magacaasi leh. Markaasaan si xanaaq leh u iri waad garaneysaa waa Gabadhii aad beenta u sheegtey oo aad tiri waan ku guursanayaa iyo dibaddaan kuu wadayaa ee xageed ku qarisey. Intuu qosley ayuu yiri kama jawaabi karo su'aashaasi, waayo maalintii meeqaan been u sheegnaa laakiin aniga Gabar ma qarsan Jaalle inta uu yiri uu iska dhaqaaqey buu Guriga galey.

Wixii maalintaasi ka dambeeyeyna marba meelbaa lagu sheegaayey, Duqdii Hooyadeed ahaydna goor dambe ayey dhimatey naxariistii Janno alla ha siiyo e ayey hadalkeeda ku dhameysey.

Waxaan Indhaheeda soo hareereeyey ilin, Mahadna wuxuu yiri Maandeeqeey sheekadani waa sheeko cibro qaadasho leh, adiga iska dhaafe qof kastoo loo sheego ayey maskaxdiisa raad ku yeelaneysaa, wuuna joogsadey wuxuuna yiri waa goor dambe ee waan tagayaa habeen dambe ayaa is macasalaameyn doonaa hadii Eebe yiraahdo, Iridka ayuuna ka soo degey.



QAYBTA AFARAAD

Duq Warsan hurdadii ayey ka soo boodey ayadoo leh Aacuudu Billaahi Mina sheydhaani Rajiim!! ka dib markii si xun oo dhawaaq dheer leh ay Istaahil ugu qososhey Sahro yarey oo la kuftey alaab gacanteeda ku jirtey oo dhanka Jikada u sii ordeysey. Sahro yarey intey alaabteedii urursatey bey ayadoon juuq dhihin Hawsheeda halkeedii ka sii wadatey. Ardo oo Gambar gaaban ku fadhidey baa tiri waryaa Istaahil naxariis darnidaa oo Gabadhu hadii ay kuftey maxaad sidaasi ugu qosleysaa? Habar yar sidey u kuftey baan la yaabey; Naa hooy tag baa lagu yiri Caqli ma lihide. Duq Warsan baa ayaduna intey iridka soo istaagtey tiri maxay ahaayeen waxa sida Firimbiga u yeeraayey oo hurdadii naga soo toosiyey ? Ardaa u jawaabtey oo tiri waa midii Istaahil ahayd, markaasaa ayaduna intey yaabtey tiri war waxaas hadda yaa maqla, deedna waxay fiirisey dhulka Hooskii wuu dheeraadey Casarna weli ma tukan ayadoo leh bey dhankii Kirliga weysada uu yaalley aadey.

Ay Warsan waa Diiriye Jaakoole Hooyadii, waxayna ka timid Baadiyaha laba habeen ka hor cabasho caafimaad xumo awgii. Ardana waa Maryama Luul

walaasheeda,waxayna in muddo ahba marti u ahayd Guriga. Istaahil ayaa ka soo baxdey qolkeeda,waxay-na tiri Habar yar intaan Musqusha ku jiro hadii Wiil kuu yimaado ee uu ku yiraahdo Anjeles ma joogt- Musqushey ku jirtaaye Guriga gal ee fariiso dhah. Bal Habar yar kaaley oo halkan fariiso,wey fariisat- waxayna tiri Habar yar ha i daahin in aan qubeys ka- gaarsiiyaan rabaa ee Wiil baa ii imanaye,saacadii b- lantana waa la joogaaye. Istaahiley waxaan ku weydi- yey Wiilka kuu imanaya muxuu yahay? Haa waa Wiil aa iska helney oo aan wada socono. Waxaan ku weydii- wada socoshadiinu sidee bey tahay miyaad is nikaa- sateen? Maya isma nikaaxsanin waqtigaan la joogo Ni- aaxsigu isaga bood ma aha,marka hore waa in la isba- taa oo la is fahmaa,dabcigiisu uu noqdaa mid aan u go oo aan jacayl abuurnaa ka dib lee waaye is Nikaa- gu;Haddii aan intaan Nikaaxsado hadhow dambe Dhoore noqdo seen yeeli. Dhoore waa maxay? Dhooruhu waa da- aalka ee Habar yar marka hore Ninka waa in aan is t- aabinaa oo aan Imtixaamaa. Naa hoogto mar hadii lag- tijaabiyo maxaa kuu yaal!! Tijaabadu sidaas ma aha waxaan ula jeedaa marka hore waa in sifiican la isu



barto,Hadaba midkaan hortiisa laba kale ayaan la soo socdey,labaduba wey igu xumaadeen ee waan u bogi waayey waana kala tagney. Hadii aan Nikaaxsi-gooda ku degdegi lahaa maxaa iga raaci lahaa.Oo laba kale baad kala tagteen miyaa!Haa kan waa kii sadexaad. Haye labadii kale maxaad ku kala tagteen? Habar yar midka hore Anti Istiile ayuu igu noqdey. Muxuu igu noqdey baad tiri. Sida loo Lebisto ma uu-san aqoon,saacadaha ballantana ma ilaalin aqoon; Gabdhihii saaxiibadeyda oo dhan wey ogaadeen in uu sidaas yahay oo uusan ii qalmin,markaasaa waxay igu oran jireen adiga dooq Dameersanidiya oo waxaan maad is kaga hartid,markaasaa markii dambe intey igu kacdey ayaan ku sanifey baan ku iri Gooy. Midka kalena wuxuu ahaa mid isagana Dhoore kale ah, Lebis xirashadiisu wey iska rooneyd,laakiin Ilbax ma ahayn aad buuna u dambeeyey,goobo badan oo ay Gabdho Saaxiibayaasheyda ah joogaan ayuu igu ceeb-eeyey. Muxuu kugu sameeyey waa yaabee!! Aniga iyo isaga,Gabar Saaxiibtey ah iyo Amooraheeda ayaan waxaan rabney in aan cayaarno Turub,markaasaa wax-aa la yiri Iskaallo ma taqaanaa; wuxuu yiri Maya. Shan boolana; Maya,markaasuu yiri Shaanis baan aq-

aanaa,wuxuu sheegayaa midka Dadka waaweyn iyo Haween-
nka Guri joogtada waqtiga Soonka Guryaha ay ku ciy-
aaraan;markii uu sidaasi yiri Gabadhii iyo Wiilkii
kale hal mar bey qosol naxdin leh nagu qosleen,Gaba-
dhii saaxiibteyda ahaydna intii ay Afkeeda dhegtey-
u soo dhaweysey ayey igu tiri kaaley adiga maxaa dh-
oore gaad kaa dhigey. Maalin dambe ayaa hadana Mey-
ah Jakshan oo caan ku ah Aduunka oo dhan sawirkiisa
oo ku dheggan Guri Gabar Saaxiibtey ah ay lahaayeen
ayaa inta la weydiiyey uu garan waayey. Aniga intaa
xanaaqey ayaan waxaan ku iri Waryaa Sawirkaan oo
Caruurta yar yar xataa taqaan miyaad garan weydey,i
la goobtii ayaan ku iri Gooy.

Ayagoo sheekadoodii u socota ayaa waxaa u timi
qo la soo fariisatey Maryama Luul,waxayna tiri Arddo
maxaa kugu dhacay oo Afka la haysataa oo aad la yaa-
ban tahay.? Ma yaabini ee waan yaab dhameystey.Mary
Luul intey qososhey ayey tiri Iyaah maxaad tiri,Il-
ayaa waxaa ka soo galey Wiilkii ay Istaahil sugeysey
markii ay aragtey fadhiga ayey ka boodey ayadoo leh
Ahlan Mr Qaloocoow soo dhawow ee Guriga hore u gal;
iga ayuu galey iyana wey ka daba gashey,wax yar ka



ayey hadana soo baxdey,goortaascy intey Maryama
Luul iyo Arddo oo meeshoodii fadhiyaan soo dul is-
taagtey ayey ku tiri Habar yar waxaan kuu sheegay-
ey baa iqabsadey wiilkii anigoo saan ah buu iigu
yimid,hadana intey ka boodey bey tiri Hooyo Wiilk-
aan kaaga waramayey waakan ee ka waran,ayadiina wa-
xay ugu jawaabtey Wiilkani meel ma dhinna ee waa
jiraa;Hooyo mahadsanid intey tiri bey dhanka Musqu-
sha u carartey. Arddo intey qososhey oo Madaxa ay
gilgishey bey tiri naa Maryama Luul ibtiladani max-
ay ahayd? oo waa maxay Ibtilada!

Maryama Luul arinta inantaada ii sheegtey wax-
a afkeeda ka soo baxayey iyo waxa aan iminka ark-
aayo ma ahayn wax aan aduunyo ka filaayey ee cimri-
geygan afartan dhaafey tan oo kale abidkey ma arag
laymana sheegin ee sadex arimood ii kala saar:-
Inantaada ceebteeda cirka dhaaftey,edebteedu ay
yaraatey ee af xishooda lahayn ma adigaan tusin
asalkeen iyo caadooyinkeena wacnaa ee ku caawinaa-
ya arintaan,ma caqligeedaan dhameyn mise arin kale
ayaa jirta bal ii kala cadee. War Adduunyadan ayn-
u joogno ilbaxnimaa la gaaroo Asalka iyo caadada

aad sheegeysana amin horaa laga tilaaboo,sida ii muu-
qata adiga iyo in kale oo yar baa ku dambeeya haatan
ee casriga aynu joogno aqoon iyo cilmi ilbaxnimaad ka
heleysaa; bal eeg Telefiishanka waxa aad ku arkeysaa
Oroba iyo Ameerika,Aasiya iyo idil ahaan Aduunka int-
iisa kale. ka wareeji ishaada ma aragtaa aqalada qurx-
oon ee iminka aad dhex jiifto iyo Alaabta kala caynka
ah ee caynadoodu ay sareyso oo dhextaala aqalkeyga
mana qanciyeen qalbigaadu,Udugga caanka ah ee laga ya-
qaano Aduunka oo haatan ku ag yaalla ma ur..yaa sanka
iminkaba soo amba qaad Ilbaxnimada bilowgeeda iska x
Calaladani kugu haya culeyska oogadaaduna ka xiraaya
Naacawda ee ku bedelo kuwo ku raaxaysta jirkaaga oo
xad gelinaaya qalbigaaga soona muujinaaya quruxdaada
la soco waqtiga Inanteyda Anjelesna ceeb u helimeysi
ee ha iga caayin mar kale,nagana daa aflegaadada.

Naa Cilmiga iyo Aqoonta lagu hayo Aduunka ee Di
aaradaha Cirka u duula iyo Isgaarsiinta haboon,aalada
ha cusub oo loo adeegsado Caafimaadka oona sahlan daa
weynta cudurada,cilmiga Beeraha idil ahaan aqoontu U
adda wey anfacdaayoo amba waan ogahay midaasi ii shee-
gi meysid,laakiin waxa iminka aad waddaan umadda aad
ku qaldeysaan caadadoo la xooro iyo cawradoo la banee



ayaguna waa casriye, aqoon iyo ilbaxnimaad ka hal-
eysaan ii sheegi meyside kaa aqrisan maayo midaase
ee yuu ku daalin afkeeda. Naa aqalada qurxoon imin-
ka aad dhex jiifto iyo istareexa adduunyo waa ayaa-
mo oo keliya ee iilkii baa ku sugayoo ciidda lag-
uugu rogaayo oo Aboorku uu ku cunaayo, Udugga iyo
Alaabtani aad maanta dhexjoogtana Adduunyaad kaga
tegeysaa oo Aakhiraa yoonkeeda Camal baa ku hor yaal
ee waxa aad ku hadleyso Ilbaxnimo ma ahee ee haka
tegin caadadaada iyo aqlaaqdeenii habooneyd oo ha
xumeyn carruurtaada asluubtooda ileyn adigey kaa ee-
ganayaane ku taclin wanaagga. Maryama luul intey
fadhigii ka sara kacday bey tiri Ilbaxnimo iyo Ad-
uunyo waxba kama ogide waqtiga ha iga qaadin ee Ga-
bay kama bixi karo anigu Gabey baa iila timide,
waxaan u malaynayaa geela iyo geedaha sida loogu
heeso inaad ku wanaagsan tahay weyna sii socotay,
Ardona Haa ee waa runtaa kuwaasi waxba ma garana-
yaa ileyn waa kuwii nolosheynu ay ku xirneyd e bey
ugu jawaabtay, markay intaas maqashay bey intay gad-
aal u soo fiirisay oo qososhay bey gacan ku soo

taagtey. Geni oo Cajalad Viidio gacanteeda ku wada
ayaa soo gashey,markii ay soo gudubtey ayey hadana dib ugu noqotey qolkii ay soo dhaaftey,kaasoo ay ka shakidey inuu qof ka dhex muuqdey,Madaxa markii ay dhiibteyna waxay aragtey in uu Qaloocow dhex fadhiy Salaan intey u taagtey bey ka soo noqotey ka dibna waxay la soo fariisatey Arddo,wax yar markii ay fad dey bey tiri Habar yar Qaloocow goormuu yimid? Qalo cow ma anaa kuu aqaan oo yaa la yiraahdaa. Waxaan s eegayaa Wiilka Qolka fadhiya. Anigu qaloociisa ma ba fiiranin ee laakiin goor dhoweyd in uu qof meesha s galayey waan u jeedey. Wiilku ma qaloocnee ee waa n neystiisa,waxayna isla socdaan Istaahil. Horta waxa ku weydiiyey Isla socoshadu ma saaxiibtinimo oo la s beebaybaa? Adiga waa isbarasho iyo is fahmid bey ku aabtey Geni. Aduunyoow yaab badnidaa war ma rag baa baran karaa!! waxaan idin leeyahay Ragga barashadii waad ku rafaadeysaane ee maad ka joogtaa. Geni inte qososhey bey tiri Habar yar micnahaadan garan ee u adu sidaasi ma aha,ee anigu kuma lihi Ragoo dhan ba baraneynaa,laakiin midkaan la noolaan lahayn marka



waa in aan iska hubinaa oo aan isbaranaa bey tiri ayadoo qosleysa. Haye adiga hadda mid aad isla soc-otaan miyaa jira? Haa bey tiri. Mid aad kala tagt-eenna? Haa bey hadana tiri,waxayna hadalkeeda ku dartey midka aan kala tagney wax sidaas ahba ma aanan wada socon,gabar saaxiibtey ah ayey is yaqaa-neen ayadii buu markii hore u soo jeediyey in ay wada socdaan oo ay arin wada meel dhigaan,ayadiina waxay u sheegtey in ay kubaato tahay oo ay meel laga soo galo lahayn,Ardaa ka soo dhex gashayoo tiri ma baabuurbaa ayadu maxaa kubaato ka dhigey! maya waxay ka waddaa Wiil kalaa wada soconaa oo ma qaabili karo arintaada ileyn qalbigu laba ruux ma wada qaado e. Haye bey tiri Arddo. Marka waxay Wiilkii ku tiri waxaan ku barayaa Gabar wanaagsan oo saaxiibtey ah,deedna anigey i bartey oo igu tiri Wiilkaan waa Wiil fiican ee isbarta,sidaasaan isku baraney markii dambena dabcigeenaa is keeni waayey waana isdhaafney,laakiin Wiilkaan kale oo aan hadda wada socono waa Wiil aan ku kalsoonahay oo Caaqil ah oo weliba Abwaan ah,markaan isbaraney

ka dib wuxuu ii soo qoray warqad erayaashii ay ku qornaayeen ay aad u qiima badnaayeen wuxuu waraqaddiisa kusoo xiray geeraar macaan. Markay intaas tiri bey intay aamustay fiirisay Ardo dabadeedna tiri habar yar ma kuu tiriyaa geeraarkaasi? Ardana bal tiri aan maqlee bey ugu jawaabtay ayadoo qosleysa wuxuu ka hadlayaa jaceyl, wuxuunaku bilaabay:-

Ballantoo la adkeeyo waa badbaadadii jaceylka
Beenoo la isu sheegin waa barbaarintiisa
Booqashadoo la baajin lays barbar joogo lyasku beer samaado waa ubax bixintiisa.
Bartamahahabeenkii iyadoon bisha muuqan inta leys baal f riisto hadal aan bukaneyn iyo sheeko leysugu baaqo, Bushumaha la isu dhiibo iyo aayar lays barkado waa biyo waraabintiisa

Markii ay dhameysay bey tiri haye habaryar ka warran geeraarkan soo ceesh calaa ma aha. koley asagaa wax buu soo tiriyay. Ardaa hadashayoo hadana tiri hayee idinku xaggiina arrintani isla socoshadu sidaa bey ka tahay oo aad uga dan leedihiin soo ma aha. Haa fikradda is barashada iyo isla socodka waa



midda hadda dhalanyaradu intoodii badan ay qabaan oo waa iska caadi midaas Geni ayadoo hadalkeeda sii wadata ayey hadana tiri laakiin Habar yar Rubac Qarni ka hor waagaad idinku dhalinyarada ahaydeen fikradaan ma jirin oo qofba qofkii uu doono ma heli jirin ee laba aan iska warqabin baa qoor qabad Guri la isugu geyn jirey. Ardaa hadashey oo tiri anaga waqtigeena qofba qofkii uu doono wuu heli jirey inkastoo.inta badan Qorsho Waalid lagu aqal tegijirey,Haweenkuna sidoodaba waa qaaliyee qiimaha jirkooda iyo sharafta qoyska bey ilaalin jireen,waxay ku dartey intaas hadii aad qofka isbarateen qorshe guur iyo qadarin ay idinka dhaxeyso oo qiyaasna aad ku wada socotaan Waalidkuna aan laga qarin waa khayr iyo Duco,arrintuna idinkama qaribmeyso,laakiin hadii aad qasataan naftiinuna aad khiyaantaan inta aad isla qososhaan qalbi been ah aad isugu heestaan oo maalinba meel ka qadeysaan khatartu markey timaadana qofba gees uu u boodo soo khasaaro ma aha midaasi,dabadeedna wax yar intey aamustey bey tiri anigana i dhageyso markeyga waxaan kuu tirinayaa Geeraar aan alifey goor dhow oo aan rajeynayo in aad fahmi doonto ujeedadiisa, deedna waxay

Geeraarkeeda ku bilowdey:-

Gabdhaha gaaddada furan baa hablihii Guurka u diid, Gabdhaha Goonada xiran baa Raggii gaabsiga badey, kuwa Gidaarada gooban ee gaadaya Gawaarida baa Aduunkii gilgileen, Gabdhaha gadaya Kalgacalka oo xishoodkii ka gaabsadeen ee gubaya Naftoodii baa Gaashaantooyinkii Guryaha joogey sharaftoodii gaabiyeen.
War gablantayee adoonba gaarin goormaad Gacalkaa wax tari, War gaboowdayee adoonba gaarin goormaad wax guursan.
Gabdhaha dhaqankoodii ka gaabsadeen oo gaduudsadey Afkooda goortey gaaraan dantoodana kugu yiraahda Good-bye baa Geediyana calafkeeda ganey.
War gablantayee adoonba gaarin goormaad Gayaankaa wax tari, war gaboowdayee adoonba gaarin goormaad wax guursan.
Gabdho gaagaabanoo gu'ooda toban dhaafino oo oambuurka boodaha ku giijiya, Gareeskana



xiran aqoon, codkoodii wada guuxayey baa Raggii wax guursan lahaa qalbigooda gilgiley.
War gablantayee adoonba gaarin goormaad Gacalkaa wax tari, war gaboowdayee adoonba gaarin goormaad wax guursan.

Arddo goortey dhameysey Geeraarkeeda ayey ku tiri Geni oo sidey hadalkeeda u soo raaceysey oo ay ugu soo dhawaaneysey hoosta ka soo gashey haye bal ka waran keygana? Waxay ugu jawaabtey waa Geeraar cajiib leh oo gabdhaha dhaqanka xun taabanaya, laakiin maxaad ka waddey markaad lahayd:- Ayagaa Geediyana calafkeeda ganey? Haa Geediya waa gabar wanaagsanoo Asluub leh oo gabdhaha dhaqankooda xunxun dartood ayaduna guurkeeda loogu wiswisey.

Waxaa qolkii hortooda ahaa ka soo baxay Istaahil iyo Qaloocow, waxayna ka sii baxeen Iridka, deedna Geni ayaa tiri Owò! heer sare Anjeles si aad ah ayey isu soo qurxisey.

Naa hooy horta waa maxay Anjeles?
waxay ku jawaabtey waa Naaneysteeda. Maxaa laga wad-aa hadee? Haa Magaca waa Ingiriis micnihiisuna waa Malaa'ik. Naa iga tag Malaa'ik kuma salaantee.

=QAYBTA SHANAAD=

C/Wahaab xanuunkii ayaa ku soo siyaadey, wuxuuna jiifaa Sariir. Waxaa u faaliyeen laba qofood oo kala duwan oo weyna ku guuleysan waayeen daaweynta cudurk-iisa, waxayna dhaawac u geysteen dhaqaalihii qoyska. Hadana waxaa la fadhiya oo loogu yeerey nin sadexaad oo si aad ah loo amaaney oo la yiri wuxuu fiiriyaa Tusbax, Ninkani wuxuu ku fadhiyaa Kursi yaalla Sariir Wiilku uu ku jiifo, waxaa garab fadhiya Nin kaloo kaal-yihiisa ah, waxaa qolka kula jira Ay suuban iyo Maandeeq oo Wiilka jiradiisa si aad ah ula walwalsan. Ninkii wax fiirinayey wuxuu soo qabtey Wiilkii jiranayaa Gacanti wuxuuna fiiriyey Calaacashiisa, Afkiisa ayuuna ka dhaq-dhaqaajiyey sidii isagoo wax akhrinaya, wax yar ka dib intuu Gacantii meesheeda iska dhigey buu madaxiisa gil-giley. Ay Suuban ayaa markiiba intey ficilkaasi uu



sameeyey ka shakidey tiri Maxaad ku aragtey? Midkii kale oo Kaaliyihiisii kahaa intuu ku soo jeestey Duqdii buu ku yiri ka aamus oo hadalka ya-reeya waxba la idinka qarin maayee, marka uu hawsh-iisa dhameystana isaga idin sheegi doona e, ka dibna Ninkii wax fiirinayey wuxuu la soo baxay Tusbax, deedna tusbaxii ayuu xisaabey meel ayuu ku joojiy-ey, hadana dhanka kale ayuu ka soo xisaabey meel bu-una ku joojiyey, wax yar buu fikirey markaasuu si yaab leh u fiiriyey Maandeeq oo dhankiisa midig taagneyd, wuxuu mar labaad ku noqdey xisaabtii tus-baxa wuuna joojiyey ka dibna wuxuu mar labaad sidii hore oo kale u fiiriyey Maandeeq, markaasuu intuu is xanaajiyey yiri Dadka xaasidsana. Ay Suuban oo Indhaheeda meel aan isaga ahayn fiirinaynin ayaa markiiba la soo boodey ayaduna maxaad ku aragtey? Ma adigaa dhaley Gabadha buu yiri, Haa anigaa dhaley ee Maxaad ku aragtey? bal sug horta waxba ma ahane Wiilka tabcaanka ah arintiisa aan meel ku ogaane buu ugu jawaabey. Duqdii waxaa ku beermey shaki waxayna tiri adiga waxba ha naga qarinine waxaad ogaatey noo sheeg, deedna intuu hoos fiiriyey wax

yar uu soo jeestey buu yiri Gabadhu saanteedaa Badda lagu darey,Maxaa tiri Saanteeda hee!! Markaasuu hadana yiri Nin dheer oo madow gar dhuuban leh oo qaata Macawiis in mudda ahba ayada rabey ayaa Maalin intuu la hadley si xun ugu jawaabtey,ka dibna xaasid buu ku noqdey Saanteeduu Badda ku darey. Marka Gabadhu qalbigeeda oo dhan waa si kale waxay jeceshahay in ay iska safarto oo marba meel ay iska aaddo. Ay Suuban oo si aad ah oga naxdey waxa ninkani uu sheegayo ayaa markii intaas maqashey tiri Alla run badanaayey waa runtaa midaasi beryahan meel joog waan ku kariwaayey, ayaan dhoweyd Baydhabey aadey mar kalena waxay i tiri meel baan aadayaa marba meel bey rabtaa iney aaddo, isagiina Madaxa intuu ruxay buu qosley.

Sidee loogu siraad kori karaa oo loo soo celiyaa Saanteeda? Wuxuu ugu jawaabey waxba ma aha midaasi waan ka tashan doonaa ee marka hore middka Sariirta jiifaayaa darane isaga aan ku dadaalno ee mideeda waa wax laba beri lagu dhameyn karo e. Maandeeq marna ma aamin waxa uu sheegayo oo dhan,laakiin waxay ka xumaatey sida uu Hooyadeeda uga walweliyey. Haye Haye Wiilkuna maxaad ku aragtey? wuxuu yiri Wiilka arintiisa ma



sahlana ee meelo badan baa laga haystaa.

Marka hore waxaa jirta in maalin isagoo feero qaawan oo fadhiya Bersadda ay Gabar oo Xaafadaha dhow dhow ka timid soo gashey Guriga,waxayna si aad ah ula dhacdey Wiilka marka Gabadhaasi Isheeda ayaa gashey oo asiibtey. Ay Suuban baa hadashayoo tiri Alla Gabadhu qumayasanaa maxay ka rabtaa Wiilka maskiinka ah Guurna maba gaarinee;waa runtaa e isaguna waligiisba Feerihiisa isagoo Guriga jooga ma qarsan,waxaad moodaa Wiilku in dharkaba loo diidey. Midda kale waxaa jirtey in Habeen isagoo Guri mugdi ah ku cabaaya Caano uu Jinni ku fiiriyey Caanihii. Marka midda ugu daran uu hadda la jiifo waa Jinnigaasi oo dusha ka fiiriyey hadii uu taaban lahaana arintu si kaley ahaan lahayd,inkastoo ay saas tahay arintu ma sahlana oo wey culus* tahay,wuxuuna u baahan yahay Daaweyn Xoog badan. Wiilkii jiranaa markii uu intaas maqley waxaa indhihiisa ka soo daatey ilin,Hooyadiisa ayaa markii ay aragtey inuu ooyayo oo Wiilku cabsi iyo niyad welwel uu galey ayaa waxay ku tiri Hooyo aamus waxba ma ahane wax kastaba Ilaah baa ka weynee,deedna waxaa ayadiina Indhaheeda soo

qasbey ilin kulul,taasoo si xoog badan u soo dul martey dhafooradeeda. Kaaliyihii ninkii wax faalinayey ayaa intuu gacantiisa madaxa ka saarey wiilkii yiri aamus waxba hays niyad xumeynine waad iska caafimaadi doontaaye ee Hooyadaa kuu joogta oo aan waxba kaa xasdeynin wixii xoolo ay haysana Naftaada u hureysa.
Ay Suubanna waxay tiri aniga waxaan Wiilkeyga ka xasdo Illaahba iima barakeeyo.

Maandeeq ciil ayaa codkii kala gooyey madaxiina uu cuslaadey indhihiina wey casaadeen ma awoodo iney hadasho Ilinna kama ay soo baxayso. Ninkii wax fiirinayey wuxuu yiri aniga wixii Ilaah i barey waxba idinka hagran maayo. Hadda maxaa loo baahan yahay in la sameeyo?ay Suuban baa su'aashey. Wuxuu yiri hawshu waxaan bilaabayaa berito oo khamiista ah inta Jimcuhu uu na soo gelin,marka waxaa loo baahan yahay Neef Ari ah oo buuran,waxaana la gowracayaa aroortii hore qoraxdu intaaney soo bixin ka hor,marka la qalana dhiigiisa weeil ha lagu shubo,ka dibna todoba beri ayaan u jilib dhigeynaa oo aan la jihaadeynaa aniga iyo saaxiibkey isagoo far ku taagaya kaaliyihiisa. Maalinta khatinkana waxaa loo baahan yahay sadex digaag oo midabkoodu kala duwan



yahay. Markii ay tageen ka dib ayaa waxaa talo isugu yimid Ay Suuban,Walaalkeeda Warsame iyo Maandeeq. Ay Suuban waxay ninkii Faaliyey wuxuu yiri si tafatiran ugu sheegtey Aw Warsame,waxa kaloo ay u sheegtey in uu dhaqaalaha qoysku uu iska liito oo aan kharash arintan lagu fuliyo aan faraha lagu hayn. Maandeeq baa hadashayoo oo u sheegtey Abtigeeda in ay aaminsaneyn waxa ninkani uu sheegey oo dhan,waxayna soo jeedisey in la isaga talo baxo qorshihiisa oo wiilka dhakhtar lagula jihaado.
Ay Suuban baa ku qaylisayoo tiri Naa aamus Caruur baad tahayo waxba ma ogide,intey ku soo jeesatey Warsame bey ku tiri iska daa midaan hadalkeeda ayadaaba la yiri qalbigeeda ma joogo ee Saanteedaa Badda lagu darey Alla ha u soo celiyee isagaa soo celin kara e. Hooyo naga daa waxaasi waxba kama jiraane ee maxaa Saanteyda Badda ku darey weligeyba wax ninkani ka been badan ma arkin bey si ciil leh u tiri. Abtigeedaa canaantayoo hadana yiri Naa ha hadlin mar kale ee aamus baan ku iri. Waa yahay intey tiri bey qolka ka baxdey. Suuban baa hadashoo tiri Warsamoow hadaan hadalkeyga meesheyda ka sii wato Lacag lama hayo ee sidaas-darteed waxaan

LAgama maarmaan ah in alaabta guriga aan qaar iibiyo.
Hadee Alaab aad iibin karto miyaad haysataa.
Alaab quman oo aan haysto ma jirto,laakiin hadii laga fursan waayo waxaan iibinayaa Sariirtii abshir iyo Raadiyihii yaraa ee Maandeeq. Horta Abshir wax war iyo Warqad ah ma laga heley dhowaan? Mar dhexdaas ah ayuu warqad soo direy oo yiri meel la yiraahdo Khamiis Mushaat yaan shaqo ka bilaabey. oo Sacuudiga ah soo ma aha? Haa waa meel degmo oo Sacuudiga ku taal, ka dibna wax waroo kale kama aanan helin. Warsamana intuu joogsadey buu yiri haye hadee si kaloo la yeela ma lahane ee sidaad tiri bey arintu noqoneysaa.

Maandeeq waxay fadhidaa bersada waxayna la murag-san tahay dhibaatada qoyska soo food saartey. Tabakaay-adii waa la xirey Alaabtii Guriga qaarbaa la gadey oo Raadiyaheedaa ku jirey waxayna tiri walle waa run cudur in uu yahay caddowga koowaad ee horumarka bani'aadamka, waxayna ka welweshey khatarta noloshooda ku iman karta hadii arintu sidan ku sii socoto oo Ilaah meel kale aan wax uga sahlin,si aad ah ayey u niyad xumaatey,ka dibna waxay nafteeda u sheegtey in dhibaato kastoo looga bixi karo in la isku darsado samir iyo adkeysi,ka dibna waxay soo xusuusatey Mahad iyo sidii fiicneyd ay isu macsalaa-



meeyeen,Mahadna wuxuu tagey isagoo faraxsan,waxay-na u rajeysey inuu soo noqdo isagoo faraxsan oo Caafimaad qaba.

Todoba Beri ayaa ka soo wareegtey goortii oo Ninkii wax faalinaayey loogu yeerey C/Wahaab,Maal-intii koowaad ayuu wuxuu siiyey Dhiig,Dhiigaas oo uu u keeney Wiilkii Xanuun saa'id ah iyo Labbo-Labbo. Maanta oo ah Maalintii todobaad Suuban iyo Gabadheeda waxay ku mashquulsan yihiin diyaarinta iyo bisleynta sadexdii Digaag uu yiri waa Khatinkii Laakiin waxaa la yaab noqotey iney soo muuqan waa-yeen Saacadii qadada oo la filayey iney yimaadaan. Wixii la sugaba waxaa la gaarey Sadexdii Galabnimo, Suuban oo yaaban ayaa waxay ku tiri Maandeeq oo Nimankii maxaaa ku dhacay oo ay u iman waayeen? Waayo Beentooda ayaa soo gaabatey,waxay ogaadeen in ay wixii ay sheegayeen waxba ka jirin oo Wiil-kiina uu sii il darsadey,marka qasab bey ku noqot-ey iney gooyaan. Maandeeq oo Albaabka soo joogsa-tey ayaa waxay aragtey in ay laba qofood ay taagan yihiin Albaabka hortiisa,wey la hadleen oo waxay u sheegeen in ay dad safar ah oo gaajeysan yihiin, waxayna weydiisteen Kaalmo. Waxay tiri soo gala

ka dibna Hooyadeeda ayey waxay u sheegtey in ay wanaagsan tahay in Raashinkan wax laga siiyo oo lagu sadaqeysto Dadkaan gaajeysan,Hooyadeedna wey ka aqbashey. Labadii qofood markii ay Raashinkoodii cuneen wey iska tageen. Suubanna markii uu ka batey cawaadkii Wiilka oo ay waxay sameyso garan weysey ayaa markii dambe soo aadey Farmasiga bal in ay wax Dawo ah ka soo heli karto,markii ay soo gashey Farmasigii bey ku tiri Ninkii gadayey meesha Wiilbaa in muddo ah iga xanuunsanaa oo sariir ii jiifa,marka Dawo ayaan u rabey. Waxaa meesha ku jira nin gaaban oo bidaar leh,Ninkaan baa la hadley oo yiri ilaa iyo mudadee baa Wiilku jiranaa? Maandhow muddo badan buu iska socdey oo jiranaa,laakiin beryahan wuu ka soo darey. Weli Dhakhtar ma geysey. Maya. Maxaad u geynweydey? wey ka baarustey. Qof aan la arkin oo aan la ogaanin wuxuu qabo Dawo lama siin karo. Alla hadda waxaan sameeyaba ma aqaan hadii aad adiga sidaas i tiri.

Doctor Sahal naxariis ayaa gashey,wuxuuna yiri Gurigaagu waa xagee? Ma foga. Waa yahay ee nakeen. Waxayna ku soo dhaceen Gaarigiisa yaraa.
Dr Sahal markii uu arkey Wiilka aad buu u yaabey,wuxuuna yiri maxaad ku sameyseen ka dib goortii uu gaomihii



meel kasta oo jirkiisa ahaa uu ku taabtaabtey ee uu baarey. Goormuu Xanuunkani ku bilowdey? Ilaa iyo afar bilood wuu jiran yahay,marka ayaan dhoweyd baa Dhiig Dawo ahaan loo siiyey oo wuuba ka siidarey. Dr Sahal wuxuu si xanaaq leh u yiri Ilmaha markii ay jiradaan waxaa loo baahan yahay in si dhaqsi ah loo geeyo dhakhtarka,laakiin ma aha inaad Dhakhtarka tustaan markaad jiradii uu qabey aad ku raajisaan mid kalena aad ku ridaan,ka dibna Wiilkii buu u soo jeestey oo uu ku yiri Xagee lagaa hayaa? Cunada ma qaadan karo,Qufacna waa uu u weheliyaa ayaa Ay Suuban Tiri. Dr Sahalna wuxuu yiri bal sug isagaa ii sheegayee. Wiilkiina intuu gacantiisa ku taabtey Xabadkiisa iyo Caloshiisa yiri halkan baa i xanuuneysa. Dhakhtarka wuxuu arkey Wiilka jiradiisa baaris wanaagsan iyo wax ka qabasho deg deg ah in ay u baahan tahay oo uu dhaqaalaha qoyskuna uu yahay mid aad u liito,sidaas-darteed waxaa ku dhalatey naxariis,wuxuuna jecleystey inuu u kaalmeeyo. Ka dibna wuxuu yiri ee Ilmaha mid ha i soo raaco waxaan u soo dhiibayaa Dawo uu hadda sii qaato Berina Isbitaalka ayaan geynayaa. Suubanna waxay tiri Mahadsanid Ditoore ee Gabadhaa ku raacaysa wax ayada ka yarba nooma joogaanee; 

Maandeeq waxay la soo noqotey Daawo uu Dr Sahal Farmasi aan fogeyn uu ka soo iibiyey,markii ay Wadada la soo leexatey ayaa waxaa ka daba yimid oo loo joojiyey Gaari Masda ah. Waxaana ka soo degey Gaarigii Inan dhalinyaro ah oo Maandeeq markii ay aragtey ku tiri niyadeeda muxuu kaa rabaa hadana!! Isagiina wuxuu cod xiiso leh ku yiri Maandeeq iska waran isagoo u soo taagaya Gacan. Markii Salaantii ay ka qaadey buu yiri oo Beryahan waa lagu waayee,meeshiinana dhowr jeer baan imid oo wey xirneyd. Waan joogey bey cod gaaban ku tiri.Markii saanteeda u qaadey in ay socoto ayuu hadana yiri Walaahi hadeer markaan ku arkey sidaan u farxey ma maleyn kartid,isagoon hadalkiisa joojin buu hadana yiri waa taan kuu sheegey in aan dhowr habeen halkan kuu imid ee waxaan rabey in aan mar ku casuumo oo Hoteelada waaweyn iyo Caweysyada intaan isaga soo caweyno oo aad iska soo Aariya qaadato ka dibna aan ku soo celiyo,ileyn ma og tahay midaas Maskaxdaaba u baahane,mar kastaba ma aha inaad xaafadahaan kuleylkooda aad dhex joogtid. Maandeeq waxay si aad ah ogaxanaaqdey sida uu Wiilkani ula hadley. Wax yar bey fikirtey,markii ay Maskaxdeeda ka heshey jawaabta



toosan ee ku haboon in loo celiyana intey laba talaabo dib u qaadey bey tiri i dhageyso:-

Asalkeygaba anigu caadadeydu sidey tahay
Culimadaan casiisaa iyo Caalamiinta kala e,
Caweysyada ma aadee Aayadahaan akhristaa,
Weli layma canaanan Ifka intaan soo baxaye,
Indheergaradku siduu yiri Caaqil baan ahaye,
Ciiddaan u ooyaa iyo Ummaddoo midowda.

Markey intaas tiri bey isagoo meeshiisa taagan ka dhaqaaqdey,Ilkacasana isagoo dareemaya Laciifnimo iyo jab ayuu wuxuu Indho taataagan ku eegayey Maandeeq ilaa uu muuqeeda ka waayo,ka dibna Gaarigiisa ayuu dib ugu noqdey.

Maryama Luul oo ku jiifta Kursi dheer oo ka mid ahaa Kuraastii Qolka Salootada ayaa markii ay maqashey Sahro yarey oo leh Qolkey ku jirtaa Madaxa kor u soo qaadey. Waxaa Iridka soo istaagey Shiino oo ay aqoon durugsan isu lahaayeen iyo Gabar kale oo la socotey.

Shiino ayaa hadalkii ku hormartey oo si kaftan ah u tiri bal arka Naagtii inta ahayd meeley daadsan tahay. Maryama Luulna intey ku qososhey bey tiri wariyaa Shiino waa adigii lagu waayee xageed ka soo dhacdey, ka dibna intey soo fariisatey bey tiri soo gala oo fariista, markii ay isasalaameen oo ay fariisteen bey hadana tiri war xageed isku qarisey? Waxayna ugu jawaabtey inkastoo aan ka xumahay inaan kuu sheegin oo waqtigii baa igu soo gaabtey ee Ninkiibaa Fiisa siyaaro oo sadex bilood ah ii soo direy. Oo hadda sadex Bilood baad Sacuudiga ku maqneyd miyaa? Haa ee intaas baan maqnaa. Laakiin walaaley inaad ila socodsiiso bey ahayd Alaab yar yar baan kuu dirsan lahaa bey Maryama si eedeyn ah u tiri. Waan ka xumahay Saaxiib Safarkii baa i soo guda galey. Ninkaagiina ka waran soo iskama xoogsaneynin. Haa aad buu u wanaagsanaa, wuuna shaqeynayey. Anigu beryahan meel ma aadin, sideena kalena waan u caafimaad qabnaa, ka dibna intey fiirisey gabadhii shiino la socotey bey tiri Gabadhaan Saaxiibtaa isma naqaanee maad iskeen bartid. Markaasey ayadiina tiri haa Gabadhani waa saaxiibtey, waxaana la yiraahdaa Ruuney, hadana intey u soo jeesatey Gabadhii kale bey tiri waa Maryama Luul. Ayagiina si fiican bey isu gacan qaadeen, ayagoo



mar keliya wada yiri barasho wanaagsan, ka dibna hadal keliya ayaan idinku maaweelinayaaye tiri Maryama ayey u qaylisey Sahro yarey oo dibadda joogta, waxayna tiri wax qabow noo keen. Shiinaa hadashayoo tiri Walaaley Calooshiina wey na buuxdaa Afkiina waan ka ooman nahay, hadana maanta hadal iyo xaajo aan waligey gelin baan ku soo daaley, ka dibna Ayadii iyo Ruuney intey is fiirsheen bey isku qosleen. Maryamana waxay tiri kuleyl daran baa jira beryahan soo Maarso ma aha, laakiin saaxiibey xaajadaan maanta aad gashey oo aad ku soo daashey maxay ahayd?

Sahro yarey oo wadda Saxan balaaran oo dushiisu ay saaran yihiin saddex dhalo oo Faanto ah iyo saddex Bikeeri ayaa Albaabka ka soo gashey, waxayna saartey Miis yar oo hortooda yaaley. Haya ee xaajo kale ma ahee markey tiri bey intey joojisey hadalkii ku tiri saaxiibteeda Maryan waa walaasheenna waxba ka qarsanneyno, ayadoo ka raadineysa kalsooni ay ku sii wadato hadalkeeda, ka dibna mar kale intey u soo jeesatey Maryan bey ku tiri Ruuney iyo Ninkeeda ayaa labadaan beri isku keenay, kala maslaxayntood ayaan ku jirey, Dumaashigay

inkastoo uu khaldanaa hadana hadal wuu iga maqlayey oo isagaaba arintaan iigu yeerey,laakiin Qofta mar hadii ay kacdo war kaa maqleynin oo aydoo dhan is bedeleysa waatan bey tiri ayadoo far ku taageysa saaxiibteeda. Ruuney ayaa hadalkii ka qaadatey oo tiri walaaley waxba sidaas ha dhihin aniga intuu qof bani'aadmi ah uu deggan yahay waan degganahay e, laakiin Ninkani si aad ah ayuu iiga xanaajiyey,wax badan baan u soo dulqaatey,laakiin sida uu ku dhaqmaayo ayaan ahayn si dhaqan ku hagaagayo oo labo meel ku wada joogto,iska daa horaa loo yiri Naagna Ninkeeda ma hesho Ninna Naagtiisa ma helo bey hadalkeeda ku joojisey. Maryama Luul baa hadashey oo tiri walaaley ninka dhaqankiisa siduu yahay,muxuuna kugu sameeyey? Shiinaa ayaa hadana hadalkii ka soo dhex gashey oo si kaftan ah u tiri war qoftan aad bey u maseer kulushahay oo waxay leedahay Ninkeyga habeenkii Fiidkii waa in uu soo xaroodaa. Ruuneey oo hadal maagtey ayaa waxaa hadalkii ka dafey Maryama Luul oo tiri kaaley adiga maxaad Gabadha uga soo horjeedaa waa adigii marka hore lahaa Ninkaa gardaran ee. Haa ee markii ay u sheegtey ineysan jecleyn soo daahidiisa Habeen buu isagiina hadalkii sii kiciyey oo heer dagaal



gaarsiiyey,laakiin ayada waxaa laga rabey iney iska deyso mar hadii ay ku kariweydey in uusan soo daahin habeen. In ay iska deyso aa!! bal walaaley qoftan waxay ku hadleyso maqal bey Ruuney si cabasho ah ugu tiri Maryamo Luul oo dhagaheeda sheekada u taagan,Walle Naagtii sakh dhexe Albaabka loo soo garaacey oo nabad ku furtey ma ahi oo Gurigeyga ma Brunto iskoorsaad moodey. Shiino ayaa markii ay intaas maqashey u qososhey sidii ayadoo Kelyaha laga taabtey,ka dibna tiri waxaasaa maseer-Jacayl dhaley ah. Markaasaa Maryama Luulna ka hor geysey war mar ii kaadiya mar ii kaadiya waxaad Maanta waddaan waa Mas'alo micno u baahane,oo waxaad i leedihiin Nin baa maya yaqaan oo weliba maaro looga la'yahay mar hore imow Gurigaaga miymaa? Macal asif waan ka xumahay midaas walaalayaal. Ma ahan in ay Haweenku maseeraan,laakiin ayadaa maskiin ah oo aan baran maareynta guriga.

Shiino ayaa ugu jawaabtey aniga ma maseero Ninkeyguna Maya ma yaqaan miyaad adiguna na leedahay? Waa jirtaa Maalin kasta in aan maqlo Maseer,laakiin weli m ima taaban anigu,inkastoo aad moodo in aan ka tashadey mar hore. Hadaad Maseer ka

tashatey mar hore waa Mas'alo kale ayaduna ayaa Shiino cod gaaban ku tiri. Waxaa si qiiro leh oo aad moodo in uu dhiigii kacay ugu soo dhex tuurtey hadal Ruuneey waxayna tiri war Maseerka aad sheegeysaan iyo moolka aad sii galeysaan iyo meesha aad ku wad-daan ma aha arinteyda ee waxaan idin leeyahay muran doon baad tihiin. Shiinaa ugu jawaabtey macaaney ka soo tag midaadii maryan oo ku leh Maseer baan ka ta-shadey soo la yaabineysid!! Taasi waa hadal micno u baahan. Anigaa idin kala micnayn markii ay tiri Maryama ayaa waxaa ka soo dhex gashey Shiino oo tiri maxaad noo kala micnayn Nin baan maya u diidey iyo ma maseero anigu marna kaa dhageysanneyno ee meeqaa Rag iyo Dumar u miir la' maanta Maseer dartii.

Maryama Luul fadhigeeda ayey hagaajisatey, waxa-yna tiri Malyuunka waaley Maseerka maskaxdoodaa lac-iif ah ee ma aqoon sida loo dhaqmo oo murug bey isga-liyeen, ee mid yar iga dhageysta, ka dibna intey fiiri-sey Ruuney bey tiri marka hore aan ku su'aale ee mar ka Ninkaaga uu soo daaho Habeenkii maxaad ku oran jirtey oo dhaqsi ma oga furi jirtey Albaabka? Ruuney Madaxa intey gilgishey bey tiri muddo intaan ka aamusnaado baan ku dhihi jirey ku noqo meeshaad



ka timid goortaan Jaalle kaa furimaaye. Hadaba midaasi ma ahayn jawaabtiisa, mana aha sida Ragga loola dhaqmo ee waxaa lagaa rabey in aad tiraahdo adoo Wejigaaga welwel ka muujinaaya Wehelkeygii sanaayow maxaa ku heley Caawa oo aad la soo raagtey, Walbahaar baad i gelisee oo mar haddaadan i ag joogin Hurdadu wanaag uma helo ee mar kale ha i yeelin sidaan oo kale Gacaliye. Markaad sidaas ku tiraahdo sidee bey niyadiisa noqoneysaa, waxaan u maleynayaa inaad qiyaasi kartaan. Waan hubaa wixii Habeenkaasi ka dambee-yana inuu Fiidkii soo hoyan lahaa. Shiino iyo Ruuneey intey is fiiriyeen bey isku qosleen, ayadiina hadalkeedii bey sii wadatey oo waxay tiri hadee Runtey soo ma aha? midda kale hadii ay Hawshu kaa badato oo aad rabtid inaad hesho Ruux kaa qabta hawlaha adadag oo kaaga shaqeeya Hoyga, waxaad ku heli kartaa haddii aad ku tiraah-do adigoo xushmad u muujinaaya, xiisana u yeelaaya hadalkaaga Xabiibkeygiiyow waxaan la yaabey Ragga jooga Magaalada kuwo aad weligaa arag baa korka salaamaya, kuwo kalana wey kuu qoslayaan, kuwana wey kula hadlayaan oo waxay kaa raadinayaan Sheeko iyo isbarasho haddee waa ayadoon xataa

jirin cid ku faduulisey iyo cid kor kuu soo eegtey midna. marka uu ku yiraahdo maxaa ku tusaya raggaas oo dhan oo kaa hor keenaya horta isagoo dhiigiisa yara kacay oo maskaxdiisa ay ku kulmeen kalsooni weyn oo xagaaga ah iyo Masayr kii ugu kululaa,ayaad waxaad ku leedahay oo haddii aan Aroortii ku kalahin Kawaanka oo aan ka soo adeegin Dukaamada waxaan karsan lahayn yaa ka doonaaya Suuqa. Anigaa kuu huba wixii ka dambeeya habeenkaas inuu kuu keenaayo Gurigaaga Booyaaso ku caawisa oo kuu shaqeysa. Marka arin waa iga Su'aale ma sax baa hadalkeyga mise si buu u qaloocan yahay? Shiino baa ugu jawaabtey waxaad noo sheegtey inaad ka soo baxdey Jaamacad sare ee sirta iyo siyaasadda oo Ragga lagu sabo,inkastoo Ragga oo dhan maskaxdooda sinayn oo ay ku jiraan qaar aan sahlanayn.
ma badna kuwaasi Shiino ee waxaan hadalkeyga ku soo koobayaa sir Dahab ah ayaan idin siiyey ee soo tijaabiya. Shiino intey qososhey bey sara joogsatey waxayna tiri Ruuneey maan sii socono,Maryama Duulna wey la soo saanqaadey,markii ay ka soo noqotey ayaa waxay aragtey Ay Warsan oo Bersada Bishaah ku oabeysay,intey fiirisey oo ay soo dhaaftey gashey qolkeeda bey ku tiri



niyadeeda Duqdaan halkan iney iska degto ayey rabtaa oo maba socoto,maya maya wax soconaaya ma aha midaasi,maxaa yeeley labaatan iyo afar saac Shaah bey Afka ku hayne oo marba meel la faariisani Shamiindadii bey qori ku jiidjiidi oo dhulkii Baadiyaha ay ka timid miyey moodi Gurigeyga,bal sug maanta Diiriye ha ii yimaadee ee waxaan leeyahay naga Safri Duqdaan oo waan in ay socotaa.

Ka dibna dibadda ayey u soo baxdey waxayna ku fariisatey Kursigii ay ka kacdey Duq Warsan. Wax yar ka dibna Diiriye ayaa Iridka ka soo galey Maryama Duul markey aragtey bey intey fadhiga ka boodey bey kaga hor tagtey Albaabka,kuna soo dhoweysey dhunkasho labada dhabnood ah,ka dibna intey ka qaadey Alaabtii gacantiisa uu ku sidey bey ku hogaamisey Hoygooda jiifka,intey Sariirta kula fariisatey bey tiri Alla waad baaba'dey oo Nafba kuguma jirto,orod iyo shaqo baa ku dileene horta Muraayadda ma isku eegtey dhowaan,Diiriye Jaakoolehaadi inaad tahay miyaad ismoodi,ka dibna intey qososhey bey tiri Ninkaagii quruxda badnaa iyo sidaad noqotey hadaad is arki lahayd. Isna intuu

qosley oo uu Gacantiisa ku soo laacay buu yiri Naa tag aniga qurux weligeyba ma yeelan e. Anaa ku iri waabaa dhaldhalaalkaaga qalbiga Dad ka cawiri jirey, markaasaa hadana hadalkeeda sii raacisey xusuuso horta waayowaayo. Intuu wax yar Ilko cadeeyey buu yiri waqtigii hore tag Maryamaay Maxaan xusuusanaa oo dhaldhal aalnaa waa anaga afar iyo labaatan saac Aduunyo Ul u sidana oo eryeyna,ka dibna intey riix-riixid Lugiihiisa ku bilowdey bey tiri Diiriyoow Maanta Beled Weynaa laga yimid,goortaasuu yiri oo yaa ka yimid. Islaantii gedisleyda ahayd ee Mako miyaad xusuusataa? Haa ee Mako iska dheh,waa islaantii derisk ahaydeen e soo ma aha? Haa waad garatey waa ayada. Oo maxay sheegtey. Nabad iyo barwaaqey sheegtey,cidiin iina wey iska caafimaad qabaan oo wey idin soo salaamayeen bey tiri,waxaa kaloo idin soo salaamayey bey tiri Waasuge,waxayna fiirisey Indhihiisa,waxayna arag-tey in uu markiiba wejigiisa si aad ah isu bedeley, wuxuuna la soo boodey oo muxuu naga soo salaamayaa? Oo maxaan ka ogahay,ma anaaba hadalkeeda sii raacey; Alla hoogayey labadaan beri anigu maskaxba ma lihi wa aniga iska kaa ag fadhiya,sidaad kulaylka uga timid we wax qabow oo aad cabto kuuma keenin intey tiri oo ay ka degtey Sariirtii u daartey Air Condition ayaa



waxay aadey dhankii Qaboojiyaha uu yaaley,intii ay dhexda socotey bey waxay ku qososhey sida uu u Masayrayo.

Waasugaha ay sheegeyso waa Ninkii isaga iyo Diiriye Jaakoole ay ku tartamayeen Arooskeeda [illegible]-labaatan sano ka hor,salaan uu u soo direyna ma jirto,laakiin waxay dooneysey in ay ogaato Ninkeeda masayrkiisa inta uu le'eg yahay. Ilaa ay ka soo noqoto ayadoo wadda Galaas Caano qabow ay ku jiraan Diiriye Jaakoole wuxuu qalbigiisa ku lahaa waxaan la yaabey Ninkani Waasuge ah wuxuu weli Islaantan xaaskeyga ah uu u daba ordayo oo ay qalbigiisa oga go'i la'dahay.

Ka dib markii Caanihii qaboobaa uu dhameystey bey tiri Diiriyow arin yar baa jirta oo beryahanba aan rabey inaan kula socodsiiyo,hadana si baad u yara mashquulsaneyd oo waxaan is iri isagoo Maskaxdiisu deggan tahay u sheeg . oo maxaad iigu sheegi weydey? Maxayna ahayd arintaas? Waxaan ka cabanayaa Duq Warsan oo runtii ilaa xad aan u soo dulqaatey. Oo maxay kugu sameysey? Waxay ku leedahay Raadiyo ha igu daarina ee maskaxdeyduu ka dhex yeerayaaye,Qolka Salootada bey Shaah ku dhex

daadineysaa,kaaga sii daran ayaan dhoweyd waxaan u tegey ayadoo la xarbineysa Telefiishanka oo leh ma Sanduuq baa,hadii aanan ka gaari lahaynna weyba soo ridi lahayd. Hadii aan la hadlana wey igu xanaaqeysaa oo waxaasi sidaas ha yeelin lamaba dhihi karo ee midda kale aniga Nafteyda Madax xanuun aan qabey baa igu soo kacay oo buuq iyo hadal kama bixi karo, Hadaba anigu waxaan soo jeedin lahaa inaad iska dirto Duqdaan oo Baadiyaheeda ay iska aaddo,amba ayaan dhoweyd waa taan direy walaashey Arddo oo aan iri Gurigaagaa kuu baahane iska noqo,ayadoo weliba wax dhibaato ah aaney igu hayn.

Diiriye intuu cabaar aamusnaadey buu yiri Duqdan hooyadey daaweyn bey u timid,Daawadeeduna weli uma ay dhamaan,midda kale waxaan rabaa in aan mar kale Dhakhtarka ku celiyo ee markaan arimaheeda u dhameeyo baan dirayaa ee ilaa iyo intaas iska dulqaado. Wejigeeda intey bedeshey bey tiri oo dulqaad kaloo intaan ka badanaa,waxaan ku leeyahay talo ma haysid ee hadii ay sidaas tahay marka anigaad i direysaa oo tegaya hal bil oo nasasho ah ee adiga iyo Hooyadaa wada jooga. Tegayaa aa Xageed aadeysaa? Waxaan aadayaa B/Weyne. Maxaad ka dooneysaa B/Weyne?



ma aadeysid baan ku iri. Ma tegeysid aa!! waad hadashey oo waad arki doontaa inaan tegi karo iyo in kale,ka dibna waxay si xanaaq leh uga baxdey Qolka. Diiriye Jaakoole murug baa la soo deristey,wuxuuna bilaabey inuu isla hadlo wuxuuna yiri Wallaahi waa dhibaato waxaan sameeyaba ma aqaan Duqdana ma diri karo,middaan kalena hadaan iriaahdo Bil ku soo maqnow B/Weyne kii Waasuge ahaabaa jooga oo waxani waa Haween,waxaa laga yaabaa in uu iga faduulsado,midda kale hadii ay iga tagto noloshеydana wey xumaaneysaa oo waan cidloonayaa; Waxaan la yaabey sida ay u noqotey qayb jirkeyga ka mid ah oo ay qalbigeyga oo dhan ula wareegtey, ka dibna dibadda ayuu u soo baxay.

Maryama Luul Bersada ma joogto,wuxuu tagey Albaabka hadana Guriga ayuu dib ugu soo noqdey, markii uu soo agmarayey Qolkii ay ku jirtey Hooyadiisa ayaa waxaa u yeertey Hooyadiisa,waxayna ku dhex jirtey Qol yar,waxaana dhulka u yaalla Joodari. Markii uu soo galey Joodarigii ayuu gees kaga fariistey wuxuuna yiri haye Hooyo bal waran Caafimaadkaaga hadda sidee buu yahay? Diiriyow sidii hore hadda waan ka roonahay ee Al Xamdulilaah.

Hooyo waxaan mar kale kugu celinayaa Dhakhtarka bal hadana inuu Daawo kuu soo qoro. Maya Hooyo Dhakhtar dambe u noqon maayo,waxaan jeclahay inaan markan Caradii iska aado oo aan iska laabto. Oo maxaa jira Hooyo oo hadda ku celinaya? ayuu yiri Diiriye isagoo ka shakisan iney Hooyadiisa doodii dhex martey isaga iyo Afadiisa dibadda ka maqleysey.

Gurigeyga inaan aadaa ii roon. Wax dhibaato ah oo aad halkan kala kulantey miyaa jira? Wax yar markey aamusgaartey kuma lihi,laakiin sidii qof waalid ah ku habooneyd in loola dhaqmo loona tixgeliyo laylama dhaqmin,tixgelin warkeeda iskaba daa e. Wax badan oo aan dhibsadey baa jira. Maxaa ka mid ah? Hooyo waxaakaa naxayaa ee Nin qalbigiisa jooga oo wax la socon karo ma tihid ee qalbigaaga Alla hakuu soo celiyo, wey sii wadatey hadalkeeda waxayna tiri hadaad wax arkeyso meesha maanta aan jiifo intaad aragto kama aamusteen. Diiriye intuu fiiriyey Gogoshii ay ku jiiftey ayuu yiri ee Hooyo adiga soo maadan dhihin aniga Sariir kuma seexan karo ee Madaxaa i wareeri oo waan ka soo dhacayaa. Intey yaabtey Madaxa ay



gilgishey bey hadana qososhey,waxayna tiri oo Warkaas Beenta ka weyn yaa kuu sheegey!!! Maryama Luul baa sidaas igu tiri. Marka adna waad ka aqbashey miyaa? Diiriye aad buu ula murgey hadalkaas Hooyadiisa tiri,wax uu ku jawaabana wuu garan waayey,wuuna iska aamusey. Duqdii baa hadana hadashey oo tiri Wiilkeygiiyow marka hore waxaad ogaataa iney caruurtaada ahayn caruur Waalid wax ka og oo ixtiraam leh,midda kale Islaanta aad qabto ayaduna weyba ka daran tahay oo qof ayada la dhaqan ah weligeyba ma arag ee qalbigaaga oo dhan wey la wareegtey,Gacanteedey kugu duubtey oo mar horey ku milkisey ee aniga ma jecleyn in Gurigaaga sharaftiisa iyo dhaqankiisa ay sida tan noqoto oo waxaan rabey inaad noqoto Qof Maskaxdiisa ay deggan tahay oo xaaladda Gurigiisa ka war qaba. Aniga horta Waalid wax dhaley baan ahay,wax xumaan ah oo hadda Caloosheyda ay kuugu jirto ma laha, laakiin waxaan kugula talinayaa inaad qalbigaaga dejiso oo aad hagaajiso habdhaqanka Caruurtaada iyo Xaaskaaga ee midda kale Hooyoy waxaan kuu sheegayaa:- " NAAGI JACAYLKAAGA BAR BAA LA SIIYAA, BARNA WAA LOO QARIYAA "

Diiriye Jaakoole isagoo naxsan buu fadhiga ka kacay,wuxuuna u soo baxay dibadda,wuxuuna saddex jeer u yeerey Wade Abuukar oo uu moodayey inuu meelahaas ka soo dhow yahay,goortii uu wax jawaab ah uu waayey ayuu inta uu galey qolkiisa la soo baxay Fure Gaari kale oo Toyota Cressida ah oo Garaashka ku jirtey,ka dibna isagoo isla hadlaya ayuu ku soo dhacay Gaarigii,wuxuuna si waali ah u soo fuuley Waddada Maka Al Mukarama isagoon iska eegin Nalka Cas oo Gawaarida kala hakiya ee Badbaadada waddooyinka,wuxuuna ka soo baxay Waddada dhanka Guriga Shaqaalaha,markii uu soo galey Waddada waxaa si xoog leh ugu dhacay Gaari kale oo ah Land Cruiser oo ku socdey Xawli aad u sareeya oo Waddaduna ay u furneyd, wuxuuna ka yimid dhanka Dabka. Isla daqiiqadiiba waxaa Isgoyska Shaqaalaha soo buuxiyey Dad fara badan oo isugu jirey kuwo u jeedey shilka siduu u dhacay,kuwo kale oo maqley dhawaaqii naxdinta lahaa oo labada Gaari ee isku dhacay ka dhashey iyo kuwo kale oo dareenkooda soo jiitey Dadka faraha badanaa oo ordaayey. Waxaa si ba'an u burburtey Toyotadii Diiriye,waxaana hoos daadanaayey Dhiig. Diiriye oo dhamaan Dadkii arkey Wejigiisa ka wada jeesteen oo qalbigooda siinwaayey



in ay daawadaan ayaa waxaa loola cararey Isbitaalka Madiino,waxaana islamarkiiba u soo gurmadey Kalkaalayaashii,waxaa kaloo ayaguna si dhaqsi ah u soo hawl galey Dhakhaatiirtii waaweyneyd oo goortaas halkaas heeganka ku ahaa,waxaana markiiba la saarey Miiska. Markii ay Dhakhaatiirtu si wada jir ah u eegeen xaaladiisa,waxay aqoontooda tustey oo ay isla garteen in rajada noloshiisa ay aad u xun tahay. Nus Saac ka dib ayaa waxaa Albaabka ka soo gashey Duq Warsan oo naxdintii ugu weyneyd iyo murugo ay wejigeeda ka muuqdaan oo ay la socdaan Baashi iyo Ilkacase,goortii ay tagtey Sariirtii Diiriye uu saarnaa bey ag fariisatey,ka dibna Madaxiisa intey kor u qaadey bey dhabteeda saartey,iyadoon maqleynin Gabdhihii Kaalkaaliyaasha hadalkooda. Diiriye goortaasi wuxuu lahaa miir yar,waxaana ku jirtey naf xun. Ka dibna Hooyadiisa ayaa waxay ku tiri Diiriyow,markaasuu isagiina cod gaaban oo laciif ah ku yiri ma Maryan baa? ka dibna Hooyadiisa oo ka ooyneysey Beerka ayaa waxay ugu jawaabtey Hooyo Alla Hooyo waa aniga. Hadana wuxuu cod maqalkiisa aad u hooseeya ku yiri Hooyo i cafi i cafi,Naftiina wey ka baxdey.

Duq Warsan Aduunkii ciriiri buu la noqdey, waxaana indhaheeda ka soo daatey Ilin kulul, ka dibna waxaa si naxariis leh ula hadley oo garbaha soo qabtey Gabdhihii Kaalkaaliyaasha, markii ay ka soo baxayeen Albaabka ayaa waxaa ka hor timid Maryama Luul oo ay la socdeen Istaahil iyo Geni.

Dr Sahal markii uu iridka ka soo galey Maandeeq fadhiga ayey ka sara kacdey, waxayna ku soo dhoweysey weji aad u furan, ka dibna wuxuu fariistey Kursi meesha yaaley, markaasuu yiri labadaan beri waan mashquuley oo waan ka gaari waayey in aan u tago Wiilkii ee bal ka waran? Ditoore aad buu u fiican yahay hadda, Saakadan ayaa igu dambeysey runtii si aad ah ayuu isu bedeley. Hooyana aawey? Haa isagey la joogtaa, markaan aniga ka imid bey iyaduna aadey. Xoogaa baan u sugeynaa, muddo yar ka dibna waan ka soo saareynaa Isbitaalka. Markuu intaas yiri buu haddana hadalkiisa raaciyey meel baan u degdegsanahay oo waan sii tegayaa wuuna kacay. Maandeeqna waxay tiri Ditoore wax la cabbo ayaan soo wadaaye ee sug. markaasuu yiri maya ee meel baan ka daahayaaye Mahadsanid ee Hooyo igu salaan. Waayahay adigaa mudan.



Dr Sahal ka dib markii uu geeyey C/Wahaab Isbitaalka oo la baarey ayaa waxaa laga heley TB Cudurka Qaaxada, ka dibna wuxuu si deg deg ah u seexiyey Isbitaalka Laasareeti, laakiin markii Ay Suuban iyo Maandeeq ay maqleen cudurka laga heley Wiilkooda aad ayey uga naxeen. Dr Sahalna markii uu arkey in ay Duqda cudurka Wiilkeeda lagu sheegey iney u haysato in uu yahay cudur aan la daaweyn karin oo laga faano oo aan cidna loo sheegan karin ayaa wuxuu si qumaati ah u fahamsiiyey ugana dhaadhiciyey cudurkaasi sida uu yahay iyo daaweyntiisa asagoo la kaashanaya aqoontiisa dhakhtarnimo, wuxuuna u sheegey inuu cudurkan yahay cudur laga adag yahay oo la daaweyn karo oo fikradaha dadka qaarkood ay ka qabaanna yihiin kuwo aad u qaldan, wuxuu intaas ku darey aniga maanta waan faraxsanahay waayo waxaan soo ogaadey waxa Wiilka jiradiisa ay tahay, waxa lagu daaweeyana waan aqaan, laakiin ma faraxsaneyn markii hore oo aan arkey Wiilka jiradiisa oo aan weli helin jiro noocii ay ka ahayd, adigana hadda waxaa haboon inaad faraxdo oo aad Ilaah ugu mahadiso in la heley Wiilkaaga jiradiisa oona boqolkiibàboqolna aan ku

rajo weynahay in lagu guuleysan doono daaweyntiisa. Ay Suuban markey intaas maqashey wejigeeda wuxuu isu bedeley mid farxad leh,waxayna marka hore u mahadis-ey Ilaah ka dibna Dr Sahal.

Goortii uu tagey Dr Sahal,Maandeeq waxay niya-deeda ku tiri waxaan hubaa in uu Ninkani ka mid ya-hay Dadka Aduunyada ugu bani'aadannimo fiican,uguna naxariis badan,waxayna aad ugu faraxsaneyd in marka-ni ay ka baxeen ciriirigii xumaa ay ku jireen,ka dib markii C/Wahaab cudurkiisa la ogaadey isbitaalna la dhigey oo Abshirna uu Sacuudiga uga soo dhiibey Reer-ka Lacag wax qabasho leh iyo Dhar oo ayadiina ay bilowdey Fhaqadii Qaranka oo ay wax ka dhigeyso Dugsi H/dhexe oo ku yaal Degmada Madiina. Waxa kaloo oo ay si aad ah ugu faraxsaneyd sida isdabajoogga ah ee Mahad Waraaqaha ugu soo dirayey.

Ka dib markii ay niyadeeda kala sheekeysatey arimahan farxadda leh ayna tiri Ilaahow adaa Mahad leh,ayaa waxaa Albaabka ka soo galey Shukri iyo Dhudi oo ay Iskuulka wada dhigan jireen,markii ay arag-tey intey istaagtey bey tiri haye Maanta waa la yim-id,goortii ay isasalaameen ka dib ayey tiri fariista oo soo dhowaada. Markii ay iswareysteen ka dib ayaa



Shukri tiri war farxad leh iyo Warqad baan kuu wadnaa,Maandeeqna intey qososhey bey tiri bal iga farxiya maanta aan idin arkee,ka dibna Dhudi baa ka soo saartey Warqad Boorso yar oo ay wada-tey,waxayna u dhiibtey Maandeeq,Goortey aragtey Warqadii bey tiri Walaaley maxaa ku yaalla?weyna ka guddoontey. Shukri baa ugu jawaabtey far-soo-maaliga waa taqaanaa baan u maleynayaa,ayadiina wax yar ka dib markii ay akhrisey wixii ku qornaa Warqadda bey intey kor u soo eegtey ayadoo qosley-sa tiri Hambalyo baan anigana leeyahay Aamino cadd-ey Arooskeeda,ka dibna shukri baa tiri waxaan kugu nimid Arooskan digidiisa ee ka soo qaybgal wacan.

Waxaa Albaabka oo iska furnaa ka soo gashey Ay Cambaro. oo si tartiib ah u soo dul istaagtey Ay Cambaro. Maandeeqna markii ay aragtey fadhiga intey ka boo-dey bey si aad u xushmad badan u soo dhoweysey, waxayna isbartey Gabdhihii iyo Islaanta timid,ka dibna intey baxdey bey waxay la soo noqotey Tar-muus Shaah ah iyo dhowr Bakeeri,waxayna soo farii-satey Cambaro horteeda.

Ay Cambaro waa Maandeeq Umulisadeeda,waana qof aad u sheeko badan oona dadka ka qoslisa,

wax yar markii ay fadhiyeen ayey hadashey oo tiri Maandeeq Gabdhahani ma meel kaley ka yimaadeen mise Muqdishey deggan yihiin,koley saan filayo reer Madiino ma aha bey hadalkeeda hadana ku dartey.

Haa Magaaladey ka yimaadeen oo waa Gabdho saaxiibadey ah Aroos beyna ii soo digeen. Haye Gabdhow, Gabar aan Arooskeeda xujeyn baa la guursanayaa miyaa? Alleylahe waan ku faraxsanahay oo waxaan leeyahay khayr qabaha wax guursanaya iyo Gabadha Alla ha isku dhaqo e wax kastaba in la dhaqmaa ka weyn e. Gabdhihiina intey si wada jir ah u qosleen ayaa Shukri tiri oo Eeddo Gabdhaha ma Arooskoodey xujeeyaan? Waxay ugu jawaabtey Gabdhaha hadda jooga soo ma aha qaar baa Arooskooda si aad ah u adkeeya oo waxay leeyihiin casrigeynu la soconaa oo waa in ay waxeenna oo dhan ay casri ahaadaan,markaasaa haddana laba Beri ka dib inta ay isku xanaaqaan Nimankooda la soo furayaa. Oo maxaa jira oo loo soo furayaa? Dhudi baa su'aashey. Oo Naagtii Guurkeeda adkeysey miyaaney Furniinkeedana fududeyneynin?,waxay intaasi ku dartey Gabadha Guurdoonka ah,Caruurdoonka ah ayaa Guur raaga iyo Guri deggan yeelaneysa,sideedaba horta mar hadii Guur la yiraahdo qofka waxaa haboon



in uu ku guursado sida ugu sahlan ee uu ku yeelan karo guri iyo dhaqan sharaf leh, isagoo fiirinaya ujeeddada weyn ee ka dambeysa guurka, laakiin ma aha inaad tiraahdo ayadoo armaajooyin iyo alaab casri ah laga keenin dibadda, ciyaaro kala ceeyn ceyn ahna la ii ciyaarin kuu aqal tegi maayo; ama in laygu yiraahdo iminiin baa lagu guursado arbacana waa la furay, alaabtii aqalkeeda iminka waa iib. gabdhihii intey is fiiriyeen bey qosleen, markaasey ay diina tiri hadey soo runtey ma aha? kaddibna hadalkey sii wadatay oo waxay tiri waxaa soo dhan ilbax isku sheeg baa abuuroo casrigey la socdaan ee annaguse ma aqoon. waayo? annaga waxaa nalagu guursaday catiir iyo caasho dheer sariiraha la yiraahdo, alaabta imminka taallana lamaba aqoon, laakiin waxaan naqiinay arooska macnihiisa. kaddibna intey aamustay bey ku tiri gabdhihii hadal baan idinka badiyaye oo sheekaan idiin galay ee ma meel baad u socoteen? gabdhihiina hal mar bey isla yiraahdeen maya ee Eddo noo wad sheekada, ayagoo wejigooda ka muuqato xiiso gaar ah inay u hayaan sheekada. waayahay intay tiri bey hadalkeeda ku bilowday ragga wuxuu ahaa haveen u roon, haveenkuna raaliyaal, waxaana la yiraahdaa raaliyadda ninkeeda.

waa u raali,Raaliyadduna waa nafta raaxadeeda ee labadii isu roon oo isu raali ah raxmad baa ku soo degta gurigooda,ka dibna intey qososhey bey tiri soo runtey ma aha? Haa waa runtaa bey ugu jawaabeen, iyagoo Ilkocaddeynaya. Hadana waxay tiri aahey qofka kaa weyn sheekadiisa waa laga faa'iideystaa ee Gabdhow maanta Sheeko Guur baan ku jirnaa. Aan idin sheegee horta Guurku Dumarka waa u derejo iyo dalacaad,Ubadkuna waa deeq xagga daa'inkii abuurey ay ka heelaan,midda kale Ubadkuna sidiisa-ba waa qaali iska ogaada midaasi ee yaan laga car-arin oon la nicin caruurta,waayo Ubadku waa farxad-da nolosha,waa Udubka weyn ee saldhigga u ah jiri-taanka qoyska,Ubadba Ubadka ka dambeeyana wuxuu wax ku sii kordhiyaa sharafta,qiimaha,iyo guud ahaanba magaca qoyska,wuxuuna difaac adag iyo weh-el u yahay Hooyada. Sidaas-darteed soo maydan arag Haweenka waayo aragga ah waxay xiisahooda si gooni ah u siiyaan qofta la aroosey in ay durbadiiba Uur yeelatey iyo inkale.

Ka dibna wax yar bey aamustey,sadexdii gab-dhoodna waxay si xiiso leh u dhegeysanayaan shee-kadan oo ay is leeyihiin waxbaad ka koroxsan



kartaan. Hadana intey qososhey bey tiri qof kasta wuxuu jecel yahay Ubadka xalaasha ah,sidaas-darte-ed erey lagu yiraahdo Hooyo Umul ku jirta midka ugu qiimo badan ee qalbigeeda ku qanca oo farxad qosol ay ku muujiso ku abuura waa marka ay Ehela-deeda iyo Axsaabteeda ku yiraahdaan Ubadkaad dhashey xaqiiqdii Aabihii buu u eg yahay. ka dib-na intey kacdey bey tiri sheeko intaas nagu filan xaafad shishe inaan tago ayaan rabey ee hadalkii-baa ila tagey oo soo nabad ahaada. Mahadsanid Eeddo oo soo nabad ahow. Wax yar ka dibna Gabdhi-hiina wey tageen.

Maqribkii markii la gaarey ayaa Maandeeq intey soo meeratey,ka dibna dul fariisatey shan-dad weyn oo walaalkeeda Sacuudiga ka soo dhiibey si ay uga xulato dharkii ay la tegi lahayd Xafladd-a Arooska. Waxay xiratey Dirac oo Indhaheeda soo jiitey,laakiin markii ay aragtey in uu jirkeeda qaar muuqdo si deg deg ah ayey isaga saartey,waxa-yna xiratey Saako Gacmo dheer ah,ayadoo leh wax kastoo qaali ah oo qiimo leh ka waa la qariyaa ee maxaa jirkeyga iiga qiimo badan. Alla maxaa Haw-een badan oo in uu jirkooda qaar muuqda qurux

ka dayeen, dabadeedna ku qaloocatey; wixii qarsan baa qiimo leh, qalbi kastana qurux ku tuhmaya. Ma-hmaahdii Soomaaliyeed soo ma ahayn Ma rabtaa raqii-s, ma qabtaa qaali, ka dibnaintey Muraayadda isku eegtay, hagaajisatay timaheeda bey Xafladdii soo aaday.

## QEYBTA LABAAD.

Magaalada Los Angeles ee dalka Mareykanka waxaa ka da'aya Roob lixaad leh, Prof. Raage-na wuxuu daaqadaha u xiray qolkiisa fadhiga oo ku yaallay dabaqadda sodon iyo lixaad, kaddib markuu dabeyl iyo dhibcihii roobka oo xoogga badnaa si aad ah ay uga dhawaajiyeen daaqadaha. meel hortiisa ah waxaa fadhiya gabar Soomaaliyeed oo la baxday Diyaana waxayna ku mashquulsan tahay oo ay aqrineysaa joornaal. Prof. Raage wuxuu ka tegay Soomaaliya sideed iyo toban sano ka hor, wuxuuna waxbarasho u aaday dalalka kala ah Indiya, Ingiriiska iyo dalka Mareykanka, halkaasoo uu ka qaatey Derejada PhD oo uuna ku guursaday naag Mareykan ah oo la oran jiray Meeri, waxay isqabeen afar sano wax carruur ahna uma dhalin, kaddib markii ay arrintaas



la kaashadeen Dhakhaatiirta, waxaa loo sheegey ineysan dhaleynin Afadiisa, laakiin midaasi wax isbedel ah kuma ay sameyn Jacaylkii ay isu qabeen iyo wada dhaqankoodii, laakiin markii dambe nasiib xumo Meeri waxaa ku dhacay Cudurka la yiraahdo Kansar weyna u geeriyootey.

Waxaa soo dhacay Telifoon, waxaana qabatey Diyaanaa, wax yar ka dib intey iska dhigtey Telifoonkii bey si fudud uga baxdey qolka, waxayna soo noqotey ayadoo si aad ah isu soo qurxisey waxayna tiri Raage Gabar ayaan dhoweyd isku baraney xafladii weyneyd ee aan u dhigey Magac bedelashadeyda oo aan ku ballanney in aan soo iibsano Eeyo tababaran ayaa hadda Telifoon ii soo dirtey, ka dibna intey Ilko caddeysey bey tiri runtii waan u baahan nahay Ey Tababaran oo Guriga noo waardiyeeya, midda kale Eeyaha sidoodaba madadaalo fiican bey leeyihiin. Raage intuu Jeebkiisa ka soo saarey Lacag oo uu siiyey buu Buug gacantiisa ku hayey akhrintiisa dib u bilaabey.

Diyaana waxay Gaari ka soo degtey ayadoo xambaarsan Ey weyn oo ay marna ku qosleyso marna la hadleyso, waxay u timid Raage oo qalab qaadaya

wuxuuna u sheegey iney fariin degdeg ah uga timid New York oo uu safar yahay soona maqnaandoono muddo afar bilood ah.

Raage markii uu soo laabtey wuxuu u yimid Diyaana oo xaamilo ah,waqti ka dibna waxay ku curatey Wiil. Raage oo markaasi ka hor Caruur loo dhalin ayaa wuxuu dhalashada Wiilkaas ugu farxay si aad ah,wuxuuna u taataabtey una fiirfiiriyey sidii isagoon weligiisa Ubad arag. Markii muddo ka soo wareegatey ayaa Raage Maalin waxay meel Baar ah oo wax laga cabbo ku kulmeen Nin Soomaaliyeed iyo Wiil yar oo uu dhaley,wey sheekeysteen,ninkii wuxuu u sheegey Raage in la yiraahdo Dalmar uuna yahay Ganacsade weyn oo inta badan u soo aada dalalka dibadda Ganacsi iyo Dalxiisba. Raagena wuxuu Ninkii u sheegey goortii uu waddanka ka soo tegey,waxbarashadiisa iyo wuxuu dibadda kala kulmey. Wixii hadal la wadwadaba markii dambe ayaa Dalmar yiri adiga Raage ayo ayaa lagu yiraahdaa?Isagiina wuxuu ugu jawaabey Raage Xaaji Maxamed,markaasaa intuu fiiriyey yiri war ninyahow Ninkii ka maqnaa Xaaji Maxamedkii aan garahaayey oo la lahaa meeluu jira lama yaqaan amaad tahay? Xaajigeed baad & taqaanaa? sidee buuna



u yaalaa? Waa Xaajiga gaaban oo labada Ilig ee sare ay ka maqan yihiin oona deggan Boondheere. Raage intuu qosley buu salaan kula boodey,isagoo leh waa isaga naftiisa,waa Aabahay Ninkaasi. Dalmar baa isagoo faraxsan isna yiri war ninyahow maxaad leedahay!Ninkaasi anigana waa Sodoggey ee Aamino Xaaji baan qabaa oo caruur ii haysa. Intey isku qosleen bey hadana mar labaad salaan iskula boodeen,ka dibna Dalmar intuu fiiriyey Wiilkiisa ayuu yiri War Abtigaa salaan. Raagana Wiilkii buu labada dhabnood ka dhunkadey,ka dibna wuxuu u soo wadey guriga. Markii ay Guriga yimaadeen Raage isagoo si aad ah u faraxsan ayaa wuxuu u yeerey Afadiisa Diyaana,markii ay aragtey Ninkan gaaban oo wiilka yarna la socda wey naxdey,laakiin ma ahayn naxdin wejigeeda laga dareemaayo, haseyeeshee waxaa si aad ah u argagaxay oo Wadnuhuna joogsan lahaa Dalmar,markii uu arkey Gabadhan ku soo socota. Raage oo dareemey in Dalmar wejigiisa aan caadi ahayn ayaa wuxuu yiri Gabadhani waa xaaskeyga,waxaana la yiraahdaa Diyaana, markaasaa hadana intuu u jeestey xageeda ku yiri waa Seedigey Ninkani waxaa la yiraahdaa Dalmar

Diyaanaa gacan ayey u soo dhiibtey ayadoo leh Bar-
asho wanaagsan. Dalmarna wuxuu ku salaamey gacan
gariir ku jira oo aad u qabow,ka dibna madaxa ayuu
u ruxay,wuxuuna si dhaqsi ah u fariistey Kursigiisa.
Raage ayaa hadana yiri Wiilkanna Abti baan u ahay,
Diyaana intey Wiilkii Madaxa ka salaaxdey bey si
fudud qolka uga baxdey. Wax yar ka dib Raage intuu
dibadda u soo baxay ayaa wuxuu soo noqdey isagoo
xambaarsan Ilmo yar,intuu u dhiibey Dalmar buu
yiri Wiilkaan baa goor dhow ii dhashey dalmarow.
Dalmar oo ka baqayey gacmihiisa oo aad moodo in
Tamartii laga siibey in ay Ilmuhu ka fara baxsad-
aan oo uu xajinwaayo,ka dibna wuxuu damcay in uu
is adkeeyo oo uu hadal isku qasbo,wuxuuna yiri
Hambalyo ayaan ku leeyahay Raagow,reerihiina aad
bey ugu farxidoonaan markaan u sheego Ubadka aad
dhashey. Magaciisa maxaa la yiraahdaa?
Waxaa la yiraahdaa Dhinbil,Raage wuxuu intaa ku
darey hadalkiisa soo uma jeedid labada Wiil
sida ay isugu eg yihiin in uu dhiigooda meel ka
soo wada jeedo waa la garanayaa..Dalmar markii uu
hadalkaasi maqley Caloosha ayaa laga qabtey,wuxuu
si degdeg ah Ilmihii isaga dhiibey Raage.wuxuuna



yiri Musqul baan u baahnaa,Raagena wuxuu markiiba
si degdeg ah u tusey meesha ay ku taaley,wax yar
ka dib buu Dalmar ka soo baxay Musqusha,Dhowr
talaabo markii uu soo qaadeyna indhihii ayaa
madoobaadey joogga ayuuna ka dhacay,Wiilkii yaraa
oo uu Dalmar dhaley ayaa dibadda taagnaa,markii
uu arkey in uu aabihiisa Dhulka yaala buu afka
furtey qayladii ugu dheereyd, Waxaa markiiba aya-
goo ordaya dibadda u soo baxay Raage iyo Diyaana.
Raage wuxuu si dhaqsi ah Isbitaalka uu ula cararey
Dalmar. Diyaana waxaa ka batey naxdin iyo welwel ,
waxayna isku tuurtey sariirta.

Diyaana saddex sano ka hor ayadoo joogta
Soomaaliya ayaa waxay Dugsigeeda iyo Gurigoodaba
ay uga tagtey Wiil dartii,kaasoo ay moodeysey in
uu Nolol wanaagsan iyo Mustaqbal u sameynayo,laak-
iin ma noqon sidaasi,dhowr iyo toban cisho oo keli-
ya ayuu madadaalinaayey,wuxuuna si aad ah wax uga
bedeley hab dhaqankeedii,ka dibna wuu iska soo er-
yey, Markii ay diidey oo ay tiri meel aan aado
ma aqaanana waxaa si fool xumo ah Gurigii ay joog-
tey uga soo saartey Wiilkii Hooyadiisa,ka dibna
waxaa la macaanaatey oo ay dib u dhadhansatey

nolosheedii hore macaankeeda,waxaana ka luntey kalsoonidii.

Diyaana oo la oran jirey Indhodeeq Maalintaasi wixii ka dambeeyey ayey Waddada habowga Cagta toos ula heshey. Indhodeeq waxay Daaraha waaweyn iyo Gawaarida Da'da yar dhexdooda Dhalinta Waqtiga disha ee la cayaara dooqooda farxad kula dikeysaba, waxay Dad fara badan oo dareenkii xishoodka iyo daacadnimadii ka dhamaatey haddba mid Dooni la raacdaba ayaa markii dambe waxaa waqtiga xageeda u soo duwey Nin hanti Eebe u dhiibey oo da'diisa ay yara durugsan tahay ee u raaca Diyaarad una dalxiis taga Dunida hadba meeshii uu ka doono oo la yiraahdo Dalmar,Ninkaasoo muddo yar isbarashadooda ka dib u soo jeediyey in ay Ameeriko u dalxiis tagaan,ka dibna ay is mehersadaan.

Goortii ay tageen Ameerika Magaalada Los Angeles oo Dalmar macariifo badan ku lahaa oo ay joogeen muddo labaatan beri ah ayaa Indhodeeq xanuunsatey,waxaana la geeyey Isbitaal. Dhakhtarkii wuxuu u soo qorey Daawo,wuxuuna u sheegey in ay Uur yar leedahay. Indhodeeqna waxay markii u sheegtey Dalmar, Dalmar inkastoo goortaasi uu u qosley iyada,laakiin



ma ahayn hadal uu jecleystey. Maalmo ka dib markii ay indhodeeq ladnaatey ayaa Maalin Dalmar wuxuu geeyey meel Baar ah oo weyn,markii ay wax cabbeen ka dib ayaa waxa uu ku yiri waan soo noqonayaaye ee halkan igu sug. Markii uu baxay oo dhowr saacadoodna ka soo wareegatey oo uusan imaaneynin baa ayadii welwel ku abuurmey,waxayna halkaasi ku sugeysey ilaa iyo ay imaashadiisa ka samirto,ayadoo si aad ah u walbahaarsan,garaneyninna meel ay afka saarto ayaa waxaa u yimid oo la hadley Prf Raage. Markii uu la sheekeystey ayaa waxay u sheegtey in, ay la socotey Nin adeerkeeda ah oo soo korsadey, Magaaladana ay u joogeen dalxiis.

Raage wuxuu la baadi goobaayey Ninkaasi ay ku sheegtey Adeerkeed in muddo ah,markii uu daaley oo uu heliwaayey Ninkaasi raadkiisa oo Gabadhiina weli Gurigiisa ay kula nooshahay ayaa Maalintii dabme u soo jeediyey iney isguursadaan;Iyadiina si farxad leh bey u aqbashey. Saddex Bilood markii ay ka soo wareegatey muddadii ay isguursadeen Indhodeeq waxay dhigtey Xaflad weyn oo ay ku magacbedelaneysey,waxayna la baxdey Diyaana.

Waxaa soo laabtey Raage oo Gaari ku ordaya

markii uu Guriga soo galey,waxaa Dhulka hortiisa ah fadhida Diyaana,waxaana hareera yaalla laba dhalo oo Whisky ah oo mid ay madhan tahay,midna ay wax yar ku dambeeyaan. Markii ay aragtey Raage bey intey si aad ah u qososhey tiri Prfisoore waxaan ka xumahay in uu seedigaa dhinto waana kuu tacsiyeynayaa,haddana mar labaad ayey qososhey .

Raage oo yaaban,fahmeyna in ay sakhro tii ugu weyneyd ay sakhraansan tahay ayaa intuu u tegey Gacanteeda qabtey,damcay in uu Guriga geliyo,markaasey tiri idaa ha i jiidjiidine ee halkan soo fariiso anaa sheeko kuu haya e.Gacanteeda intuu iska daayey ayaa wuxuu u dhaqaaqey xagga qolkiisa,isagoo shaki weyn ay ku beereen waxaan dhacaya. Ayadii ayaa hadashay oo tiri waxaa yaab ah meesha adiga iyo Seedigaa aad hadda iska soo hesheen,waagii uu Ameerika ikeenaayeyba waa adigii dhowrka Beri goobaayey oona soo waayey e! Raage hadalkaan markii uu maqley talaabadii ayuu qaadi waayey waxaana si aad ah u gaaraacay Wadnihiisa,Diyaana waxay intaas ku dartey waxaan u maleynayaa markaad tustey Dhinbil oo uu arkey in ay labada Wiil ay isu egyihiin ayaa Beerka laga qabtey, oo hadii uu sidaasi u Ilmo



jecel yahay muxuu marka hore uga dhuuntey.

Raage markii uu maqley hadalkeedan dambe wey u dhamaatey sheekada,ka dibna intuu wax yar fikirey buu qosley!!(Masiibo middii kaa qoslisaa ugu weyn), ka dibna waxaa indhihiisa soo dhaafey Ilin,ileyn qalbiga ayuu ka ooyaye,ee qalbi ooyeyna waa halis. Wuxuu galey qolkiisa jiifka wuxuuna soo baxay isagoo xidhan Macawiis iyo Shaar Cad oo Cimaamana ay garabka u saaran tahay,Dharkaasoo ahaa Dhar uu meel dhigey sideed iyo toban sanno ka hor waagii uu Waddamada dibadda galey. Diyaana markey aragtey si aad ah ayey ugu qososhey waxayna tiri oo Suufi ayaan noqdey miyaad ka waddaa? Markii uu soo gaarey Albaabkii banaanka ayaa waxaa si xun ugu soo qayliyey Eygii waardiyaha ahaa ee meesha fadhiyey. Diyaana ayaa markiiba tiri waakaas oo xataa Eygii wuu ku garan waayey,ka dibna Eygii ayey ku tiri Boobi waa Raage oo Masaajidka u socda,wuu soo noqonayaaye ka leexo. Eygii gadaal ayuu u noqdey,Raagana Iridka ayuu ka soo degey isagoo kaashanaya Samir,isla Maalintaas ayuu u soo ambabaxay Soomaaliya. Maalintii ka dambeysey ayaa waxaa isna Isbitaalkii ka soo baxay Dalmar oo qalbiga iyo Caloosh-

aba ka bisleysey murug, wuxuuna dib uga shalaayey falalkii uu horey ugu kicijirey oo maanta dhibaatadan u keeneen, waxay isaga iyo wiilkiisa ku soo dhaceen taksi, kaasoo u soo qaadey meeshii ay fadhidey Diyaaraddii u soo xambaari lahayd Waddankiisa.

Waxaa Guri ku yaala Degmada Xamar Jajab meel banaankiisa ah fadhiya oo ku sheekeysanaya Istaahil iyo Geni. Geni ayaa tiri Gurigeena xaaladiisa in ay sidan u dambeyneysey marna ma maleyneynin, laakiin waxaas oo dhan Hooyadeena ayaa na yeeshey oo u sabab ahayd, Aniga waan la taliyey markii ay tiri Ninkaan ayaan guursanayaa, markaasey intey hadalkeedii joojisey tiri Maalintaas ay noo sheekeysey adba waad fadhidey markaan lahaa Hooyo Aabaheenna goor dhow buu dhintey mid kale hadii aad hadda hore ka guursatana dadka si kale ayey kuu arkayaan oo arintanna uga faaloonayaan. Midda kale waxaan iri ninkaan aad leedahay waan guursanayaa waa Nin dhalinyaro ah haddana ma aha Nin shaqo wanaagsan haysta amaba hanti leh ee haddii aad wax guursaneyso Nin kuu qalma oo Da' weyn Xaaji ama wax sidaas ah baa roon waad ogeyd sidii ay ii canaanatey oo ay iigu jawaabtey, Haddii Aabihiina dhintey anagana ma nolosheynaan baabi'ineynaa ee Qofkani waa qof Caqli badan oo noo ilaalinaya Hantideena, noona shaqeynaya ileyn wehel baan u baahannahaye bey hadalkeedii ku joojisey. Istaahil baa iyaduna tiri Walaaley waxaas hore ee tagey haddaan iska deyno anaga hadda sidee baan Mustaqbilkeena ku dhisi karnaa. Geni waxay tiri aniga horta Wiilkii aan la socdey wuxuu i yiri haddii aad Gurigeena caadi igula noolaaneysid in aan ismehersano diyaar baan u ahay, anigana waan ka aqbaley, sidaas-darteed aniga galabta isagaan ballansan nahay, arintaas baana dhameyndoonaa, Gurigaanna waan iskaga tegayaa. Istaahiina waxay tiri ee Walaaley adiga waaba tashatay e anigana maxaan sameeyaa. Adna maad sideyda oo kale yeeshimaxaan sameeyaa. Adna maad sideyda oo kale yeeshidoo oo Qaloocow ku adkeysid arinta. Dhowr jeer baan u sheegey wuxuu i yiri anigu dhaqaale ma ahayo ee Waalidkey baan arinta u jeedinayaa, haddey naga ogolaadaan Guriga ayaad nagula noolaaneysaa. Inaad sidaasi iska yeeshid baan kugula talin lahaa aniga.

Markii muddo gaaban ka soo wareegatey geeridii Diiriye Jaakoole ayaa Maryama Luul waxay si sahlan isku barteen Nin la yiraahdo Cali Qasaaye.

Cali Qasaaye wuxuu ahaa Nin dheer oo 32 jir ah oo aan weligiisa guursan, shaqadiisuna ay ahayd Dalaalnimo. Ninkaasi oo ahaa Nin aad u sheeko iyo hadal badan, wuxuu markiiba u suuro geliyey Maryama Luul in ay si dhaqsi ah u gadato Alaab Ganacsi oo ay in muddo ahba ku adkeyd sidii ay Alaabtaasi u heli lahayd. Dhowr jeer oo kale ayaa iyana jirtey in arimo sidaas oo kale ah uu wax kala qabtey. Maalintii dambe ayaa Maryama waxay ku fikirtey in ay dib u guursato, maadaama ay ku dhex jirtey Hanti aad u fara badan oo ayada u khaas ah, waxayna is tustey iney u baahan tahay Nin Hantidaasi kala shaqeeya, noloshuna ay ku weheshato, waxayna go'aan ku gaartey in ay Guursato Cali Qasaaye oo niyadeedu aad u raacsaneyd, markey u soo jeedisey qorshaheeda Guurka, Cali Qasaayana wuxuu uga aqbaley si aan hagrasho lahayn.

Isla muddo gaaban gudaheedana wuxuu ku guuleystey in uu isaga si toos ah u maamulo hantideeda oo dhan. Waxay marba dhan u dhoofaan, Waqtiguna sahal ku dhaafo, ayaa markii dambe Maryama waxay aragtey Hantidaada oo si aad ah isudhintey, laakiin ku sii kordhaayo Kalgacaylka iyo xiisaha ay u qabto Qasaaye ilaa markii ugu dambeysey uu gaarsiiyo in ay iibiso Guri-



gii weynaa ee ay ku jireen iyo alaabtii kale oo qiimaha lahayd ee soo raacdey. Muddo gaaban ka dib Cali Qasaaye markuu arkey in ay Maryama Luul Hantideedii idlaatey oo ayan lahayn Awoodii hore oo ay ku hogaamineysey, oo nolosheeduna markaan ay isaga si toos ah ugu soo xirantey, ayaa markii dambe wuxuu la guursadey Sahro yarey oo Guriga ka shaqeyn jirtey oo uu in muddo ahba Il gooni ah ku eegaayey.

Arintan markey dhacdey Maryama Luul aduunkii ayaa la yaraadey, waxayna eedey Nafteeda, waxayna garan weydey meel ay aaddo iyo si ay istiraahdo, waxaana qasab ku noqdey in ay aqbasho ciriiriga nolosheeda soo foodsaarey, Caruurteeda oo u dulqaadan waayeen dhibaatadan ku timid qoyska ayaa Guri-gii ka kala cararey.

Maandeeq ayaa waxay soo istaagtey 4:00 Galabnimo Airporka caalamiga ah ee Muqdisho si ay u soo dhoweyso una qaabisho Mahad oo ku soo wargeliyey in uu soo raacidoono Diyaaradda Soomaali Airliness oo galabtaasi soo caga dhiganeysey Gegida Dayuuradaha ee Muqdisho. Goortii ay maqashey guuxii Diyaaradda ayaa farxad qalbigeeda la gilgishey

waxay si door ah isugu diyaarsiey in ay daymadeeda hore la hesho midkii isheeda ay ku doogsaneysey, niyadeeduna u danqaneysey, in muddo ah Naftuna daacad u ahayd.

Dadkii Diyaaradda ka soo daadegtey iyo Dad kale oo fara badan in muddo ahba Garoonka dibadiisa taagnaa sugaayey Dàyaaradani ayaa midba mid isku duubey. Waxay daawato Dadkaasi, daymadeeduna ku cidlaataba waxaa dibadda u soo baxay mid aragtidiisa ay ku faraxdo aqoonsanweydey in muddo ah, aamini weydey Indhaheed, ayadoo oraneysa waa Abshir iyo ma aha. In yar markii uu u soo jirsadey bey ku adkeysatey in uu yahay Isagii. Intey cod farxadi leh ku tiri Abshir bey aayar isku duubtey, Abshir oo inantooda ka fileyn halkaasi in ay ku sugeysey baa Amakaak iyo argagax ku noqotey arintaasi. Ma garan codkeedii, haseyeshee markuu eegey ayadii buu aqoonsadey in ay tahay Inantoodii, isagoon la hadlin buu isna aayar qabsadey. Ayagoo ishaysta baa Mahadna soo dul istaagey, asagoo daydayaaya, ka dhex daawanaaya Dadkani faraha badan, qaarkoodna farxad iskuduubtey Inantii dooqiisu uga doorbidey inta Dumar ee ku nool Dunida guudkeeda, Naftiisuna u soo degdegsaneysey



mar in ay daawato, ka dib markii uu aad u eegey, ula raacey ishiisa idil ahaan Umadii meesha joogtey, ayaa meel agtiisa ah oo aan ka fogeyn waxa jooga waa ayadii iyo Inan kale oo ishaysta!! isaguna aangaraneynin, waa Amakaak iyo yaab!! ma arin baa isbedeshey, mise iyadiiba ma aha! ku yiraahdey Naftiisa. Markii uu arkey in ay tahay iyadii Cagihiibaa cuslaadey, Carabkii baa angagey Afkii buu kala qaadey, Alaabtiibaa ka daadatey, awoodi waayey in uu yiraahdo Erey!!!

Maandeeq markii ay aragtey Mahad oo naxsan yaabanna, Alaabtiisa ay dhulka daadsan tahay bey intey u oradey kula boodey Salaan, aruurisey Alaabtii bey cod naxariis leh ku tiri Mahadow waa. Inankeenna Abshir oo isna iminka soo degey ee kaaley aan iskiin baro. Markii ay Maandeeq tiri intaas baa Mahadna heley Awood uu ku hadlo, wuxuuna farxad ku salaamey Abshir, ka dibna waxay ku soo dhaceen Taksi.

Diyaana oo magaceeda hore ahaa Indhodeeq waxay Ameerika iyo Wadamo kale ay si dhibaato iyo rafaad badan kaga soo baxdaba, waxay markii dambe soo gaartey Soomaaliya.

Indhodeeq oo garan la' meel ay aaddo,Cunugeedii oo xanuunsadey si aad ah u ooynayana uu dhabarkeedu saaran yahay,ayaa waxay fariisatey meel Geed hoostii-sa ah,waxayna soo xusuusatey waayaha Aduunyada wixii nolosheeda ay kula soo kulantey iyo Maanta meesha ay fadhido,Ka dibna waxay soo xusuusatey Geeraarkii Waanada iyo digniinta ahaa ee saaxiibteeda Maandeeq oo ahaa:-

Gaari lagu dikeeyiyoo iyo Diinaar la
isa siiyo mar bey dacar noqdaan,ee
Gabaryahay digtoonow wax baan kaaga
digayaaye!!! ee dib baad ii xusuusane

Waxaa kaloo ay soo xusuusatey geeridii Hooyadeed iyo kalga'alkii weynaa oo ay u haysey iyo waanooyinkeedii waxaana markiiba Indhaheeda ka soo daatey Ilin,waxay-na bilowdey Calaacalkaan:-

Haddaan Edeb yeelan lahaa,Asluubteyduna
wacnaan lahayd Aroos baan heli lahaa,
Aqal baan dhisan lahaa,Oori baan noqon
lahaa,Caruur baan dhali lahaa,Aabahoodana
hanan lahaa,Iimaan baan heli lahaa.
Alla Aduunyow Eed badney maxaa Calafkey
xumeeyey oo asaagey iga reebey,sidaan



iminka ahay waa cimrigaa ceeb
u joog,Aakhirana Cadaab filo.

Ka dib Indhodeeq intey sara kacdey bey socod bilowdey.Wax yar markey socotey waxay ku leexa-tey Islaan markaa gadeysey Dukaan,waxayna si nax-ariis leh u weydiisatey Islaantaasi in ay u heli karto shaqo amaba ay taqaano cid kale oo u baahan in loo shaqeeyo. Islaantii markii ay aragtey Indhodeeq wejigeeda intey xumeysey bey ku tiri cod gaaban adigu maba shaqeyn kartide ee Maya Maya anigu shaqo kuuma hayo,cid aad u shaqeysana ma aqaan. Waxaa hadalkaasi maqlayey Dr Sahal oo u soo galey in uu dukaanka wax ka iibsado. Gabadhiina waxay Dukaankii ka baxdey iyadoo aad u niyad xun,Ilmihii yaraa ee dhabarkeeda saarnaa-na uu si aad ah u qufacayo.

Waxay midaasi dareen Bani'aadannimo iyo naxariis gooni ah ku dhalisey Dr Sahal,intuu ka soo daba baxay ayuu u yeerey. Markii ay isla hadleen oo ay dareensiisey dhibaatada ay haysata ayaa Ditoorku wuxuu u sheegey in ay Gaariga soo fuusho. Ditoorku isagoo si aad ah Maskaxdiisa

uga shaqeysiinaya ayaa wuxuu ku fikirey meeshuu geyn lahaa Gabadhani. Waayo wuxuu ogaa in Afadiisu ay Siminaar dibadda ugu maqneyd oo uusan geyn karin gurigiisa. Laakiin markii dambe Maskaxdiisu waxay ku soo dhacday qoys uu si aad ah wax ugu qabtey mar la soo gudboonaatey dhibaato Xanuun iyo dhaqaale xumo isugu jirtey. Qoyskaasoo uu ogaa in hadda dhaqaalihiisu uu sare u soo kacay oo ay awoodaan in ay gabadhani tabcaanka ah oo cunugga sidata ay shaqo ka siin karaan gurigooda. Markii Gabadha ay Gaariga soo fuuleysey ayaa waxaa ka daatey Laba xabbo oo Sigaar ah,waxayna ka xishootey iney dib u soo urursato Sigaarkeeda.
Dr Sahal oo durbadiiba dareemey iney wax ka dhaceen ayaa wuxuu ku yiri soo qaado wixii ka dhacay,markii ay soo qaadatey Sigaarkii ayey soo fuushey Gaarigii. Dr Sahal markuu arkey iney gacanteeda ku sidato Sigaar fiirmo labaad ayuu ugu noqdey Gabadhii,laakiin midaasi wax isbedel ah kuma sameyn qorshihiisa gacan qabashada Gabadhaasi.

Markii uu Gaarigu wax yar socdey ayaa wuxuu ku yiri isagoo Ilko caddeynaya oo Sigaarkana ma cabbtaa. Waxay cod gaaban ugu jawaabtey Mar tamarteydu sidan ka fiicneyd baan si fudud u bartey.



Ditoorku waxaa kaleo uu yiri Balwado kale miyey kuu weheliyeen. Madaxa ayey ruxdey. Wax yar intuu ka aamusey buu ka dibna u bilaabey Hadalkan Qofka Muqaadaraadka si sahlan ayuu u bartaa ama uu u bilaabaa isagoo leh kaale; oo tijaabi,ama markuu dhexgalo Bulsho kale oo isticmaaleysa. Dadka isticmaalaya Muqaadaraadka waxay sheegaan waxa kalifa oo kugu dhiirigeliya in aad bilowdo Balwad iney yihiin markaad dhibaato fara badan oo xunxun aad kala kulantid noloshaada dhibaatadaas oo kugu reebta raad ama xusuus xun Maskaxdaada,ayna kugu adkaato sidii aad u xalin lahayd.

Marka hadalkaas waxaad ka garaneysaa in ay u isticmaalayaan Balwadda si ay isu ilowsiiyaan dhibaatada noloshooda soo foodsaartey oo u baahneyd xalin iyo Maskax shaqeyneysa. Waxaana la og yahay Balwadaha xunxun in ay dilaan Jirka iyo Aadanimada qofka,waxayna yareeyaan adkeysiga Maskaxda,waxaa kaloo ay si toos ah u baabi'iyaan Magaca qofka iyo sharaftiisa. Waxaa dhacaysa marka dambe in ay qofku ku adkaato sidii uu u joojin lahaa Balwadahaasi, ileyn waxaa la yiri waxaad baratey waa baaskaa e.

Aniga waxaan qabaa ayuu yiri Ditoorka isagoo

farxad muujinaya haddii ay dhacdo in aad noloshaada kula kulanto wax Bulshada ku fool xun ama ceebaad ah inaadan is oran waad ceebowdey ee wax sharaf ah kaagama dhinna xagga Bulshada,ee aadan wixii dhibaatada kuu keenayeyna naftaada ku sii dhiirigelin,ileyn Qalad mar waa dhici karaaye. Aduunyada sideedaba waxaa lagula kulmaa dhibaatooyin fara badan,dhibaato kastana waxay leedahay xal.

Indhodeeq intey Ditoorka fiirisey ayay hadana ka jeesatey,iyadoo muujineysa qushuuc. Ditoorka isagoo hadalkiisa sii wata wuxuu yiri laakiin xalinta dhibaatooyinka waxay u baahan yihiin Maskax deggan,iskukalsoonaan,samir,geesinimo iyo Caafimaad. Haddii aad intaasi iyo dadaal isku darsato waxaa la hubaa inaad ka baxayso dhibaatada Illaahna uu kugu garabgeleyo,laakiin haddii aad xumaantii ku sii socoto waxaa muuqata in noloshaada aad ku dhameysaneyso dullinimo.Indhodeeq oo si aad ah ula socotey hadalka uu Ditoorka u soo jeedinayey ayaa markii dambe waxay aragtey in Gaarigii uu si qumaati ah ugu hor hakiyey Guri hortiisa,markii ay fiiriseyna waa Gurigii Maandeeq!! Ditoorka intuu albaabka ka furey ayuu



yiri soo deg. Indhodeeq oo dhabteeda saaran Dhinbil ayaa waxay damacdey iney ku adkeysato fadhigeeda,waayo ma aqoon weji ay kula kulanto Saaxiibteeda Maandeeq. Haye meeshaan rabney waan joognaa markii uu mar labaad yiri Ditoorka ayaa Gaarigooda waxaa soo daba istaagey Taksi,waxaana ka soo degey Maandeeq,Abshir iyo Mahad.

Maandeeq waxay markiiba salaantey Dr Sahal, ka dibna waxay fiirisey Gaarigii waxayna aragtey Indhodeeq oo caynkeedii isbedeley,quruxdii ka cidlaatey oo aan la eegi kareynin,oo noqotey indho u daran,u madoobaadey midabkeeda sidii ayadoo mar la cadaabey,oo dhabta ku haysato Ilmo yar.

Maandeeq waxay markiiba si naxariis leh uga soo dejisey gaariga indhodeeq,waxayna si wadajir ah u galeen Guriga.

Geni oo Burjiko babineysa ayaa waxaa iridka ka soo gashey Istaahil. Geni intey sara joogsatey bey salaantey Walaasheeda,waxayna ku soo dhoweysey Gambar meesha yaaley. Markey fariisatey Istaahil ayaa Geni waxay tiri ii waran Walaal Nadaa War haye e. Maxaan kuu waramaa ee iska aamus. Horta

wax kale iska dhaafee naftaada meel 'ma u heshey? Geni ayaa su'aashey. Aan kuu bilaabo sheekada e Ninkii Qaloocow ahaa wuxuu ii geeyey Waalidkiisa, marka hore aniga waxaan fariistey Bersada isaga ayaana qolka galey,Aabihiisa iyo Hooyadiisa ayaa ku jirey qolka,wey isla hadleen,hadalkoodana dibadda ayaan ka maqlaayey. Markii uu arinta u jeediyey uuna u sheegey inaan la socdo Duqa wuu diidey,wuxuuna yiri Gabdhaha suuqyada iska meereysta intaad soo wadato kaa aqbali maayo igu meheri. Wuxuu Wiilka baryo oo ay doodaanba ayaa markii dambe intey Hooyadiisa Albaabka soo istaagtey oo ay i fiirisey,haddana dib u noqotey bey Odeygii ku tiri oo Gabadha Wiilku weyba ku dheggan tahaye ee intey Isheedu khatar naga gelin lahayd Wiilka,aniga waxaan soo jeedin lahaa inaan ku Meherino. Markii aan maqley hadalkaas waan isku yaxyaxay oo raqiis ayaan isla noqdey. Hadalka aan kuu soo koobe ee habeen dhoweyd ayaa laysku keen meheriyey,waxaana nala siiyey Qol hal sariir ay ku jirto. Geni ayaa tiri wax kastaba ha lagu yiraahdee mar haddii ay ku dejiyeen nasiib baad leedahay ayaan ku dhihi karaa. Istaahil intey qososhey bey tiri ma waxaasaa Nasiib ah! wey sii



hadashayoo waxay tiri labadaan beri dhar dhaqid baa raaxada layga qaadey. Maxaa ka micno ah waxaas amba xirmo weyn oo dhar ah ayaan dhaqey Maanta, Geni waxay intaasi ku dartey Walaaley istareexii wuu dhamaadey ee waxaad ku dadaashaa sidaad Gurigaaga ku xajisan lahayd,ee waad ogtahay in meel kale oo la aado aan jirin,Hooyana ay si fool xumo ah ku joogto Gurigii aad ogeyd. Istaahilna waxay tiri horta Baashi meel uu jiro yaa yaqaan? isaga iyo kii Ilko case ayaa Keenya isu raacay soo lama dhihin. Walaaley xaafad fog baan deganahay oo waan tegayaa e arin yar oo igu daran baan ku weydiinayaa haddii aad igu dhaanto. Maxay tahay arintaas? intey qososhey bey tiri Soorta sida loo kariyo ma taqaanaa? Geni intey iyana qososhey bey tiri anigu weligey ma karin,laakiin Gabar Beriska ah ayaan weydiineynaa. Geni intey markiiba fadhiga ka kacdey ayaa waxay Gidaarka uga yeertey Gabar Guri ku dheggan degganeyd. Gabadhii markii ay timid ayaa Geni waxay weydiisey sida Soorta loo kariyo. Gabadhii intey qososhey bey iyadoo yaaban tiri oo idinku hadda sida loo kariyo ma taqaanaan miyaa? Maya Walaal ma naqaan. Guri Soomaali ayaan ku dhashey

Soor karinna ma aqaan yaab waaye!! intey tiri bey hadalkeeda raacisey Soor Furfur miyaad rabtaan mise Soor caadi? Aniga Soor furfurtaba maanta ka hor ma maqlin Istaahil ayaa tiri. Gabadhiina waxay ugu jawaabtey laakiin Baasta Alfoorno waa taqaanaa miyaa? Istaahil haa bey tiri. Aahey inaad wax badan Baar ka casheysey wejigaagey ku taalaa. ayagiina wey qosleen. Ka dibna Gabadhii waxay tiri:- Marka hore Digsi biyey oo Dabka saar,markey biyuhu karkaraan ku shub jariirta kuna walaaq xurbin, wax yaroo cusbo ahna ku dar. Markii ay Jariirtu kartana waxaad ku dareysaa Budadii diyaarka kuu ahayd,ka dibna ku walaaq xurbinka,markii ay adkaato oo ay kartana waxaa lagaa rabaa adigoon guban inaad dhulka soo dhigtid. Ka dibna waxay tiri aniga waan daahay ee waan baxayaa Ninkeygaa guriga ku jira oo Kabaha inaan u tirtiro iga raba,weyna dhaqaaqdey. Istaahil intey qososhey bey tiri middaanaaba naga daran oo Caseeye ah. Ka dibna intey kacdey bey tiri anna waan sii ordayaa. Genina waxay tiri Jaaw Istaahil ee aan iska warhayno .

Maryama Luul ayaa waxay ku jiiftaa Sariir gaaban oo taala Bersada,si aad ah ayeyna u fikireysaa oo waxaa murug ku soo kordhiyey Hooyadeeda oo u soo martidey iyadoon awoodin in ay sidey rabto u soo dhoweyso oo ay u martigeliso,waxayna Niyadda ka tiri haddii ay ii iman lahayd waagaan Maryama Luul ahaa;Macal asif waan ka xumahay in ay Hooyadey maanta iigu timaaddo anoo jooga Guri ay iigaga sareyso Gabar Booyaasadeyda ahaan jirtey!!! Markii ay intaasi tiri ayaa meel dhinaceeda ah Qol ku yaaley ka soo baxdey Sahro yarey oo xidhan dhar heer sare ah oona si aad ah u dhaldhalaaleysa,waxayna ku tiri Naa hooy Ninka wuxuu ku leeyahay Musqusha Biyo ii gey,waxay ugu jawaabtey oo adba maad geysid ee aniga maxaad iigu sheegeysaa. Haye waad diidey soo ma aha intey tiri bey qolka ku noqotey.

Wax yar ka dib waxaa qolka dhexdiisa ka soo qayliyey Cali Qasaaye wuxuuna yiri oo Maryama Luul Musqusha maad biyo ii geysid. Intey si caajisnimo ah uga soo kacdey sariirtii bey ayadoo ganuunacaysa aadey meeshii Baaldiga yaaley. Cali Qasaaye wuxuu ku jiifaa Sariirtiisa,Sahro yareyna dhinaciisa ayey fadhidaa,weyna sheekeysanayaan. Sahro yarey ayaa tiri Duqa Aabahay markuu Xamar imanayey isagoon laba beri joogin buu yiri waan noqonayaa

ee aniga Magaalo weyn ima anfacdo oo Baabuurtaan badan qayladooda ayaan dhibsanayaa. Aabe waxba ma aha iska joog saan mar kasta u lahaa hadda wuu bartey. Qasaayena wuxuu yiri Duqa wuxuu u baahan yahay waa in uu helaa,Hadda wax uu dhibsanaya ama uu u baahan yahay miyaa jira? Maya Maya Duqa raaxuu ku jiraa wax ka maqan ma laha,labadii Naagood oo uu qabey ee uu Miyiga kaga yimid mooyee intey tiri bey qososhey. Qasaaye ayaa isna yiri haddii uu doonayo halkan muu mid kale ku guursado,markaasuu hadana ku darey hadalkiisa u sheeg haddii uu rabo mid kale ayaan ku dareynaaye. Sahro yarey waxay tiri midda kale oo aad ku dareyso xaagee joogtaa? Markaasuu yiri Sodohdeyda ayaan ku dari lahaa Maryama Luul hooyadeeda!! Sahro yarey intey qososhey bey tiri Ninyahow wax yaab leh baad sheegeysaa ee hadalkan Maryamo Luul yey kugu maqlin. Oo haddii ay maqashana maxay igu sameyn. Sug hadeeraan u yeeri oo ayadaan kala tashaneynaa e. Maryama Luul oo dibadda fadhidey ayuu u yeerey. Sahro yarey Yaab ayey afka la qabsatey. Maryama Luul markey soo gashey Kursi meesha yaaley buu yiri ku fariiso,ka dibna wuxuu yiri Maanta waxaan kuu soo jeedinayaa arin



fiican oo Duco aan ka heleyno oo aan rajeynayo inaad iga aqbalidoonta. Maxay tahay Arinta. Qasaaye jiifkii intuu ka soo fariistey ayuu yiri waxaan fikrad ahaan kuugu soo jeedinayaa oo aniga ila fiicnaatey in labadaan qofood oo waalidiinteena ah oo meelna nagula nool in aan isku meherino!! Maryama Luul intey si xun u fiirisey oo fadhigii ka kacdey bey Albaabka ka baxdey. Qasaaye ayaa ka soo daba qayliyey oo yiri Kaaley Kaaley,laakiin dib uma eegin,ayadoo ciishooneysa Afkiina uu qalaley ayey Hooyadeed u tagtey waxayna tiri Hooyo fadhi nooma yaal Gurigaan ee nakeen aan iskaga tagnee. Ka dibna iyadoo Hooyadeeda gacanta jiideysa oona leh Gurigii Geni ayaan aadeynaa,inkastoo aan aqoon meel uu ku yaalo ayey Albaabka ka baxeen.

Maandeeq iyo Hooyadeeda si aad ah ayey u soo dhoweeyeen Indhodeeq,waxayna dareensiiyeen Kalgacaylkii iyo wanaagii hore in ay weli u hayaan. Indhodeeq ayaduna waxay markiiba cafis weydiisatey Saaxiibteeda Maandeeq,waxayna uga sheekeysey taariikhdii ay kala soo kulantey Waddamada dibadda.

Indhodeeq Ilmihii yaraa wey ka dhinteen,

muddo gaaban ka dib si aad ah ayey isu bedeshey, waxay la soo baxdey qurux iyo dhaldhalaal iyo dabeecad Dadku ay jecleysteen.

Waxaa bilaabatey qabanqaabadii Arooskii Mahad iyo Maandeeq. Abshir oo isna u yimid in uu Guursado ka dibna Sacuudiga dib ugu noqdo ayaa waxaa uu jecleystey in uu meel kale wax ka doonin ee uu guursado Indhodeeq. Markii uu arintaasi Waalidkiisa u jeediyeyna si aad ah ayey ugu riyaaqeen, waxaana la go'aamiyey in labada Aroos isku mar laga dhigo.

Mahad wuxuu u qabtey Bareegii Gaarigii ay wateen si feejignaan ah, ka dib markii Maryama Luul iyo Hooyadeed oo doonayey in ay waddada gudbaan ay si kedis ah uga soo hor baxeen. Waxaa naxdin Dhulka la fariisatey Ceebla oo ahayd Maryama Luul Hooyadeed. Waxaa markiiba meesha ku soo cararey Dad dareenkooda soo jiitey dhawaaqii Taayarada ay sameeyeen.

Gaarigii wuu joogsadey, waxaana ka soo degey Mahad, Abshir iyo Aw Warsame. Mahad wuxuu markiiba Gacanta qabtey Duqdii isagoo leh ma waxbaa ku gaarey? Madaxa ayey gilgishey, Dadweynihii meesha joogey waxay yiraahdeen wey naxdey Duqda wey naxdey. Ceebla wax yar ka dib markey soo sare joogsatey



ayaa waxay Indhaheedu ku dhaceen Aw Warsame oo horteeda taagnaa. Aw Warsame markii uu arkey qofta soo fiirineysa ayuu qosley oo yiri ma ceeblaa qoftan. Aaheey ee Warsamow ma nabad baa wejigaagaan gartey e(Wejiyaal is xusuusta).

Aw Warsame waxay Saaxiibo isku dheer ahaayeen Aw Barqadle oo ahaa Ceebla Ninkeeda, waxayna isla ahaayeen Ciidan, waxayna in badan ka soo wada shaqeeyeen meel. Markii ay iswareysteen ka dib Duqdii waxay u sheegtey Aw Warsame goortii ay Xamar timid iyo dhibaatada markaa haysatey. Aw Warsamana islamarkiiba wuxuu ku soo dhoweeyey oo uu saarey duqdii iyo Gabadheeda Maryama Luul Gaarigii ay wateen.

Maandeeq, Indhodeeq iyo Ay Suuban oo sheeko u socota ayaa waxaa Albaabka ka soo galey Warsame oo ay la socdaan Maryama Luul oo isbedel weyn ku dhacay iyo islaan kale oo duq ah. Indhodeeq mar kaliya ayey joojisey Sheekadii, hadalna waa ka soo bixiwaayey. Maandeeq ayaa waxay fiirisey Dadkii la socdeen Abtigeeda ka dibna Indhodeeq. Indhodeeq wejigeeda ayaa isbedeley, waxayna si tartiib ah ula soo baxdey Kabteeda. Maandeeq ayaa markiiba indhaheeda waxay ku dhaceen falkaasi ay sameyneysey Saaxiib-

teeda. Si dhaqsi ah intey fadhiga uga kacdey ayadoon waxba dareensiineynin Dadka meesha jooga ayaa Indhodeeq intey Gacanta qabatey oo ku fariisisey Sariir meesha taaley cod gaaban ku tiri iska samir saaxiib.

Ay Suuban ayaa iyana markiiba tiri Walaal soo gala. Aw Warsame iyo Duqdii markiiba qolka ayey galeen, Maryama Luulna xishood ayey la jeesatey, waxayna dareentey Ceeb tii ugu weyneyd. Markii hadana Hooyadeed qolka dhexdiisa uga yeertey ayey si cagojiid ah ku gashey qolkii.

Maandeeq iyo Mahad, Abshir iyo Indhodeeq ayaa waxay ku aqal galeen laba qol oo iska soo horjeeda ee Guri uu Abshir gatey. Ay Cambaro oo kaalin weyn ka qaadatey Iskudubaridka iyo guud ahaanba agaasinka Arooskani ayaa Ay Suuban ka codsatey in ay la sii joogto inta ay Aroosyadani todobada ka baxayaan, Ay Cambarona si hakasho la'aan ah bey u yeeshey codsigaasi. Ayada iyo Ay Suuban waxay si wada jir ah u seexdeen habeenkaas qol xigey geeska Ilinka laga soo galo Guriga, goortii ay ahayd Lixdii Aroornimo oo labaatan la' ayaa Ay Cambaro oo ugu jiifta dhinaceeda midig Sariir Moolo ah nooca loo yaaqaan Turkiga, ayaa waxaa u



bilaabatey Riyadan amakaakgga xambaarsan:-

Maandeeq iyo Indhodeeq ayaa isku mar foolanaya, labadaba waxaa ka muuqata geesinimo iyo adkeysi iney iskaga difaacayaan nabarada falaadha ah ee xanuunka badan. Fooshani Indhodeeq waa Fooshcedii labaad, waxayna kaashaneysaa khibrad hore iyo waayo aragnimo. Maandeeqna waxay kaashaneysaa adkeysi, samir, isku kalsoonaan. Ay Cambaro dadaalkeeda wuxuu u badan yahay dhanka Maandeeq waayo waxay ogeyd in Maandeeq ay Ugub tahay una baahan tahay in lagu eego il gooni ah. Maandeeq waxay ku curatey Wiil. Indhodeeq iyana waxay dhashey Wiil. Waxayna ahaayeen laba Wiil oo aad u qurux badan oo mid walba si aan Caad saarneyn ugu ekaa Aabihiisa.

Ay Cambaro oo aad ugu faraxsan arintan ayaa waxay soo xusuusatey taariikh laba iyo labaatan sano(22) ka hor markii labadani Gabdhood Hooyooyinkooda ay foolanayeen, oo ayadana ay ka umulisey. Waxay in badan u Mahad celisey Ilaahii arintan yeeley, waxayna Faataxo ku akhrisey Labadeedii Gaceyeeley, waxayna Faataxo ku akhrisey Labadeedii Gabdhood iyo Hooyooyinkooda. Ay Cambaro oo weli u socota Riyadan yaabka leh ayaa waxay isu rogtey dhinaceeda kale.

Indhodeeq Wiilkeeda ayaa waxa uu ka Oohin iyo qaylo badan yahay kan Maandeeq. Markii wax kasta lagu dayey oo si kasta la yeeley wuu aamusi diidey, Indhodeeq goortii ay ka daashey aamusiintiisa ayaa si dulqaad la'aan ah dharbaaxo laciif ah afka kaga dhufatey Ubadkeedii yaraa. Ay Cambaro waxay aad uga xanaaqdey falkani oo aan ahayn fal Hooyo fasha, waxayna ku tuurtey Indhodeeq Dharbaaxo xoog badan oo ay uga aareysey Ubadka dembi la'aanta ah.

Ay Cambaro waxay ka soo toostey oo ay ka soo baraarugtey Riyadeedii yaabka badneyd, si fudud beyna u soo fariisatey ayadoo leh Aacuudu Bilaahi mina sheydhaani rajiim, wey saro joogsatey, Saacaddu waa lixdii subaxnimo oo gow ah, waxayna u soo socotey dhanka Albaabka ayadoo saanqaadkeedu culus yahay, waxay si sahlan u furtey Albaabka waxayna soo istaagtey suranka Ilinka looga dego.

Waa Subax Arooryaad ee samaad, Saantuna wey deggan tahay, Samadduna Caad ma laha, Sanqartuna wey gaaban tahay, Salaaduna gaarsiimey leedahay, Shimbiro qurux ku siman oo Saf saf u duulaya qaarkoodna heesaya ayaa Hawada dhex socda. Saatir baa Mahad u sugan, siduu yeelaa haboon baa sancadani xagiisu



tahay. Maandeeq waxa ay ka soo socotaa ka soo horjeedkeeda ayadoo ka soo laabatey Musqusha. Ay Cambaro oo weli Maskaxdeeda si wacan uga saafi noqon Riyadii ay ka soo toostey ayaa waxay si toos ah Indhaheeda ugu qabatey Maandeeq qaarkeed hore, ayadoo ka eegeysa iney Calool buuran tahay oo ay Uur leedahay. Markii ay si fiican ugu Il buuxsatey bidhaan aragtida Caloosheeda ayaa waxaa ay soo xusuusatey in waxa ay aragtey ay ahaayeen riyo dhalanteed ah oo dhabta ka fog. Goortaasey leedahay Alla Riya Boenley waaba i maan wareerisaye Gabalhani Uur ma laha, haddii ay leedahayna waa mid Jaacado ah. Markaasey intey qososhey ay leedahay Istaqfurulah Ilaah baa midaas og oo ku caalim ah.

Ay Cambaro aad ayey u faraxdey markii ay mar labaad si wanaagsan ugu eegtey Maandeeq Indho furan oo ay la socoto Maskax shan iyo afartan jir ah. Waxay aragtey Maandeeq oo midabka jirkeeda si aad ah uu u dhalaalaya, indhaheedana ay ka muuqdaan farxad uu xishood qariyey. "Geel laba jir soo wada mar". Ay Cambaro Uurka ayey ka faraxdey, waxay soo xusuusatey Aqal Soomaaligii ay ku Aqal galeen ayada iyo Odey Aadan lixiyolabatan sano ka

hor. Maandeeq goortii ay soo gaartay halkii ay Cambaro taagneyd ayay intey ku tiri subax wanaagsan eeddo, ayadoo ka dhunkaneysa labada dhabanood. Markii sii dhaaftay ay Cambaro waxay indhaheeda la sii raacday Maandeeq sii jeedkeeda quruxda badnaa soo jiidashada leh ... xxx iyo socodkeeda tashtaashka iyo tamashlaha ah. goortaasey tiri ilaah baa Mahad leh, Mahad baa nasiib badan, Maandeeq baa amaan mudan. Waxaana indhaheeda ka soo daatay ilmo oo ay sababtay farxad, kalgaceyl naxariis iyo dareen waalidnimo.

++++++++++ ++++++++

+++++++ ++++++

+++ '==================' +++

============================

= DHAMAAD =



## MAHAD NAQ

Waxaan jeclahay inaan halkaan mahad ballaaraan uga jeediyo saaxiibkey Maxamuud Xasan Isxaaq, oo gacan weyn ka geystay farsamada buugga si hagar la'aan ahna u garaacay.

Waxaa kaloo halkan mahad uga celinayaa anoo aad ugu mahad celinaya asaxaabteyda kale ah:-

1- Maxamed Axmed (Abuukaato)
2-C/qaadir Baanow Iimaan (Fuud)
3- C/rashiid Yuusuf Xaaji (Shiino)
4- Maxamed C/kariim Xuseen
5- C/qaadir Maxamed Isxaaq (Jaamici)

kuwaas soo igu guubaabiyey inaan qoro sheekadan.

Dhamaan Akhristayaasha sharafta leh oo jecel in ay ii soo jeediyaan fikradahooda, hala soo xiriireen Cinwaanka hoos ku qoran:-

Maandeeq ma filaynin in ay mar kale nolo-
sha ku kulmayaan Maryama. Maryama Luul
waxay ahayd Marwo ilaah qurux ku manaystay,
Maal - Qabeeno ayaa ku tartamay Guurkeeda,
Meherkeeduna ma sahlanayn, Markii ay tiri ,
anigu ma aqaan Masayr iyo nin baa Maya yaq-
aan Dumar baa la murmay oo ka diiday Midd-
aas. Diiriye Jaakoole, oo ahaa ninkeeda
ma moogayn qudhiisu inuu ku jiro midig haw-
een, Laakiin is- Maandhaaf dhacay Maalin
baa wuxuu dhaliyey Murug, Maskax Waayeel
oo la deganayd Meel baa ka soo maaxatay
murtida ah " Naagi Jacaylkaaga Bar baa la
siiyaa", ka dib shil baa dhacay, sheekad-
iina way is bedeshay ò!!